



DAWLADDA FEDERAALKA
SOOMAALIYA

WAR BIXINTA DIB U EEGIDDA
QARANKA EE KOOWAAD (2018-2022)

30 SANO KADIB HORUMARKA
LAGA SAMEEYAY FULINTA
BALLANQAADYADII KA SOO
BAXAY SHIRWEYNAHA
HORUMARKA DADWEYNAHA EE
QAAHIRA (1994)



Macluumaadka ku jira warbixintan dib looma soo saari karo, loomana isticmaali karo hannaan kale sida; elekteroonik ahaan, koobi ama duubis, iyada oo aan loo haysan fasax, laakiin waa laxigan karaa iyadoo la xusayo meesha laga helay warbixinta.

Xigasho:

Hay'adda Istaatistikada Qaranka Soomaaliyeed, Wasaaradda Qorsheynta, Maalgashiga iyo Horumarinta Dhaqaalaha ee Dawladda Federaalka Soomaaliya (2023). Warbixinta Dib-u-eegidda Qaranka ee koowaad (2018-2022) ee Soomaaliya: 30 Sano kadib Horumarka laga sameeyay Fulinta Ballanqaadyadii ka soo baxay Shirweynaha Horumarka Dadweynaha ee Qaahira 1994kii.

Macluumaad dheeri ah oo ku saabsan warbixintan waxaa laga heli karaa:

Hay'adda Istaatistikada Qaranka Soomaaliyeed, Dawladda Federaalka Soomaaliya.

snbs@nbs.gov.so

www.nbs.gov.so


+252-61-4960003 or +252-61-4960004

 @nbs.gov.so

 @nbssomalia

 @nbs_somalia

Warbixintan waxaa soo saaray Dawladda Federaalka Soomaaliya, iyadoo taageero ka heleysa Sanduuqa Dadweynaha ee Qaramada Midoobay ee Soomaaliya iyo deeq bixiyayaasha.



DAWLADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA

WAR BIXINTA DIB U EEGIDDA QARANKA EE
KOOWAAD (2018-2022)

**30 SANO KADIB HORUMARKA LAGA
SAMEEYAY FULINTA BALLANQAADYADII KA
SOO BAXAY SHIRWEYNAHA HORUMARKA
DADWEYNAHA EE QAAHIRA (1994)**

ARAR

Warbixinta dib u eegista horumarka ay Soomaaliya ka samaysay qodobadii ka soo baxay Shirweynihii Caalamiga ahaa ee Qaahira; waa middii ugu horreysay ee nooceeda ah oo ku saabsan horumarka uu dalku ka gaaray fulinta ballanqaadyadii lagu sameeyay shirkii caalamiga ahaa ee dadweynaha iyo horumarinta (SHCDH) ee 1994-kii ka dhacay Qaahira. Warbixintani waxay qiimaynaysaa guulaha, caqabadaha, iyo gol-daloolooyinka fulinta yoolalka Barnaamijka Waxqabadka SHCDH-ka, intii u dhaxeysay 2018-2022, gaar ahaan dhinacyada caafimaadka galmada iyo taranka iyo xuquuqda, sinnaanta jinsiga, awood-siinta haweenka iyo gabdhaha iyo sidoo kale iskaashiyada caalamiga ah.

Warbixintu waxay sidoo kale muujineysaa dadaalka ay dawladda Soomaaliya iyo hay'adaha la shaqeeya ku bixiyeen horumarinta ajendaha SHCDH iyo wax ka qabashada baahiyaha gaarka ah ee haweenka, dhallinyarada iyo dadka nugul. Waxay qeexaysaa siyaasadaha, istiraatiijiyadda, iyo waxqabadyada laga hirgaliyey dhinacyada caafimaadka galmada iyo taranka, kala korinta ilmaha, ka hortagga iyo wax ka qabashada tacadiyada ka dhanka ah jinsiga, waxbarashada, iyo xoojinta dhaqaalaha.

Warbixinta Dib-u-Eegista Horumarka SHCDH ee Soomaaliya waxaa loogu talagaley siyaasad-dejiyeyaasha, ururrada bulshada rayidka ah, iyo dadka ku hawlan horumarinta si ay ula socdaan horumarka, gol-daloolooyinka, iyo in mudnaan ay siiyaan tallaabooyinka hortabinta leh ee lagu dardargelinayo gaaritaanka yoolalka SHCDH ee Soomaaliya. Waxay gacan ka geysaneysaa xoojinta isla xisaabtanka iyo daah-furnaanta hirgelinta Barnaamijka SHCDH ee Waxqabadka iyo Yoolalka Horumarka Waara (SDGs) ee la xiriira xuquuqda aadanaha iyo sinnaanta jinsiga. Warbixintani waxay dib-u-eegis aasaasi ah ku samaynaysaa dadaallada iyo waxqabadyada la xiriira SHCDH, waana qaab lagula soconayo horumarka mustaqbalka ee dalka iyo dib-u-eegista xiriirka ka dhexeeya dadka iyo horumarka.

Mudane Xil. Maxamuud C. Sheekh Faarax (Beenebeene)

Wasiirka Wasaaradda Qorsheynta, Maalgashiga iyo Horumarinta Dhaqaalaha.

MAHADNAQ

Warbiginta Horumarka laga sameeyay SHCDH ee Soomaaliya waxaa lagu soo saaray taageeridda iyo ka qeybqaadashada wasaaradaha iyo hay'adaha Dawladda Federaalka, ururrada bulshada rayidka ah, ururrada haweenka, iyo ururrada naafada ah, iyadoo taageero laga helayo Hay'adda Qaramada Midoobey ee Sanduuqa Horumarinta Dadweynaha (UNFPA).

Khubaradan hoos ku xusan ayaa hagayey dhammaan hababka farsamada iyo diyaarinta qormada koowaad: Cabdiraxmaan Cumar Daahir (Ku-Xigeenka Agaasimaha Guud, Hay'adda Istaatistikada Qaranka), Siciid Cabdilaahi Cabdi (Agaasimaha Waaxda Xogta Arrimaha Bulshada iyo Dadweynaha), Dr. Cabdi Maxamuud Cali (Xiriiriyaha Tirokoobka Dadka & Guryaha Soomaaliyeed), Cabdirasaaq Cabdullahi Kaariye (Madax qaybeedka Diwaangalinta Madaniga iyo Istaatistikada Muhiimka ah ee Waaxda Xogta Arrimaha Bulshada iyo Dadweynaha).

Wasaaradaha iyo hay'adaha muhiimka ah ee Dawladda ayaa ka qeyb galay kulamadii wadatashiga ahaa ee dib u eegista. Marna ma illoobi doono u mahad-celinta kooxdii mihnadaha kala duwan lahayd ee ka kala yimid Wasaaradda caafimaadka iyo adeegga bini aadanka, Wasaaradda qorshaynta, maalgashiga, iyo horumarinta dhaqaalaha, Hay'adda Istaatistikada Qaranka Soomaaliyeed, Wasaaradda shaqadda iyo arimaha bulshadda, Hay'adda Naafadda Qaranka, ururrada haweenka, jaamacadaha iyo ganacsiyadda gaarka ah. Wadatashiyadda, dib-u-eegidda iyo wax ku biirinta qormada koowaad ee warbixinta waxa hogaaminayay: Dr. Cabdulqaadir Weheliye Afrax (La-taliyaha caafimaadka taranka, hooyada iyo dhallaanka ee Wasaaradda Caafimaadka), Dr. Ubax Faarax Axmed (Agaasimaha Waaxda Caafimaadka Qoyska ee Wasaaradda Caafimaadka), Dr. Naciima Cabdulqaadir Maxamed (Khabiir iyo Maamulaha Caafimaadka Hooyada iyo Taranka ee Wasaaradda Caafimaadka), Ibraahim Maxamed Nuur (Khabiir Maareynta Macluumaadka Caafimaadka ee Wasaaradda Caafimaadka), Muuse Maxamed Cusmaan (Agaasimaha Qorsheynta ee Wasaaradda Qorsheynta), Salaad Xuseen Cabdille (Agaasimaha Siyaasadda, Qorsheynta, iyo Cilmi-baarista ee Wasaaradda Shaqada iyo Arrimaha Bulshada), Haashim Cabdinuur (Agaasimaha Waaxda Dhaqaalaha ee Hay'adda Istaatistikada Qaranka), Xamiida Shiil (Isku-duwaha Sahanka Tilmaamayaasha Badan) ee Hay'adda Istaatistikada Qaranka), Cabdiraxmaan Maxamed Sheekh Cabdi (Madaxqaybeedka Socdaalka iyo Barakacayaasha ee Hay'adda Istaatistikada Qaranka), Cabdiwali Xasan Jaamac (La-taliyaha Xiriirka iyo iskaashiga ee Hay'adda Istaatistikada Qaranka), Jaamac Barre Xareed (Statistician, Hay'adda Istaatistikada Qaranka), Cabdicasiis Cabdillaahi Maxamed (Demographer, Hay'adda Istaatistikada Qaranka), Shukri Yusuf Salaad (Khabiirka

Maaliyadda iyo Maamulka ee Hay'adda Tirikoobka Qaranka) iyo Amal Maxamed Abuubakar (Khabiir Qiimeynta iyo Dabagalka, Hay'adda Istaatistikada Qaranka)

Hay'adda UNFPA ayaa bixisay taageero maaliyadeed iyo mid farsamo. Hay'adda Istaatistikada Qaranka waxay uga mahadcelinaysaa Hay'adda UNFPA kaalmada farsamo iyo maaliyadeed ee ay ku bixisay diyaarinta warbiginta SHCDH, waxay si gaar ah ugu mahadcelinaysaa Mudane Niyi Ojuolape (Wakiilka UNFPA ee Soomaaliya) iyo Ku-Xigeenkiisa, Victor Valdivieso dadaalkooda hagar la'aanta ah ee ay ku taageerayaan Dawladda si ay u gaarto yoolalka SHCDH iyo sidoo kale hagista soo saarista warbixinta dib u eegista qaran ee SHCDH ee dalka. Hay'adda Istaatistikada Qaranka waxa ay abaal uga haysaa kooxda ay hogaamiso Maryan Calaawi (khabiir ahna Madaxa Qaybta Dadweynaha iyo Horumarinta ee Hay'adda UNFPA) ka qeybqaadashadooda dib u eegista iyo ansixinta cutubyada kala duwan ee warbixinta: Richard Ng'etich (Khabiir Istaatistikada), Felix Mulama (Demographer), Dr. Axmed Aweys (khabiir Caafimaadka Hooyada iyo Taranka), Cabdixakiim Cabdullaahi (Madaxa Barnaamijyada Dhallinyarada). Dib u eegista faahfaahsan oo dheeraad ah ayaa waxaa sameeyay takhasusayaal mowduuca: Haider Rasheed (Khabiir Kormeer iyo Qiimeyn), Nkiru Igbelina-Igbokwe (Khabiir Jinsiga, UNFPA), Maxamed Mursal (Khabiir Barnaamijyada Xadgudubyada ka dhanka ah jinsiga), Deeqa Galal (Falanqeyye Caafimaadka Taranka) iyo Fartuun Maxamed (Xiriirka warbaahinta, UNFPA).

Hay'adda Istaatistikada Qaranka waxaa kale oo ay aqoonsan tahay taageerada hay'adda Caafimaadka Adduunka (WHO) iyo Sanduuqa Qaramada Midoobey ee caruurta (UNICEF) oo kulanka wadatashiga iyo dib u eegista warbixinta qeyb ka ahaa.

Qorista iyo dib u eegista warbixinta lama gaari laheyn haddii aan la heli lahayn taageerada dhaqaale ee deeq-bixiyayaasha, sida boqortooyadda Ingriiska, Iswiidhan, Fiilaand, iyo Iswiisarlaand kuwaas oo had iyo jeer garab taagnaa shacabka Soomaaliyeed geedi socodka soo kabashadooda.



Sharmaarke Maxamed Faarax

Agaasimaha Guud
Hay'adda Istaatistikada Qaranka

TUSMADA WARBIKINTA

| | |
|--|------------|
| ARAAR | ii |
| MAHADNAQ | iii |
| TUSMADA WARBIKINTA | iv |
| 1. HORDHAC | 2 |
| 1.1. UJEEDOOYINKA DIB-U-EEGISTA QORSHAHA FULINTA EE SHCDH | 4 |
| 2. HABKA DIB-U-EEGISTA WARBIKINTA | 5 |
| 2.1. DIB-U EEGISTA DUKUMENTIYADA | 5 |
| 2.2. DOODAHA WADATASHIGA | 5 |
| 2.3. WARBIKINTA | 5 |
| 3. QAYBTA 1AAD: ASTAAMAHA BULSHADA IYO MACLUUMAADKA DADWEYNAHA | 6 |
| 4. QAYBTA 2AAD: QORSHEYNTA ISTARAATIJIYADDA IYO DADWEYNAHA | 8 |
| 4.1. QORSHEYNTA DADWEYNAHA, KORMEERIDDA HIRGELINTA, IYO QIIMEYNTA BARNAMIYADA DADWEYNAHAA | 8 |
| 4.2. ISKU XIRKA IYO ISKU-DUWIDDA HORUMARINTA DADWEYNAHA | 9 |
| 4.3. QORSHAHA HORUMARINTA QARANKA EE QEYBTA DADWEYNAHA | 9 |
| 4.4. SIYAASADDA IYO ISTIRAATIJIYADDA QARAN EE DADWEYNAHA | 11 |
| 4.5. KU DARIDDA ARRIMAHA DADWEYNAHA QORSHAYAASHA QARANKA | 11 |
| 4.6. AWOODAHA AADAME, MAALIYADEED IYO TIKNOOLIJIYEED, SI ARRIMAHA DADWEYNAHA LOOGU DARO QORSHAHA HORUMARINTA QARANKA | 12 |
| 4.7. WADA SHAQEYNTA IYO ISKU XIRKA ARRIMAHA DADWEYNAHA (URURRADA AAN DAWLIGA AHAYN, URUDADA BULSHADA RAYIDKA AH IYO GANACSIYADA GAARKA LOO LEEYAHAY) | 13 |
| 4.8. TIRAKOUBYADA IYO SAHANNADA DADWEYNAHA IYO GURYAHA LAGA SOO BILAABO 2018KII | 14 |
| 4.9. KEYDINTA XOGTA DADWEYNAHA | 14 |
| 4.10. ISTICMAALKA XOGTA DADWEYNAHA IYO TUSAYAASHA YOOLALKA HORUMARKA WAARA EE DIYAARINTA SIYAASADAHA IYO QORSHAYAASHA DADWEYNAHA | 15 |
| 4.11. ISBEDELLADA MACLUUMAADKA DADKA IYO SAAMEYNTA AY KU LEEYDAHAY HORUMARKA WAARA | 15 |
| 4.12. CAQABADAHA MACLUUMAADKA DADKA | 15 |
| 4.13. HAWLAHA HORTABINTA U LEH HORUMARINTA DALKA IYO DADKA | 15 |
| 5. QAYBTA 3AAD: SHARAFTA IYO SINNAANTA | 17 |
| 5.1. HESHIISYADA XUQUUQDA AADANAHA EE CAALAMIGA AH EE AY DAWLADDA SOOMALIYA ANSIXISAY TAN IYO 2018 KII | 17 |
| 5.2. SIYAASADAHA AMA SHARCIGA LA XIRIIRA QOYSKA EE LA ANSIXIYEY, DIB LOO HABEEYEY, AMA LA DHAQAN GELIYEY TAN IYO 2018 KII | 18 |
| 5.3. SHARCIYADA GUURKA EE DIB LOO HABEEYAY SI LOOGA HORTAGO GUURKA CARUURTA IYO KAN KHASABKA AH | 20 |
| 5.4. SIYAASADAHA AMA ISTIRAATIJIYADAHA QARAN EE LAGULA DAGAALAMAYO SABOOLNIMADA IYO XOOJINTA DHAQAALAHA | 20 |
| 5.5. DIB-U-HABEYN LAGU SAMEYNAYO QEEYBSIGA KHEEYRAADKA DALKA IYO TAAGEERIDDA DADAALLADA HORUMARINTA | 21 |
| 5.6. ISTIRAATIJIYADDA QARAN EE ILAALINTA BULSHADA | 21 |

| | | |
|-----------|--|-----------|
| 5.7 | CAQABADAHA LA DAGAALLANKA FAQRIGA IYO SINNAAN LA'AANTA | 22 |
| 5.8 | WAXYAABAHA TAAGEERAYA LA DAGAALLANKA FAQRIGA IYO SINAAN LA'AANTA | 22 |
| 5.9 | AHMIYADAHA LA DAGAALLANKA FAQRIGA IYO SINNAAN LA'AANTA | 22 |
| 6. | QEYBTA 4AAD: DHALLINYARADA | 23 |
| 6.1. | DIB-U-HABEYNTA SIYAASADDA DHALLINYARADA TAN IYO 2018KII | 23 |
| 6.2 | KU DARIDDA ARRIMAHA DHALLINYARADA SIYAASADAHA DAWLADDA IYO BARNAAMIJYADEEDA | 23 |
| 6.3 | ISTIRAATIJIYADDA QARAN EE DHALLINYARADA, AMNIGA IYO NABADDA | 24 |
| 6.4 | ISKU XIRKA HAY'ADAHA DAWLADDA, SIYAASADAHA IYO BARNAAMIJYADA DHALLINYARADA | 24 |
| 6.5 | DIB-U-HABEYN LAGU HORMARIYO TAYADA WAXBARASHADA IYO KA JAWAABISTA BAAHIDA SUUQA SHAQADA | 26 |
| 6.6 | BARNAAMIJYADA DAMAANADQAADAYA XUQUUQDA SHAQO HUFAN, BIXINAYANA FURSADO SHAQO, KUNA DARAYA DHALLINYARADA BARNAAMIJYADA ILAALINTA BULSHADA | 26 |
| 6.7 | HAL-ABUURKA GANACSIYADA DHALLINYARADA, GANACSIYADA YARYAR IYO KUWA DHEXE | 27 |
| 6.8 | KA QEYBQAADASHADA MADANIGA AH EE DHALLINYARADA | 29 |
| 6.9 | WADA SHAQEYNTA DHALLINYARADA IYO DAWLADDA, BULSHADA RAYIDKA, IYO GANACSIYADA GAARKA LOO LEEYAHAY | 29 |
| 6.10 | QODOBADA GUUSHA | 30 |
| 6.11 | WAXYAABAHA HORTABINTA LEH EE AWOOD SIINAYA DHALLINYARADA | 31 |
| 7. | QEYBTA 5AAD: DADKA NAAFADA AH | 32 |
| 7.1 | ANSIXINTA/WAX KA BEDELKA SHARCIYADDA IYO ISTARAATIJIYADAHA SI WAAFAQSAN AXDIGA QARAMADA MIDOOBEEY EE XUQUUQDA DADKA NAAFADA AH | 33 |
| 7.2 | BARNAAMIJYADA LAGU HORMARINAYO LAGUNA ILAALINAYO XUQUUQDA DADKA NAAFADA AH | 34 |
| 7.3 | XOGTA IYO ISTAATISTIKADA DADKA NAAFADA AH | 36 |
| 7.4 | WADA SHAQEYNTA URURRADA NAAFADA | 37 |
| 7.5 | CAQABADAHA LAGALA KULMO HORUMARINTA XUQUUQDA DADKA NAAFADA AH | 38 |
| 7.6 | MUDNAANTA, DHAWRISTA IYO AWOODSIINTA DADKA NAAFADA AH | 39 |
| 7.7 | FURSADAHA JIRA EE DADKA NAAFADA AH | 39 |
| 8. | QEYBTA 6AAD: CAAFIMAADKA | 41 |
| 8.1. | SHARCIYADA IYO SIYAASADAHA LA MEELMARIYAY AMA WAX LAGA BEDELAY SI WAX LOOGA QABTO BAAHIYAHA XUQUUQDA IYO BIXINTA ADEEGYADA CAAFIMAADKA TARANKA. | 41 |
| 8.2 | ISTARAATIJIYADAHA IYO QORSHAYAASHA LOOGU TALA GALAY BAAHIYAHA LA XIRIIRA XUQUUQDA IYO ADEEGYADA CAAFIMAADKA TARANKA | 42 |
| 8.3 | SHARCIYADA, SIYAASADAHA IYO TALLAABOYINKA LOO QAADAY IN LAGU YAREEYO UURKA XILLIGA HORE IYO JOOJINTA GUDNIINKA FIRCOONIGA AH | 43 |
| 8.4 | BARNAAMIJYADA AMA HABKA LAGU HUBIYO IN LAMAANUHU HELAAN ADEEGYADA IYO MACLUUMAADKA KA CAAWINAYA GO'AANNADA CAAFIMAADKA TARANKA AYAGOO TIXGELINAYA DIINTA, DHAQANKA IYO DASTUURKA DALKA | 44 |
| 8.5 | HABABKA XOOJINTA BIXINTA BALLANQAADYADA ADEEGYADA CAAFIMAADKA TARANKA, XUQUUQDA AADANAHA IYO ANSHAXA | 45 |
| 8.6 | HEERKA KALA KORINTA UBADKA IYO ADEEGYADA CAAFIMAADKA EE DHALMADA | 46 |
| 8.7 | BARNAAMIJYADA AMA TALLAABOYINKA KOR LOOGU QAADAYO RAGGA IYO DHALINYARADU INAY HELAAN MACLUUMAADKA CAAFIMAADKA TARANKA. | 47 |

| | | |
|------------|---|-----------|
| 8.8 | BARNAAMIJYADA AMA TALLAABOYINKA KOR LOOGU QAADAYO IN HAWEENKA IYO GABDHAHA AY HELAAN WARBIXINADA, HAGITAANKA IYO ADEEGYADA TARANKA: | 48 |
| 8.9 | BARNAAMIJYADA AMA TALLAABOYINKA LAGU DHISAYO AWOODDA SHAQAALAHA CAAFIMAADKA SI LOO HORMARIYO ADEEGYADA CAAFIMAADKA TARANKA | 48 |
| 8.10 | SIYAASADAHA IYO BARNAAMIJYADA LAGU DHIIRI GELINAYO AMA LAGU ILAALINO SHAQAALAHA CAAFIMAADKA | 49 |
| 8.11 | HORUMARINTA ADEEGYADA CAAFIMAADKA DHALMADA SI LOO XAQIJIYO YAREYNTA KHARASHKA ADEEGGA DHALMADA | 50 |
| 8.12 | BARNAAMIJYADA LAGU HORUMARINAAYO CAAFIMAADKA DHALLINYARADA OO AY KAMID YIHIIN DHINACA SAYKOLOJIGA IYO LA DAGAALLANKA DHAQAMADA WAXYEELADA LEH,GAAR AHAAN KUWA LA XIRIIRA SIGAARKA, KHAMRIGA, DAROOGADA IYO NABADGELYADA WADOOYINKA | 50 |
| 8.13 | BARNAAMIJYADA LA XIRIIRA KA HORTAGGA, BAARISTA IYO DAWEYNTA HIV/AIDS IYO CUDURRADA KALE EE GOGOSHA LA ISUGU GUDBIYO | 51 |
| 8.14 | SHARCIYADA ILAALINTA XUQUUQDA AADANAHA EE DADKA LA NOOL CUDURKA HIV/AIDS WUXUU MAMNUUCAYAA DHAMMAAN NOOCYADA FAQUUQA IYO TACADDIYADA LAGULA KACO | 52 |
| 8.15 | BARNAAMIJYADA AMA TALLAABOYINKA LAGU ILAALIYO XUQUUQDA DADKA LA NOOL HIV/AIDS WAXAY MAMNUUCAYAAN DHAMMAAN NOOCYADA TAKOORKA IYO XADGUDUBYADA LAGULA KACO | 53 |
| 8.16 | BARNAAMIJYADDA BAR-TILMAAMEEDSANAYA RAGGA IYO DHALLINYARADA EE LA DAGAALANKA XADGUDUBKA GALMADA IYO TACADIYADA KA DHANKA AH HAWEENKA IYO GABDHAHA | 53 |
| 8.17 | SHARCIYADA AMA SIYAASADAHA SI LOO XAQIJIYO IN HAWEENKA IYO DHIBANAYAASHA XADGUDUBYADU AY HELAAN ILAALIN, CAAFIMAAD IYO DARYEEL MASKAXEED, LOONA GUDBIYO HAY'ADAHA AWOODDA U LEH, OO AY KU JIRAAN CAAFIMAADKA, CADAALADDA IYO HAY'ADAHA BOOLISKA | 54 |
| 8.18 | BARNAAMIJYADA AMA HANNAANKA LAGU SUGO IN HAWEENKA IYO DADKA DHIBANAYAASHA U AH XADGUDUBYADA IN AY HELAAN AMMAAN, CAAFIMAAD IYO DARYEEL MASKAXEED, LOONA GUDBIYO HEY'ADDAHA AY KAMIDKA YIHIIN CAAFIMAADKA, CADAALADA IYO BOOLISKA. | 54 |
| 8.19 | BARNAAMIJYADA WAXBARASHADA BULSHADA IYO WACYIGELINTA XUQUUQDA AADANAHA | 55 |
| 9. | QAYBTA 7AAD: ISKAASHIGA CAALAMIGA | 56 |
| 9.1. | HABABKA ISKAASHIGA IYO ISUDUWIDDA DALALKA CARABTA IYO KUWA AAN CARABTA AHAYN EE DHANKA DADWEYNAHA | 56 |
| 9.2 | WADASHAQEYNTA HAY'ADAHA GOBOLKA IYO KUWA CAALAMIGA AH EE HORUMARINTA DADWEYNAHA | 57 |
| 9.3 | ARRIMAHA MUHIMKA AH EE LA XIRIIRA HORUMARKA DADWEYNAHA AYAA AH IN LA SII XOOJIYO WADASHAQEYNTA GOBOLKA | 58 |
| 9.4 | AHMIYADDA HORUMARINTA DADWEYNAHA EE UBAAHAN TAAGEERADA FARSAMADA EE HAY'ADAHA QARAMADA MIDOOBAY | 58 |
| 10. | TIXRAAC | 60 |
| 11. | DADKII QAYBTA KA AHAA SHAQADAN | 62 |

LIISKA EREYADA LA SOO GAABIYAY

| | |
|------------------------|---|
| SHCDH | Shirweynaha Caalamiga ee Dadweynaha iyo Horumarka |
| UNFPA | Hay'adda Qaramada Midoobay ee Sanduuqa Horumarinta Dadweynaha |
| UNESCWA | Guddiga Qaramada Midoobay ee Arrimaha Bulshada iyo Dhaqaalaha ee Galbeedka Aasiya |
| UNFCCC | Heshiiska Qaab-dhismeedka Qaramada Midoobay ee Isbedelka Cimillada |
| UNICEF | Sanduuqa Qaramada Midoobay ee Caruurta |
| WHO | Hay'adda Caafimaadka Adduunka |
| UNOCHA | Hay'adda Qaramada Midoobay u qaabilsan Arrimaha Iskuxirka iyo Iskudubaridka Bani'aadannimada |
| UNWOMEN | Hay'adda Qaramada Midoobay ee Haweenka |
| CEDAW | Heshiiska Ciribtirka Dhammaan Noocyada Takoorka ka Dhanka ah Haweenka |
| MICS | Sahanka Tilmaamayaasha Badan |
| COVID | Cudurka Korona Faayris |
| GEWE | Barnaamijka Sinnaanta Jinsiga iyo Xoojinta Haweenka |
| HIPC | Wadamada Daymuhu Cusleeyeen Ee Saboolka ah |
| UDHR | Baaqa Caalamiga ee Xuquuqda Aadanaha |
| CRPD | Axdiga Qaramada Midoobay ee Xuquuqda Dadka Naafada ah |
| SHF | Sanduuqa Gargaarka Bani'aadannimo ee Soomaaliya |
| SCRIP | Mashruuca soo Kabashada Dhibaataada Soomaaliya |
| EGRIS | Kooxda Khurabarada ee Arrimaha Qaxoontiga, Barakacayaasha iyo Xogta Dadka Wadan-laáanta ah |
| SHINE | Barnaamijka Caafimaadka iyo Nafaqada ee Soomaaliya |
| HSSP | Qorshe Istiraajidiyeedka Caafimaadka ee Soomaaliya |
| PESS | Sahan Qiyaaseedka Dadka Soomaaliyeed |
| SEND & IE | Siyaasadda Waxbarashada ee loo dhan yahay |
| JIPS | Kooxda Isku Dhafka ah ee Talasiinta Dawladaha iyo Ururada aan Dawliga ahayn ee xogta barakacayaasha |
| ICRMW | Axdiga Caalamiga ah ee ilaalinta Xuquuqda Dhammaan Shaqaalaha Qaxootiga ah iyo Xubnaha Qoysaskooda |
| MAPUTO-PROTOCOL | Hab-maamuuska Axdiga Afrika ee Xuquuqda Aadanaha ee ku aadan Xuquuqda Haweenka Afrika |
| ANC | Daryeelka Uurlayda |
| EVC | Adeegga lacagta Danabeysan |
| TVET | Waxbarashada Farsamada Gacanta |
| ICT | Xogta Xiriirka Tiknoolajiyadda |
| FCDO | Xafiiska Arrimaha Dibadda Barwaaqa-sooranka iyo Horumarinta |
| HIQS | Hay'adda Istaatistikada Qaranka Soomaaliyeed |
| QHQ | Qorshaha Horumarinta Qaranka |
| WI&T | Wasaaradda Isgaarsiinta iyo Tiknoolajiyadda |
| WH&HXA | Wasaaradda Haweenka iyo Horumarinta Xuquuqda Aadanaha |
| WSH&AB | Wasaaradda Shaqada iyo Arrimaha Bulshada |
| WDH&IS | Wasaaradda Dhallinyarada iyo Isboortiska |
| GDHQS | Golaha Dhallinyarada Qaranka Soomaaliyeed |

1. HORDHAC



Shirweynihii Caalamiga ahaa ee Horumarinta iyo Dadweynaha (SHCDH) ee ay garwadeenka ka ahayd Qaramada Midoobay waxa la qabtay intii u dhaxaysay 5tii ilaa 13kii Sebtembar 1994kii. Shirku waxa uu ahaa shirkii ugu ballaarnaa ee heerkiisa ah oo ku saabsan dadweynaha iyo horumarka ee abid la qabto, iyada oo ay ka soo qeybgaleen 179 dawladdood iyo illaa 11,000 oo ka qaybgalayaal diiwaangashan ah oo ka kala socday dawlado, hay'adaha Qaramada Midoobay, ururo dawli ah, ururo aan dawli ahayn iyo warbaahinta. Xiisaha iyo ka-qaybgalka bulshada rayidka ahi waxa uu ahaa mid aan hore loo arag.

Waxaa la meel mariyay qorshe fulineed hagi doona hawlaha qaran iyo kuwa caalamiga ah ee dadweynaha iyo horumarinta 20 ka sano ee soo socota. Qorshuhu waxa uu adkeyneyaa xiriirka aan kala go'a lahayn ee u dhexeeya dadka iyo horumarka isaga oo diiradda saaraya baahiyaha shakhsiyaadka ee la jaanqaadaya qaabdhismeedka xuquuqal insaanka caalamiga ah ee la aqoonsan

yahay halkii ay kaliya ka soo bixi lahaayeen yoolalka arrimaha dadka. Qaadashada Barnaamijkan waxa uu muujiyey waji cusub oo ka go'naansho ah si wax looga qabto arrimaha dadweynaha ee horumarinta dhaqan-dhaqaale iyo in la gaaro nolol tayo sare leh ee dhammaan dadka, oo ay ku jiraan kuwa jiilalka mustaqbalka (Qaramada Midoobay, 1995).

Waddamadu waxay sameeyaan dib u eegis ku saabsan hirgelinta barnaamijka SHCDH ee waxqabadka shantii sanaba mar, si ay ula socdaan horumarka, oo ay u aqoonsadaan isbedellada soo baxaya oo muujinaya caqabadaha iyo arrimaha ku saabsan buuxinta ballanqaadyadooda. Dib u eegis lagu sameeyay mid kasta oo ka mid ah munaasabadaha ayaa lagu ogaaday in qorshaha fulinta SHCDH ay wali ku habboon tahay dadka la bartilmaadmeedsanayo oo markaa sabab u ah sii socoshadeeda. Taariikhdu marka ay ahayd Oktoobar 2022, Guddiga Qaramada Midoobay ee Arrimaha Bulshada iyo Dhaqaalaha ee Galbeedka Aasiya (UNESCWA), UNFPA iyo Jaamacadda Carabta

waxay bilaabeen dib u eegista lixaad ee SHCDH ee gobolka, toban sano kadib Bayaankii Qaahira ee 2013, kaas oo dib u cusboonaysiiyay ballanqaadkii Dawladaha xubnaha ka ah barnaamijka waxqabadka 1994 ee SHCDH qorshe ahaan. Hanaanka dib-u-eegista waxaa ka mid ah in la sameeyo hab-raac hagaya si looga caawiyo wadamada diyaarinta warbixinadooda qaran; qabanqaabinta aqoon-isweydaarsiyo kordhinaya awoodda wakiillada wadamada xubnaha ka ah; iyo in la qabto wada hadallo dhinacyo badan leh. Hannaanka dib u eegista gobolka waxaa lagu soo af-jari doonaa shir-weynaha gobolka ee la qabanayo 2023-ka. Nuxurka ka soo baxaya shirka ayaa lagu wargelin doona Xoghayaha Guud ee Qaramada Midoobay si uu u horgeeyo kalfadhiga Konton iyo Toddobaad ee Guddiga Horumarinta Dadweynaha ee kulmi doona Abriil 2024 (Qaramada Midoobay, 2013).

Cimilladu waxa ay ka mid tahay wax yaabaha ugu horreeya ee go'aamiya nolosha qofka Soomaaliga ah; in ka badan rubuc ka mid ah dadku waa xoolo-dhaqato halka waqtiga iyo qaddarka roobabku ay yihiin arrimo muhim ah oo go'aamiya ku filnaanta daaqsinta iyo barwaaqada. Nasiib darro, Soomaaliya aad ayey ugu nugushahay saamaynta isbedelka cimillada iyo xaaladaha cimillada oo aad u daran, sida xilliyo abaareed daba dheeraaday, fatahaad iyo daad, roob-yari, dabaylo xooggan, iyo duufaanno. Iyadoo la aqoonsanayo saamaynta khataraha cimilladu ku yeelan karaan mustaqbalka dalka, Diseember 2009, Soomaaliya waxay saxiixday heshiiska qaab-dhismeedka Qaramada Midoobay ee isbedelka cimillada (UNFCCC). Sannadkii 2013, waxa ay dejisay Barnaamijkeeda Qaranka ee la qabsiga Isbedelka Cimillada. 2015-kii, Soomaaliya waxa ay ka mid noqotay 165-ka waddan ee soo gudbiyay qorshe hawleedkooda ku aaddan wax-ka-qabashada Qaran ee Shir-madaxeedka Paris. Soomaaliya waxa ay sharraxday barnaamijkeeda waxqabad ee ka qeybqaadanaya dhimista qiika iyo la-qabsiga hannaanka wax beerista si loo hagaajiyo u adkeysiga cimillada. Si wadajir ah, Barnaamijka Qaran ee Waxqabadka la qabsiga Isbedelka Cimillada iyo qorshe howleedku waxay diyaariyaan tub si ay u wargeliyaan una hagaagan tabarucaadka farsamo iyo maaliyadeed ee dhammaan daneeyayaasha (Qaabdhismeedka Maamulka Deegaanka iyo Bulshada, 2021).

Soomaaliya ayaa lagu qiimeeyay in ay ka mid tahay dalalka ugu nugul una diyaarsaneyn wax ka qabashada saameynta isbedelka cimillada. Wadarta roobabka da'ay qeybtii hore ee bilaha 4aad ilaa 6aad ee Gu'ga ayaa ah qaar ka mid ah kuwii ugu sarreeyay ee la diiwaan galiyey 1981-2017, oo u dhiganta inta u dhaxaysa 130 ilaa in ka badan 200 boqolkiiba celcelis ahaan. Roobabka mahiigaanka ah ayaa soo af-jaray abaartii daba dheeraatay ee ka jirtay dalka intiisa badan, waxaana ay taageerayaan horumarinta dalagga iyo dib u soo nooleynta daaqa iyo kheyraadka biyaha. Si kastaba ha ahaatee, roobabkii da'ay iyo daadadku waxay sidoo kale keeneen dhimasho, barakac ballaaran, iyo burbur soo gaaray kaabayaasha iyo dhul-beereedka. Baahida ayaa la filayaa inay kororto goobaha barakaca iyo dhulka webiyada muddada dhow (Bangiga Adduunka, 2020).

Soomaaliya waxa ay khibrad u leedahay oo soo maray mawjado barakac ah soddonkii sano ee la soo dhaafay, kuwaas oo ay sababeen dhowr arrimood oo is xigxiga, oo ay ka mid yihiin colaadaha daba dheeraaday, jaha-wareerka cimillada ee soo noqnoqda, fatahaado ku khasbay kumanaan qoys in ay ka baxaan guryahoodii, oo ay lumiyaan shaqadoodii, caruurtoodiina laga saaro dugsiyada. Iska hor imaadyada iyo khatarta cimillada ayaa weli ah sababaha ugu sarreeya ee keena barakaca, iyadoo ay sii kordhayaan dhibaatooyinka cimillada la xiriira oo culeysyo dheeraad ah ku haya bulshada in ka badan soddon sano iyo dagaalka u dhexeeya ciidamada dawladda iyo kooxaha hubaysan sida Al-Shabaab, ayaa weli sii wada inay dadka ku khasbaan inay ka barakacaan guryahooda. Dadka barakacay ayaa inta badan aaday magaalooyinka waaweyn oo aan lahayn awood ay ku noolaadaan markay yimaadaan, barakacayaashu ma haystaan wax kale oo aan ahayn inay guri ka dhistaan dhul bannaan oo gaar loo leeyahay halkaasoo si joogto ah loogu hanjabo in laga saari doono. Sahan lagu sameeyay afar magaalo oo Soomaaliya ka mid ah oo ay ku nool yihiin dadka ugu badan ee barakacayasha ah oo ay sameysay Hay'adda Istaatistikada Qaranka Soomaaliyeed 2022kii ayaa muujiyey in tirada ugu badan ee dadka barakacay ay sababeen abaaro, kuwaas oo gaarayay 70%, waxaana ku xigay dagaallada 23%, iyo fatahaadaha 6%. Qodobbada kale ee sababa barakaca ayaa ka yar 1% (Hay'adda Istaatistikada Qaranka Soomaaliyeed, 2023).

1.1. UJEEDOYINKA DIB-U-EEGISTA QORSHAHA FULINTA EE SHCDH

Ujeeddada ugu weyn ee dib-u-eegista ayaa ahayd in la qiimeeyo horumarka la gaaray iyo caqabadaha ka jira hirgelinta qorshaha fulinta SHCDH ee Soomaaliya. Gaar ahaan, dib u eegista ayaa looga dan lahaa:

1. Qiimeynta heerka fulinta ee qorshaha SHCDH iyadoo xoogga la saarayo sharci dejinta, qaabeynta siyaasadda, aasaasidda qaab-dhismeedka maamulka iyo tallaabooyinka la xaqiijiyay.
2. In la aqoonsado mudnaanta cusub iyo isbedellada soo baxaya.
3. In la qeexo caqabadaha iyo qodobbada suurta gelinaya fulinta ballan-qaadyada iyo dariiqii horay loogu socon lahaa

2. HABKA DIB-U-EEGISTA WARBIKINTA

2.1. DIB-U EEGISTA DUKUMENTIYADA

Khubaro ka kala socda HIQS iyo hay'adda UNFPA ayaa dib u eegis ku sameeyay dukumentiyada shaqada la qabtay wadanka gudahiisa iyo dibadaba. Khubaradu waxay dib u eegeen nuqullo tafatiran oo daabacneyn iyo kuwo daabacan oo ku jira internetka iyo dukumentiyada laga helay mareegaha hay'adaha iyo xafiisyadooda. Dukumeentiyada dib loo eegay waxaa ka mid ahaa Qorshaha Horumarinta Qaranka (QH9), Warbixinta Mashruuca ka Soo-kabashada Dhibaataada Soomaaliya (SCRIP), Qorshaha Istiraatiijiyadeed ee Caafimaadka Soomaaliya 2022-2026 (HSSP III), Qorshaha Istiraatiijiyadda Waxbarashada Qaranka 2022 - 2026, Dukumentiyada Siyaasadaha, Istiraatiijiyadaha, Warbixinnada caalamiga ah ee dib u eegista ee Soomaaliya 2021, Qorshayaasha Waxqabad, Dukumentiyada Barnaamijyada, Warbixinnada sahanada, Warbixinada kale ee dalka ee la daabacay iwm. Tani waxay u sahashay khubarada inay qiimeeyaan guulaha, gol-daloolooyinka, hababka ugu wanaagsan, iyo casharada laga bartay dhaqan gelinta Barnaamijka SHCDH.

2.2 DOODAHA WADATASHIGA

Waxaa magaalada Muqdisho ee caasimadda Soomaaliya lagu qabtay shir labo maalmood socday oo looga hadlayay sidii loo hubin lahaa ka qeybgalka, dib u eegista iyo lahaanshaha daneeyayaasha. Aqoon isweydaarsiga ayaa waxaa ka soo qeyb galay 40 xubnood oo ka kala socday Wasaaradaha Dawladda Federaalka, Ururrada Bulshada Rayidka, Hay'adda Naafada Qaranka, Ururrada Haweenka, Jaamacadaha, ganacsiyada gaarka loo leeyahay iyo Hay'adaha Qaramada Midoobay. Dhammaan wadatashiyada iyo doodaha waxaa hagayey qaabdhismeedka iyo mawduucyada lagu qeexay qaabka dib-u-eegista SHCDH ee ay diyaariyeen UNESCWA iyo UNFPA.

2.3 WARBIKINTA

Hay'adda Istaatistikada Qaranka Soomaaliyeed (HIQS) oo taageero farsamo ka helaysa hay'adda UNFPA ayaa diyaarisay warbixinta dib u eegista SHCDH ee heer qaran. Natiijooyinka ka soo

baxay dukumentiyada dib u eegista iyo shirarka wadatashiga ee lala yeeshay daneeyayaasha kala duwan ayaa lagu soo ururiyay warbixinta dalka. Qabyo qoraalka warbixinta dalka ee la isu geeyay ayaa loogu soo bandhigay daneeyayaasha dood-cilmiiyeed lagu ansixiyay, taladoodana lagu daray warbixinta ugu dambeysa.

Warbixintii ugu dambeysay ee dalka ayaa loo soo bandhigay cutubyo iyadoo la tixraacayo qaabka dib u eegista SHCDH ee ay sameeyeen hay'adaha UNESCWA iyo UNFPA. Cutubka koowaad waxa uu ka hadlayaa astaamaha dadka iyo bulshada. Cutubka labaad oo diiradda saaraya dadweynaha iyo qorsheynta istaraatiijiyadeed; waxa uu ka hadlayaa arrimaha qorsheynta siyaasadaha & barnaamijyada dadweynaha, horumarka heer hay'ad, iyo sidii loo hubin lahaa isku xirnaanta siyaasadda. Cutubka Saddexaad waxa uu ku saabsan yahay Heybadda iyo Sinnaanta, taas oo ka hadlaysa siyaasadaha, hababka, iyo hab-dhaqannada ay dawladdu qaadatay si loo xaqiijiyo nolol hufan oo loo dhan yahay. Cutubkan, waxaa si gaar ah diiradda loogu saaray arrimaha la dagaalanka faqriga iyo sinnaan la'aanta. Cutubka Afraad waxa uu ka hadlayaa Dhallinyarada waxaana uu diiradda saarayaa siyaasadaha iyo tallaabooyinka ay dawladdu qaadayaan ee lagu xoojinayo dhallinyarada rag iyo dumarka qeybna uga noqonayaan hannaanka horumarinta qaranka. Cutubka shanaadna wuxuu ka warramayaa dadka naafada ah, waxaana uu diiradda saarayaa siyaasadda iyo tallaabooyinka ay dawladdu qaadaan si loo ilaaliyo xuquuqda dadka naafada ah, kor u qaadaan helitaanka adeegyada iyo fursadaha iyada oo aan la takoorin, oo lagu daro geedi-socodka horumarinta qaranka. Cutubka Lixaad wuxuu ku saabsan yahay Caafimaadka, wuxuuna diiradda saarayaa siyaasadaha iyo tallaabooyinka ay qaadaan dawladdu si loo xaqiijiyo inay dadku helaan nolol caafimaad leh, iyada oo diiradda la saarayo daboollidda baahiyaha la xiriira xuquuqda taranka iyo adeegyada caafimaadka taranka. Cutubka toddobaad ee u dambeeya waxa uu ka hadlayaa iskaashiga caalamiga ah.

3. QAYBTA 1AAD: ASTAAMAHA BULSHADA IYO MACLUUMAADKA DADWEYNAHA



Tirakoobkii ugu horreeyay ee dadwaynaha iyo guryaha Soomaaliyeed waxaa la sameeyay 1975kii, kaasoo soo saaray natiijooyin aad u yar. Tirakoobkii labaad ee Soomaaliya laga sameeyay waxaa la qabtay sanadkii 1986kii, balse si rasmi ah looma shaacin, sababo la xiriira tayada xogta. Shan sano kadib, burburkii Dawladdii Dhexe ee Soomaaliya ayaa sababay in ay dalka ka qarxaan dagaallo sokeeye oo aad u ba'an, kuwaas oo ay ku naf waayeen dad tiro badan, malaayiin kalana ay dalka ka hayaamaan. Walow ay jiraan dhibaatooyin caafimaad darro oo ay wajahaan haweenka Soomaaliyeed, haddana heerkooda taranka ayaa ah mid aad u sarreeya, taas oo keentay in uu sareeyo kororka dadka. Haddaba, maadaama oo aan lahayn xog lagu kalsoonaan karo si loo qiyaaso isbedbedelka dadka soomaaliyeed, hadana waxaa la iska kaashaday oo la adeegsaday habab kale oo aan sugnayn, si loogu kuurgalo xaaladda dhaqan-dhaqaale iyo tusayaasha caafimaad ee bulshada Soomaaliyeed.

Sahanka Caafimaadka iyo Macluumaadka Dadka Soomaaliyeed (SHDS, 2020) wuxuu muujinayaa in da'da xubnaha qoyska Soomaaliyeed ay dhallinyaradu ku badan tahay, sida ku cad sahankan, boqolkiiba konton iyo shan (55%) xubnaha qoyska

Soomaaliyeed ay ka hooseeyaan da'da 15 sano jirka ah. In ku dhow saddex meelood labo meel dadka Soomaaliyeed waxay da'doodu ka yar tahay da'da 20 jirka ah, qiyaastii afar meelood saddex meelna waxay ka hooseeyaan da'da 30 jirka ah (78%). Dhallinyarada da'doodu u dhaxaysa 15-29 jir waxay xubnaha qoyska Soomaaliyeed ka yihiin labaatan iyo saddex boqolkiiba (23%), halka inta da'doodu tahay 65 sano iyo wixii ka weyn ay boqolkiiba saddex (3%) ka yihiin xubnaha qoyska Soomaaliyeed. Marka la eego da'da shaqada (15-64) Boqolkiiba afartan iyo labo (42%) ayay ka yihiin xubnaha qoyska soomaaliyeed, taas oo muujinaysa baahida loo qabo in la abuurto shaqooyin iyo in la hubiyo in tababarrada iyo waxbarashada la bixinayo ay wax ka taraan baahiyaha suuqa shaqada yaalla. Soomaaliya ayaa ah dal heerkiisa taran uu aad u sarreeyo, iyadoo halkii dumar ah ay dhasho in ku dhow 7 caruur ah, sidoo kale heerka dhalmada guud ee dumarka da'doodu u dhaxayso 15-49 sano ayaa lagu qiyaasaa in ay dhalaan 228 caruur ah kunkii dumar ahiba (Hay'adda Istaatistikadda Qaranka, 2020).

Inkastoo aysan jirin xogo sugan oo laga helay sababaha rasmiga ah ee keenay socdaalka iyo negaansho la'aanta Soomaalida, haddana waxaa

la rumaysan yahay in ay sababaan dhibaatooyin isdul-barkan oo ay ka mid yihiin colaadaha jiidamay, isbedellada cimillada ee soo noqnoqda, iyo fatahaadaha sababay in kumanaan qoys ay hoygooda ka haajiraan oo ay waayaan wax ay quutaan.

Sida muuqata Dawladda Federaalka ah ee Soomaaliya waxay horumar ka samaysay in la gaaro hiigsiga yoolasha shirkii caalamiga ahaa ee horumarinta dadweynaha oo lagu qabtay magaalada Qaahira ee dalka Masar sanaddii 1994kii, iyadoo ku dadaashay oofinta ballanqaadyadii ahaa 20 sano ka hor. Inkastoo heerka dhimashada hooyada Soomaaliya uu weli aad u sarreeyo, haddana waxay hoos uga dhacday halkii ay joogtay sanadkii

2015kii iyadoo 100,000 nolol ku dhasha ay ka dhinteen 732 hooyo, halka sanadkii 2020 ay ka dhinteen 692 hooyo. Dhimashada hooyada ayaa loo sababeyn karaa dhiigbaxa dhalmada ka dib yimaadda, dhiigkar ku dhaca hooyada xilliga uurka & dhalmada kadib, foolwareerka, caabuqa ka dhasha dhalmada kadib, kala-dheerayn-la'aanta dhalmada, adeegga caafimaadka oo yar, iyo hooyada oo aan helin xirfadle caafimaad xiliga dhalmada. Hooyooyinka la kulma xirfadle caafimaad xilliga dhalmada ayaa yar iyadoo ah 31.9%,. Dhanka kale, dumarka kujira da'da dhalmada ee isticmaala hababka maaraynta dhalmada ee casriga ah ayaa ah kaliya 2.1 boqolkiiba (Hay'adda Istaatistikada Qaranka, 2020).

4. QAYBTA 2AAD: QORSHEYNTA ISTARAATIJIYADDA IYO DADWEYNAHA



4.1. QORSHEYNTA DADWEYNAHA, KORMEERIDDA HIRGELINTA, IYO QIIMEYNTA BARNAAMIYADA DADWEYNAHA

Qorsheynta, kormeerridda, hirgelinta iyo qiimeynta barnaamijyada dadweynaha ee Soomaaliya waxaa mas'uuliyaddeeda leh qeybaha kala duwan ee dawladda, hay'addaha caalamiga ah, iyo ururrada bulshada rayidka ah.

Wasaaradda Qorsheynta, Maalgashiga, iyo Horumarinta Dhaqaalaha ee Qaranka waxay mas'uul ka tahay isku xirka, fulinta, isku-dubaridka, daba-galka iyo qiimeynta Qorshaha Horumarineed ee Qaranka, kaas oo ka kooban afar tiir oo kala ah; Dhaqaalaha, Arrimaha Bulshada, Siyaasadda loo Dhanyahay & Amniga iyo Sarreynta sharciga. Haddaba, barnaamijyada dadweynuhu waxay ku hoos jiraan tiirka arrimaha bulshada. Hay'adda Istaatistikada Qaranka Soomaaliyeed (HIQS) waxay dadaal ku bixisaa sidii ay iskugu xiri lahayd, iskuguna duwi lahayd dhammaan xogta dalka iyadoo lala xiriirinaayo istaraatiijiyada horumarineed ee istaatistikada qaranka. Wasaaradda Caafimaadka iyo Addeegga Bulshada ee heer Federaal waxay hogaamisaa siyaasadda caafimaadka, istaraatiijiyadda, hagidda caafimaadka taranka qoyska, iyo sidoo kale adeegga kala dheeraynta dhalimada, taas oo ay ku jiraan in ay qaybiso adeegyada casriga ah ee lagu maareeyo kala dheeraynta dhalimada, iyo sidoo kale adeegyada hooyada uurka leh iyo dhallaanka. Wasaaradda Haweenka iyo Horumarinta Xuquuqda Aadanaha waxay ka shaqaysaa awoodsiinta haweenka, ka hortagga iyo maaraynta tacaddiyada ka dhanka ah haweenka, waxay hormuud ka tahay in la dabargooyo gudniinka fircooniga ah, iyo sidoo kale in la daraaseeyo caqabadaha ay la kulmaan dumarka yaraanta ku guursada iyo xaquuqda

caruurta . Wasaaradda Shaqada iyo Arrimaha Bulshada ayaa iyaduna mas'uul ka ah ilaalinta iyo horumarinta shaqaalaha iyo shaqaalaysiinta dalka si ay qeyb uga noqoto yareynta faqriga iyo sidoo kale in la horumariyo arrimaha dhaqan-dhaqaale ee bulshada. Hay'adda Naafada Qaranka waxay u taagan tahay in ay kor u qaado wacyi gelinta, iyo u qareemidda xuquuqda dadka naafada ah, sidoo kale waxay la dagaallantaa ceebaynta, fikradaha guracan iyo takoorka lagula kaco dadka naafada ah ee bulshada dhexdeeda, iyadoo u soo bandhigta dawladda iyo daneeyayaasha kale ee caalamiga ah si loo daraaseeyo waxna looga qabto caqabadaha iyo dhibaatooyinka ay wajahaan dadka naafada ah.

Hay'adaha Qaramada Midoobay sida UNFPA, hay'adaha aan dawliga ahayn, deeq bixiyayaasha caalamiga ah iyo kuwa horumarka ka shaqeeya waxay dawladda ka taageeraan farsamo iyo dhaqaale ahaan sidii loo fulin lahaa barnaamijyada dadweynaha. Hay'adda UNFPA waxay la shaqaysaa hay'adaha kala duwan ee dawladda oo ay kamid yihiin Wasaaradda Caafimaadka iyo Daryeelka Bulshada, Hay'adda Istaatistikada Qaranka Soomaaliyeed, Wasaaradda Haweenka iyo Horumarinta Xuquuqda Aadanaha, Wasaaradda Dhallinyarada iyo Isboortiga, iyo dhammaan xarumaha fuliya barnaamijyada dadweynaha si loo xoojiyo nidaamka caafimaadka, helitaanka adeegga caafimaadka taranka, taageeridda in la hirgeliyo istaraatiijiyadda horumarinta istaatistikada qaranka, kor uqaadista in ay si siman wax u helaan ragga iyo dumarka, iyo awoodsiinta haweenka, dabargoynta gudniinka fircooniga ah, ka hortagga caqabadaha ay la kulmaan gabdhaha yaraanta ku guursada, bixinta tababarrada si kor loogu qaado xirfadaha dadka. Sidoo kale hay'adaha sida WHO, UNICEF, Hay'adda Qaramada Midoobay ee Haweenka (UNWOMEN) iyo hay'adaha aan

dawlga ahaynba waxay dhaqaale iyo farsamo ahaanba ku taageeraan dawladda si ay u hirgeliso barnaamijyada dadweynaha.

Kormeerka iyo qiimeynta barnaamijyada dadweynaha waxaa uu muhiim u yahay xaqiijinta waxtarkooda iyo saamayntooda. Dawladda iyo hay'adaha aan dawlga ahayn waxay sameeyaan qiimeyn joogta ah, sahanno iyo cilmi baaris si loo qiimeeyo horumarka iyo saameynta barnaamijyada dadweynaha. Hay'adda Istaatistikada Qaranka Soomaaliyeed, Wasaaradda Qorsheynta Qaranka, Wasaaradda Caafimaadka iyo Daryeelka Bulshada iyo sidoo kale hay'adaha kale waxay ururiyaan oo lafo guraan xogta la xiriirta barnaamijyada dadweynaha si ay u fududaato qorsheynta barnaamijka iyo go'aan qaadashada. Kormeeridda iyo qiimeynta waxaa sidoo kale sameeya qiimeeyeyaal madax banaan, oo ay ku jiraan la-taliyayaal, Jaamacado, iyo machadyo cilmi-baariseed, si ay u sameeyaan qiimeyn madax-bannaan oo soo gudbinaysa waxtarka iyo saameynta barnaamijka.

4.2 ISKU XIRKA IYO ISKU-DUWIDDA HORUMARINTA DADWEYNAHA

Isku xirnaanta dadweynaha iyo horumarka Soomaaliya ayaa muhiim u ah xaqiijinta in barnaamijyada dadweynaha ay gacan ka geystaan himilooyinka guud ee horumarka dalka. Dawladda Soomaaliya, hay'adaha caalamiga ah iyo ururrada bulshada rayidka ah ayaa si wadajir ah uga shaqeeya horumarinta, isdhexgalka, tabashooyinka siyaasadaha, qorshayaasha, iyo barnaamijyada horumarineed ee dadweynaha.

Wasaaradda Qorsheynta, Maalgashiga, iyo Horumarinta Dhaqaalaha (WQM&HDH) ayaa mas'uul ka ah isku-dubaridka iyo is-dhexgalka arrimaha dadweynaha ee qorshaha horumarinta qaranka. Qorshaha horumarinta qaranka waxa uu qeexayaa caqabadaha iyo istaraatiijiyadaha lagu wajahayo dadka iyo dalka. Wasaaraddu waxay si dhow ula shaqeysaa wasaaradaha, iyo hay'adaha kale ee dawladda si loo hubiyo in arrimaha dadweynaha lagu daro qorshayaasha iyo barnaamijyada dawladda.

UNFPA iyo hay'adaha kale ee ka shaqeeya horumarka waxay sidoo kale taageeraan is-waafajinta caqabadaha dadweynaha iyo horumarinta siyaasadaha iyo barnaamijyada.

Waxayna kala shaqeeyaan dawladda sidii loo xoojin lahaa awoodda hay'adaha dawladda si ay u qorsheeyaan, u fuliyaan, una kormeeraan barnaamijyada dadweynaha. Waxay kaloo taageeraan horumarinta xogta iyo macluumaadka dadweynaha si ay ugu wargeliyaan siyaasad cad oo ku saleysan qorsheynta barnaamijyada.

Ururrada bulshada rayidka ahi waxay door muhiim ah ka ciyaaraan u ololaynta in lagu daro tabashooyinka dadweynaha arrimaha siyaasadaha iyo horumarinta barnaamijyada. Waxay soo jeediyaan dareenka dawladda iyo caqabadaha soo wajaha dadweynaha, waxayna ku baaqaan in wax laga qabto. Tusaale ahaan, xilliyada masiibooyinka dabiiciga ah sida abaaraha iyo fatahaadaha, waxay la shaqeeyaan dawladda iyo hay'adaha ka shaqeeya horumarinta si kor loogu qaado wacyiga arrimaha dadweynaha iyo kor u qaadidda ka qaybgalka bulshada ee qaabaynta iyo hirgelinta barnaamijyada dadweynaha.

Isku xirka dadweynaha iyo horumarka Soomaaliya ayaa sidoo kale lagu hormariyaa ka qeybgalka shirarka gobolka iyo kuwa caalamiga ah, sida kuwa ay soo qabanqaabiyaan Jaamacadda Carabta, Midowga Afrika, Qaramada Midoobay, Bangiga Adduunka, Bangiga Horumarinta Afrika, Sanduuqa Lacagta Adduunka iwm. Golayaashani waxay bixiyaan fursado lagu wadaago khibradaha, hababka ugu wanaagsan, iyo casharrada laga barto horumarinta barnaamijyada dadweynaha.

Gebagabadii, isku xirka dadweynaha iyo horumarka Soomaaliya ayaa muhiim u ah xaqiijinta in barnaamijyada dadweynaha ay ka qeyb qaataan ajendaha horumarinta guud ee dalka iyo in ay noqdaan kuwo waara mustaqbalka fog. Waxay sidoo kale hubiyaan in yoolalka barnaamijka dadweynaha ay la socdaan dadaallada kale ee horumarinta qaranka iyo kuwa caalamiga ah sida qorshaha horumarinta qaran, himilooyinka horumarka waara iyo Ajendaha Afrika ee 2063.

4.3 QORSHAHA HORUMARINTA QARANKA EE QEYBTA DADWEYNAHA

Qorshaha sagaalaad ee Horumarinta Qaranka Soomaaliya ee hadda jira wuxuu soconayaa muddada 2020-2024, waxaana ku jira qeyb dadweyne oo dhammaystiran oo loogu talagalay in lagu wajaho caqabadaha dadweynaha ee dalka iyo himilooyinka horumarka waara. Qeybta dadweynaha

ee QHQ9 wuxuu ku dhisan yahay QHQ8aad wuxuuna higsanayaa in la dhimo faqriga, kordhinta helitaanka adeegyada aasaasiga ah iyo kor u qaadida kobaca dhaqaale ee loo dhan yahay (Wasaaradda Qorsheynta, 2020).

Qeybta dadweynaha ee Qorshaha sagaalaad ee Horumarinta Qaranka Soomaaliya wuxuu diiradda saarayaa meelaha muhiimka ah ee soo socda:

Macluumaadka iyo isbedelka Dadweynaha:

Qorshaha sagaalaad ee qaranku waxa uu xoogga saarayaa muhiimadda ay leedahay in la fahmo macluumaadka dadweynaha iyo isbedelkooda si loo wargeliyo loona naqshadeeyo qorshayaasha horumarineed. Waxay ujeedadiisu tahay inuu hagaajiyo ururinta, falanqeynta, iyo faafinta xogta dadweynaha si uu u taageero go'aan qaadashada.

Caafimaadka Taranka: Qorshaha sagaalaad ee qaranku waxay ujeedadiisu tahay horumarinta iyo helitaanka adeegyada caafimaadka taranka si loo yareeyo dhimashada hooyada iyo dhallaanka, iyo horumarinta caafimaadka iyo faya-qabka haweenka iyo dhallaanka. Wuxuu aqoonsan yahay muhiimadda ay leedahay wax ka qabashada

caqabadaha dhaqanka ee xaddidaya helitaanka adeegyada caafimaadka taranka.

Horumarinta dhallinyarada: Qorshaha sagaalaad ee qaranku wuxuu adkeynayaa qiimaha ay leedahay in la maalgeliyo horumarinta dhallinyarada si loo yareeyo faqriga, korna loogu qaado kobaca dhaqaale ee waara. Waxay ujeedadiisu tahay in la horumariyo helitaanka waxbarasho, tababaro xirfadeed iyo fursadaha shaqo ee dhallinyarada si loo yareeyo shaqo la'aanta baahsan ee dalka ka jirta.

Sinnaanta jinsiga iyo Xuquuqul Insaanka: Qorshaha sagaalaad ee qaranku waxa uu tilmaamayaa baahida loo qabo in kor loo qaado sinnaanta jinsiga iyo xuquuqda aadanaha si loo yareeyo saboolnimada loona horumariyo yoolalka horumarka waara. Waxay ujeedadiisu tahay in kor loo qaado ka qaybgalka haweenka ee siyaasadda, kordhinta helitaanka waxbarasho iyo fursadaha dhaqaale, iyo in la derso tacaddiyada ka dhanka ah haweenka.

Qaybta dadweynaha ee QHQ9 waxaa uu taageerayaa qaab-dhismeedka kormeerka iyo qiimeynta dhamaystiran oo ay ku jiraan tilmaamayaal gaar ah iyo yoolal lagula soconayo horumarka laga



gaaro ujeedooyinka dadweynaha. Dawladdu waxay la shaqeysaa hay'adaha ka shaqeeya horumarinta iyo ururrada bulshada rayidka ah si ay u ururiyaan xogta oo ay u sameeyaan qiimeyn joogto ah, dib u eegis, iyo daba-galka qaybta dadweynaha si loogu wargaliyo qorsheynta barnaamijka iyo go'aan qaadashada.

4.4 SIYAASADDA IYO ISTIRAATIJIYADDA QARAN EE DADWEYNAHA

Soomaaliya weli ma aysan qaadan siyaasadda dadweynaha oo heer Qaran ah. Si kastaba ha ahaatee, dawladdu waxay garwaaqsatay muhiimadda ay leedahay wax ka qabashada arrimaha dadweynaha, waxayna qaaday tallaabooyin lagu horumarinayo laguna hirgelinayo barnaamijyada iyo hindisayaasha dadweynaha.

2015 kii, dawladda Soomaaliya waxa ay dhaqan galisay Siyaasadda Caafimaadka ee Qaran, taas oo ay ku jiraan in diirrada la saaro hagaajinta adeegga caafimaadka taranka si wax looga qabto heerka sare ee dhimashada hooyada iyo dhallaanka. Intaa waxa dheer, dawladdu waxay la shaqeysaa saaxiibada caalamka si sare loogu qaado helidda adeegga kala-korinta ubadka, kobcinta waxbarashada iyo wacyi-gelinta ku saabsan caafimaadka taranka.

2019 kii, Wasaaradda Qorsheynta, Maalgashiga iyo Horumarinta Dhaqaalaha waxay curisey Qorshaha Horumarinta Qaranka sagaalaad 2020-2024, ujeedadiisu waa wax ka qabashada caqabadaha dadweynaha iyo kobcinta horumarka waara ee dalka. QHQ9 waxaa ku jira u jeedooyin gaar ah iyo istaraatiijiyado lagu kobcinayo caafimaadka taranka, laguna yareynayo dhimashada hooyada iyo dhallaanka, waxna looga qabanayo sinaan la'aanta jinsiga iyo kobcinta horumarinta dhallinyarada.

Iyadoon Soomaaliya wali dhaqan-galin Siyaasadda/Istaraatiijiyadda Qaran ee Dadweynaha oo dhameystiran, dadaalka dawladda ee lagu hagaajinayo caafimaadka taranka ama wax lagaga qabanayo caqabadaha dadweynaha iyadoo la dhaqan gelinayo QHQ9 iyo Siyaasadda Qaran ee Caafimaadka waxay muujinaysaa sida ay uga go'an tahay wax ka qabashada arrimaha dadweynaha iyo dhiirgalinta horumar waara.

2020 kii, Wasaaradda Qorsheynta waxa ay sameysay Istaraatiijiyadda Qaran ee Xalka Waara (2020-2024) oo ay ka qeyb qaateen Madasha Xalka

Waara ee Qaran. Madashu waxa ay isu keentay 14 ha'aydood oo dawli ah taas oo ay siiyeen khibrad farsamo iyo hagd istaraatiijiyadeed oo sarreysa iyo indha-indheeyn, si loo hubiyo xalka waara inay yihiin qaar hor-tabin leh iyo in laga hirgaliyey heerarka kala duwan ee Soomaaliya. Aragtida lagu gaarayo xalka waara ee barakacayaasha waddanka waa mid ku dhisan xog sugan iyo hannaanka wadatashiga loo dhanyahay iyo barnaamij isku dhafan oo nidaamsan.

Istaraatiijiyaddu waxay leedahay afar hadaf oo kala ah:

1. In kor-looqaado adkeysiga saameynta barakaca bulshada iyadoo la hubinayo u sinnaanshaha helida adeegga guud, guryo mudo lagu nagaan karo, iyo barnaamijyada wax looga qabanayo baahiya dadka nugul.
2. In kor-looqaado la-xisaabtanka madaxda ee ku wajahan barakacayaasha iyadoo la hubinayo ka qeyb-qaadashadooda nabadda iyo hannaanka qaran dhiska iyadoo la damaanad qaadayo bad-qabka, amniga iyo helida aqoonsi sharci ah.
3. In kor-looqaado helida nolol maalmeed joogto ah iyo fursado shaqo oo la siinayo barakacayaasha iyadoo loo abuurayo xaalad/jawi ay ku gaarayaan nolol laysku haleyn karo.
4. In kor loo qaado helida cadaaladda iyo sareynta sharciga ee dadka barakacayaasha iyadoo la xoojinayo adeegga garsoorka iyo mida dhaqanka.

4.5 KU DARIDDA ARRIMAHA DADWEYNAHA QORSHAYAASHA QARANKA

Soomaaliya waxay qaaday tallaabooyin ay ugu darayso arrimaha dadweynaha qorshayaasheeda horumarineed. Dawladdu waxay aqoonsatay arrimaha dadweynaha inay yihiin qaar isu-talaw ah iyo inay yeelan karto saameyn heerarka kala duwan, oo uu ku jiro caafimaadka, waxbarashada, shaqaaleynta, jinsiga, dhallinyarada iyo adeegga bulshada. Sidaa darteed, waxay ka shaqeysay ku daridda arrimaha dadweynaha ee qorshayaasha dawladda si loo kobciyo isku-xirka iyo dhameystirka hannaanka wax-ka qabashada caqabadaha dadweynaha.

Qorshaha Horumarinta Qaranka 9aad waxa uu leeyahay istaraatiijiyad qaab-shaqo ballaaran leh oo uu qeyb ka yahay dhinacyada dadweynaha, gaar ahaan waxyaabaha sababa saboolnimada sida maamul xumo, amni-darrada, masiibooyinka dabiiciga ah iyo deganaansho la'aanta siyaasadeed. QHQ waxa uu diiradda saaraa sababaha ugu muhimsan ee keena saboolnimada, iyo yareynta saameynta uu ku leeyahay qoysaska iyo dadka, iyadoo la horumarinayo arrimaha bulshadu u baahantahay, ilaalintooda iyo maareynta khataraha dabiiciga ah.

Intaa waxaa dheer, dawladdu waxay ka shaqaysay in QHQ uu ku jiro qorshayaasha arrimaha dadweynaha. Tusaale, Wasaaradda caafimaadka waxay samaysay istaraatiijiyadda caafimaadka taranka oo kor loogu qaadayo helida adeegga caafimaadka taranka iyo yareynta heerka dhimashada hooyada iyo dhallaanka. Wasaaradda waxbarashadu waxay samaysay siyaasadda qaran ee waxbarashada taas oo qeyb ka ah kobcinta helidda waxbarasho iyo tababarka dhallinyarada. Wasaaradda shaqada iyo Arrimaha Bulshada waxay sameysay siyaasadda qaran ee shaqaaleynta oo u jeedadeedu tahay kobac dhaqaale loo dhan yahay, iyo yareynta faqriga. Sidoo kale, Maamul goboleedyadu waxay leeyihiin qorshayaal horumarineed kuwaas oo hagaya qorshayaasha maamulkooda.

4.6 AWOODAHA AADAME, MAALIYADEED IYO TIKNOOLIJIYEED, SI ARRIMAHA DADWEYNAHA LOOGU DARO QORSHAHA HORUMARINTA QARANKA

Dawladda Federaalka Soomaaliya waxay qaaday tallaabooyin wax-ku-ool ah si ay wax uga qabato arrimaha dadka, maaliyadda, tiknoolijiyadda iyo dhaqaalaha lagama maarmaanka ah si kor loogu qaado horumarka waara. Hase ahaatee, dalku wuxuu wali wajahayaa caqabado waaweyn oo ay kamid tahay sidii arrimaha dadweynaha loogu dari lahaa qorshaha horumarinta qaranka.

Awoodda Aadanaha: Soomaaliya waxay wajahday caqabado ka dhashay dagaalladii sokeeye ee tobanaanka sanno ahaa iyo daganaansho la'aan, taas oo sababtay xirfad la'aanta shaqaalaha iyo xadidnaanta awoodooda hay'adaha dawladda. Hase ahaatee, dawladdu waxay ka shaqaysay dib-u-dhiska awoodda hay'adaha, oo ay ku jiraan qaybaha

caafimaadka iyo waxbarashada, kuwaas oo muhiim u ah wax ka qabashada arrimaha dadweynaha. Tusaale ahaan, dawladdu waxay ka shaqaysay iyadoo la kaashaneyso taageerada caalamiga si loo tababaro xirfadlayaalsha caafimaadka iyo hagaajinta kartidooda si ay u bixiyaan adeeg tayo leh. Illaa iyo 2009kii, hay'adda UNFPA waxay tageertay aasaasida 14 iskuul oo lagu barto umulisanimo oo laga hirgaliyay guud ahaan dalka. Iskuuladaasi hadda waxay bixiyaan tababarro tayo leh oo umulisonimo ah, waxaana kamid ah ardayda isu diiwaangaliyay 600 oo arday oo ka yimid tuulooyinka kuwaas oo markay qalinjabiyeen kadib bixin kara daryeel umuliso oo tayo leh. Ku dhawaad 2,000 oo umuliso ayaa ka qalinjabiyay 14 kaas Iskuul ee ay hay'adda UNFPA taageerto illaa 2009kii, haddana waxay ka shaqeeyaan xarumaha caafimaadka magaaloyinka iyo tuuloyinka dalka Soomaaliya. Sanadkii 2016, Wasaaradda Caafimaadka iyo Daryeelka Bulshada oo ay taageerayso UNFPA waxay dejiyeen manhajka umulisooyinka waxaana dib-u-eegis lagu sameeyay 2021 kii. Waxaana kala shaqeeyay Ururka Kanada ee Umulisooyinka (Canadian Association of Midwives) iyo Jaamacadda British Columbia. UNFPA waxaa kale oo ay taageertay sameynta dokumentiga Istaraatiijiga ah ee Umulisooyinka (2018-2023) (UNFPA, 2022).

Awoodda Maaliyadeed: xilligan Soomaaliya waxay wajahaysaa xannibaado adag oo xaddidaya ilaheeda dhaqaale iyo culays dayn badan. Si kastaba ha ahaatee, dawladdu waxay isku-duba-riday dakhliga gudaha iyadoo loo marayo kordhinta canshuur ururinta sidoo kalana soo jiidanaysa taageero dibadeed iyo maal-gelin lagu tageero ajandaha horumarineed oo ay ku jiraan dadaallada wax looga qabanayo arrimaha dadweynaha. Tusaale, dawladdu waxay kala shaqeysaa saaxiibadeeda caalamka in la joogteeyo kharashka barnaamijyada caafimaadka taranka iyo kuwa kale ee la xiriira dadweynaha.

Dhinaca kale, dalku wuxuu sii wadaa horumarka dib u qaabaynta marka la gaaro bar-dhamaadka hanaanka caalamiga ah ee dayn cafinta bisha November 2023 ee wadamada saboolka ah ee daynta culus lagu leeyahay. Tani waxa ay dib u furi doontaa helida ilo-dhaqaale muhiim ah oo dheeraad ah si loo xoojiyo dhaqaalaha, laguna hagaajiyo xaaladaha bulshada, korna loogu soo qaado nololsha maaliyiin sabool ah.

Awoodda Tiknoolijiyadda: Soomaaliya waxay wajahaysaa caqabado badan taas oo xaddidaysa kaabayaasha tiknoolijiyadda, gaar ahaan miyiga. Hase ahaatee, dawladdu waxay dajisay qaab-wadashaqayn oo lagu nidaaminayo kaabayaasha tiknoolajiyadda. Sanadkii 2017 kii, Dawladda Federaalka Soomaaliya waxay ansixisay Xeerka Isgaarsiinta Qaranka kaas oo lagu aasaasay Hay'adda Isgaarsiinta Qaranka. Xeerkan waxa uu hagaajinayaa suuqa, sidoo kale waxa uu bixinayaa ruqsadaha ay ku shaqaynayaan shirkadaha isgaarsiinta. Sanadkii xigay 2018 kii, iyadoo taageero ka helaya Midowga Isgaarsiinta adduunka, Soomaaliya waxay sameysay Siyaasadda Qaran ee Xogta Tiknoolijiyadda (ICT) iyo Istaraatiijiyadda (2019-2024), taas oo taageeraysa horumar bulsho iyo dhaqaale ee dhanka isgaarsiinta ah (Wasaaradda Isgaarsiinta iyo Teknoolijiyada (WI&T), 2019).

Tan iyo markii ay burburtay dawladdii dhexe ee Soomaaliya 1991 kii, horumarinta tiknoolijiyadda ee dalka waxaa waday ganacsatada. Hadda suuqa waxaa ka shaqeeya 5 shirkadood oo waaweyn oo isgaarsiinta telefoonada ah (Hormuud, Somtel, Golis, Telesom, Nationlink) iyo laba Shabakad Telefoon oo bixiya adeeg internet oo xarig la'aan ah (wireless) (SomNet iyo SomLink). Waxaa jiray bilawgii laba Shabakad oo Shirkado Telefoon ah waxay bixin jireen adeeg hadal iyo interneetba ah, badana magaalooyinka waxaa ka rukuman ku dhawaad afar milyan. Golis Telecom, Telesom, SomNet iyo Hormuud waa kuwo isku xiran, halka Somtel oo ay kaabto Dahabshiil ay isku furan yihiin SomLink. Nationlink waxay haysataa qeyb yar oo suuqa, Somaphone-na dowr muuqda kuma lahan suuqa, in kastoo ay Muqdisho ku leedahay shabakad shaqaysa (Wasaaradda Isgaarsiinta iyo Tiknoolajiyad (WI&T), 2019).

Intaa waxa dheer, madasha Lacagta danabeysan sida (EVC iyo eDahab) ayaa si kordheysa caan u noqday, dadka waxay u ogolaanayaan inay lacag diraan ama helaan, kuna bixiyaan biilasha, iyo helida adeegyo kale oo maaliyadeed iyagoo isticmaalaya telefoonadooda. Lacagta danabeysan waxay noqotay mid muhiim ah oo ku faaftay qaybaha dalka oo dhan ee nidaamka dhaqaalaha Soomaaliya. Ku dhawaad afar meeloodkii sadex meelood (73 boqolkiiba) dadka da'doodu tahay 16 jir iyo wixii ka wayn, waxay isticmalaan Lacagta danabeysan. Qiimaha lacagta danabeysan ee Soomaaliya waxaa lagu qiyaasaa 2.7 billion bishii (Bangiga Aduunka, 2018).

Marka lagu daro isgaarsiinta, waxaa sidoo kale jira dadaallo lagu kobcinayo tiknoolajiyadda waxbarashada iyo wax-currinta ee Soomaaliya. Dhawr urur ayaa la aasaasay si ay u siiyaan tababarro iyo taageero dhallinyarada xiiseynaysa sii-wadashada xirfadooda tiknoolajiyadeed. Tusaale, iRise Hub Muqdisho oo bixisa tababarro koodhinka (Coding) iyo horumarinta mareegta iyo qaar kale oo xirfadaha tiknoolijiyadda ah.

Si kastaba ha ahaatee, wali waxay caqabadi ka taagan tahay u adeegsiga tiknoolijiyadda horumarinta caafimaadka iyo waxbarashada. Tusaale, Iskuulladu wali waxay ku tiirsan yihiin farsamooyinkii hore ee tilmaamida iyo berrida, halka badanaa xarumaha caafimaadku aaney heysan qalab casri ah oo shay-baar ah taas oo bukaanka ku kallifta daryeel caafimaad inuu dalka dibaddiisa u aado.

4.7 WADA SHAQEYNTA IYO ISKU XIRKA ARRIMAHA DADWEYNAHA (URURRADA AAN DAWLIGA AHAYN, URUDADA BULSHADA RAYIDKA AH IYO GANACSIYADA GAARKA LOO LEEYAHAY)

Wada-shaqeynta iyo isku-xirka arrimaha dadweynaha waxay muhiim u yihiin fulinta barnaamijyo iyo hal-abuurro wax ku ool ah. Dawladda Soomaaliya waxay gar-waaqsan tahay muhiimadda ay leedahay iskaashiga daneeyayaasha si wax looga qabto arrimaha dadweynaha loona kobciyo horumarka waara.

Wasaaradda Qorsheynta, Maalgashiga iyo Horumarinta Dhaqaalaha, waxay si dhaw ula shaqeysaa ururrada maxaliga ah iyo kuwa caalamiga ah si loo hubiyo barnaamijyadooda inay yihiin kuwo ku xiran Qorshaha Horumarinta Qaranka. Intaas waxaa dheer, wasaaraddu waxay u gudbisay Baarlamaanka hindise sharciyeed kii hay'adaha aan dawliga ahayn si ay u ansixiyaan. Hindise Sharciyeedkan haddii la ansixiyo wuxuu qeexi doonaa doorka iyo awoodda hay'adaha aan dawliga ahayn sidoo kalana hannaankooda isku-xirka.

Ururrada aan dawliga ahayn iyo ururrada bulshada rayidka ah waxay door muhiim ah ka ciyaaraan adeeg bixinta la xiriirta caafimaadka taranka iyo kobcinta wacyi-gelinta waxbarashada iyo jinsiga, ka hortaga gudniinka fircooniga, bixinta

taakulo dhaqaale, dhiiri-gelinta dhallinyarada iyo wada hadalada nabadda. Sidoo kale waxay bixiyaan taageero farsamo oo qiimo leh oo ay ku caawiyaan barnaamijyada iyo qorshayaasha dawladda. Dawladdu waxay ka shaqeysaa adkaynta la shaqeynta ururradaas iyo sidoo kale saaxiibada caalamka ah sida hay'adda UNFPA, kuwaas oo bixiya taageero ku saabsan barnaamijyada caafimaadka taranka ee Soomaaliya.

Ganacsiyada gaarka loo leeyahay waxay qaataan dowlad muhiim ah oo wax ka qabashada arrimaha dadweynaha ah, gaar ahaan shaqo abuurka iyo horumarinta dhaqaalaha. Dawladdu waxay ka shaqaysaa kobcinta iskaashiga u dhaxeeya dawladda iyo ganacsiyada gaarka ah si loo taageero kororka dhaqaalaha iyo shaqo abuurka, gaar ahaan dhallinyarta, kuwaas oo muhiim u ah dadweynaha Soomaaliyeed. Wasaaradda Qorsheynta, Maalgashiga iyo Horumarinta Dhaqaalaha waxay qabatay shirar maalgashi oo ay isugu keentay maalgashadayaal maxalli ah iyo kuwo caalami ah.

Dawladda Soomaaliya waxay ka shaqaysay adkaynta isku-xirka iyo iskaashiga ka dhex jira daneeyayaasha ku lugta leh arrimaha dadweynaha, oo ay ku jiraan kooxaha horumarinta ka shaqeeya iyo madasha xogta laysku dhaafsado. Madashaasi waxay ka caawisay kobcinta, isku-xirka iyo iskaashiga ka dhex jira daneeyayaasha iyo taageerada hirgelinta barnaamijyo iyo hal-abuurka saameynta leh ee dadweynaha.

4.8 TIRAKOUBYADA IYO SAHANNADA DADWEYNAHA IYO GURYAHA LAGA SOO BILAABO 2018KII

Tan iyo markii ay xornimada ay qaadatay 1960-kii, Soomaaliya waxay samaysay laba tira-koob oo keliya. Tirakoobkii ugu horreeyay ee dadweynaha waxaa la sameeyay 1975kii. Si kastaba ha ahaatee, natiijadii lama daabicin, kaliya warbixin gorfayneed oo ku saleysan natiijadii tirakoobka ayaa la daabacay 1984kii. Tirakoobkii labaad ee dadweynaha waxa la sameeyay 1985-86, haddana natiijadu ma noqon mid la daabacay sababo la xiriiira tayada xogta. Hay'adaha horumarinta ayaa tan iyo markaa sameeyay isku dayo dhawr ah si ay u ururiyaan xog lagu kalsoonaan karo oo ku saabsan tirada dadka iyo tusayaasha dhaqan-dhaqaale. Isku daygii ugu dambeeyay wuxuu ahaa Sahanka Qiyaasta

Dadweynaha ee Soomaaliya 2014kii, kaas oo soo saaray qiyaaso ku saleysan xog ururin ballaaran oo qoyska ah. Sahankan wuxuu bixiyay kaliya qiyaas wadareedka heer qaran iyo mid heer gobol ah.

Dadaalladii xog-ururinta ee dhawaa oo ay ku jiraan sahankii qiyaasta dadweynaha 2014kii, Qiimeynta Helidda iyo Diyaarsanaanta Adeegyada 2016kii, Sahanka Miisaaniyadda Qoyska II 2017kii, Sahanka Muruq Maalka 2019kii, Sahanka Caafimaadka iyo Macluumaadka Dadka Soomaaliyeed 2020kii, iyo Sahanka isku dhafan ee Miisaaniyadda Qoyska Soomaaliyeed 2022kii, waxay bixiyeen xog muhiim ah oo ka jawaabaysa baahiyaha aasaasiga ah ee bini'aadannimo iyo horumarka. Si kastaba ha ahaatee, sahanadan ma dabooli karaan gol-daloolooyinka xogeed ee waaweyn, taas oo lagu heli karo tirakoobka dhamaystiran oo qura. Tirakoobku waa isha kaliya ee xog ka bixin karta sawirka buuxa ee tirada dadka, qaybhooda, iyo sifooyinkooda. Intaa waxaa dheer, tirakoobka ayaa dhaqan ahaan loo arkaa inuu yahay hab lagu horumarin karo laguna tayeyn karo awoodda xafiisyada Istaatistikada wadanka iyo sidoo kale fududeynta helida macluumaad dhameystiran si loo sameeyo sahanada u dhaxeeya laba xili tirakoob.

Marka tan la eego, Tirakoobka Dadweynaha iyo Guryaha soo socda wuxuu noqon doonaa maalgashi muddo dheer muhiim u ah dhammaan nidaamka tirakoobka ee Dawladda Federaalka Soomaaliya oo ay ku jiraan xafiisyada Istaatistikada heer dawlad goboleed, iyo sidoo kale Somaliland.

4.9 KEYDINTA XOGTA DADWEYNAHA

Xogta sahanka dadka iyo qoyska, dokumentiyada iyo warbixinada laxiriira waxaa lagu hayaa mareegaha Hay'adda Istaatistikada Qaranka Soomaaliyeed <https://www.nbs.gov.so/> dadka oo dhanna way heli karaan waana lala soo daga karaa. Si kastaba ha ahaatee, xogta dadweynaha ee la hayo waxay ku saleysan tahay qiyaasaha Sahankii Dadweynaha ee 2014kii oo aan la cusboonaysiin ku dhawaad 10 sano. Waxaa socda qorshayaal lagu samaynayo tirakoobka dadka iyo guryaha ee dalka sanadka 2024/25. Sidoo kale, Hay'adda UNOCHA waxay leedahay madal laga helo xogaha bini'aadannimo <https://data.humdata.org/dataset/cod-ps-som>, taasoo ah madal furan oo lagu wadaago xogta guud

ahaan hay'adaha samafalka. Waxaa xusid mudan in dalku aanu lahayn xogta diiwaanka dadweynaha tan iyo burburkii dawladdii dhexe 1991-kii.

4.10 ISTICMAALKA XOGTA DADWEYNAHA IYO TUSAYAASHA YOOLALKA HORUMARKA WAARA EE DIYAARINTA SIYAASADAHA IYO QORSHAYAASHA DADWEYNAHA

Xogta dadweynaha waxaa loo adeegsadaa horumarinta iyo la socodka qorshayaasha horumarineed ee heer qaran iyo mid maamul goboleed. Waxaa inta badan loo isticmaalaa in lagu ogaado dhibaatooyinka iyo baahiyaha bulshada, dejinta yoolalka iyo ujeedooyinkooda, in la qiimeeyo fursadaha kale ee jira, in loo qoondeeyo dhaqaale qorshaha fulinta, si loo gaaro bartilmaameedka. Tusaale ahaan, xogta sahanka caafimaadka iyo macluumaadka dadka Soomaaliyeed ayaa loo adeegsaday dejinta yoolalka iyo bartilmaameedyada Qorshaha Horumarinta Qaranka iyo Qorshaha Istaraatiijiyadda Qaybta Caafimaadka 2022-2026. Intaa waxaa dheer, xogta sahankaasi ayaa sidoo kale loo adeegsaday horumarinta iyo soo jeedinta mashruuca Bangiga Adduunka ee loo yaqaano Damal Caafimaad. Sidoo kale, xogta dadweynaha ayaa loo adeegsaday diyaarinta warbixinta ikhtiyaariga ah ee dib u eegista qaran ee ugu horreysay ee Himilooyinka Horumarka Waara oo loo gudbiyay Qaramada Midoobay sannadkii hore kaas oo muujinaya horumarka iyo caqabadaha jira. Iyadoo taas laga duulayo Soomaaliya ayaa looga baahan yahay inay diyaariso qorshe guud oo lagu dardargelinayo hirgelinta himilooyinka hormarka waara laguna buuxiyo daldaloollada xogta ee jira si loo gaaro yoolalka caalamiga ah.

4.11 ISBEDELLADA MACLUUMAADKA DADKA IYO SAAMEYNTA AY KU LEEYDAHAY HORUMARKA WAARA

Isbedellada xogta dadka ayaa inta badan ahaa sidii hore sanadihii u dambeeyay iyadoo afar meelood saddex meel dadka ay da'doodu ka hooseysay 30 jir. Dhallinyarada ayaa looga faa'ideysan karaa kobaca dhaqaalaha haddii maalgelin habboon lagu sameeyo waxbarashada iyo fursadaha dhaqaale ee jira. Si kastaba ha ahaatee, shaqo la'aanta dhallinyarada ayaa ah mid aad u sarraysa, iyadoo inta badan dhallinyarada Soomaaliyeed ay yihiin

kuwo aan xuquuqdooda helin. Al-Shabaab ayaa ka faa'ideystay xaaladdan, iyadoo weli ay socoto qorista dhallinyarada si ay uga qeyb qaataan dagaallada ay kula jiraan dawladda iyo ciidamada nabad ilaalinta.

4.12 CAQABADHA MACLUUMAADKA DADKA

Dalka wuxuu hadda wajahayaa xaalado bini'aadannimo oo sii kordhaysa, waxaana sabab u ah abaartii ugu dheerayd uguna darnayd ee la arko muddo ku dhow 40 oo dalka ka dhacda. Abaartan ba'an ee baahsan iyo soo noqnoqoshadeeda xilliyada kala duwan waa mid aan hore loo arag, waxayna daba socotaa roob la'aantii saddex xilli roobaad oo xiriir ah socotay. Tirada dadka ay abaartu saamaysay ayaa ka badan laba jibaar tan iyo bilowgii 2022kii. Barakaca ayaa kordhay shan-laab horraantii 2022kii, iyadoo in ka badan 1.3 milyan oo qof ay ku barakaceen abaarta oo keliya.

4.13 HAWLAHA HORTABINTA U LEH HORUMARINTA DALKA IYO DADKA

Soomaaliya waxay ka mid tahay wadamada dhimashada hooyada ugu sarreysa adduunka, inkastoo ay hoos uga dhacday halkii ay joogtay sanadkii 2015kii iyadoo 100,000 ee nolol ku umusha ay ka dhinteen 732 hooyo, halka sanadkii 2020 ay ka dhinteen 692 hooyo. In kasta oo ay jiraan guulahaas, haweenku wali waxay u dhintaan maalin kasta sababa la xiriira uurka ama dhalnada, ku dhawaad saddex meelood laba meel oo dadkaasi kamid ah waa dadka xaaladaha bani'aadannimada ay saameysay.

Iyadoo lala tashanayo Dawladaha xubnaha ka ah dawladda Federalka iyo bulshada rayidka ah, Wasaaradda Caafimaadka iyo Daryeelka Bulshada waxay soo saartay qorshe-hawleedka 2019-2023 ee Caafimaadka loo dhan yahay sannadkii 2019kii, iyo Siyaasadda Caafimaadka ee Qaranka si loo gaaro arrimaha hortabinta u leh caafimaadka dadweynaha ee ay ka mid yihiin caafimaadka hooyada, dhallaanka, iyo nafaqada. Siyaasadda waxay ujeedadeedu tahay inay xakameyso kana hortagto cudurrada faafa. Sidoo kale, Dawladda Federaalka ee Soomaaliya 16kii Oktoobar 2019kii intii lagu jiray shirkii SHCDH ee Nairobi waxaa ka soo qeybgalay Mudane Maxamed Cabdullaahi Farmaajo, madaxweynihii hore, waxaana ka go'aneyd

in hoos loogu dhigo guud ahaan dhimashada hooyada ee dalka oo dhan 25% marka la gaaro 2030-ka, iyada oo loo marayo tababarka iyo shaqaaleynta 1,000 umuliso oo dheeri ah. Intaa waxaa sii dheer, dawladdu waxay sameysay wacyi gelin bulsho si kor loogu qaado wacyiga ku saabsan kala-dheereynta dhalmada, waxayna sameysay ballanqaad ah inaan loo dulqaadan gudniinka Fircooniga ah iyo xadgudubka ka dhanka ah jinsiga iyo sidoo kalana inay ansixiso Heshiiska Ciribtirka dhammaan Noocyada Takoorka ka dhanka ah Haweenka (UNFPA, 2019).

Iyada oo la raacayo Axdiga Haweenka Soomaaliyeed, Dawladda Soomaaliyaa waxaa ka go'an inaysan u dulqaadan xadgudubka ku saleysan Jinsiga iyo Gudniinka Fircooniga ah ayadoo wax ka qabanaysa waxyaabaha nuglaanta keena iyo xoojinta siyaasadaha iyo qaab dhismeedka sharciga, sida Hindise-Sharciyeedka Gudniinka (kaas oo diyaar ah oo loo gudbin doono baarlamaanka), u qalabeynta saraakiisha agabyada lagama maarmaanka u ah iyaga oo u oggolaanaya inay si ku filan uga jawaabaan kiisaska xadgudubka ka dhanka ah jinsiga marka la gaaro 2030-ka. Intaa waxaa dheer, dawladda waxaa ka go'an inay wax ka qabato arrimaha dadka nugul, gaar ahaan dadka barakacay si looga hortago kiisaska xadgudubka ka dhanka ah jinsiga iyo inay sii kordhaan dhibaatooyinkaas.

Iyada oo ku saleysan Qodobka 26aad ee Baaqa Caalamiga ah ee Xuquuqda Aadanaha iyo Dastuurka Ku-meelgaarka ah ee Soomaaliya oo qeexaya xuquuqda waxbarashada sida ku xusan qodobka 30aad, isagoo sheegaya muwaadin kasta wuxuu xaq u leeyahay inuu helo waxbarasho bilaash ah ilaa dugsiga sare, Soomaaliya waxay mudnaanta siineysaa hormarinta waxbarashada. Istaatistikada heerka dugsiga hoose waxay muujisay in heerka dhameystirka uu ahaa 4 boqolkiiba 2006dii, wuxuuna gaaray 15.5 boqolkiiba sanadkii 2016kii. Heerka dhameystirka dugsiga sare wuxuu ahaa 65.4 boqolkiiba sanadkii 2019kii. Soomaaliya waxay horumarisay akhris-qorista, gaar ahaan haweenka, waxay ahayd 32 boqolkiiba 2006dii, waxayna gaartay 44.4 boqolkiiba dumarka wax barta ee da'doodu ahayd 15-24 sanadkii 2019-ka. Iyada oo qeyb ka ah dadaalkeeda si ay uga dhigto adeegyada waxbarashada mid bilaash ah oo la heli karo

waxbarashada aasaasiga ah ee dhammaan caruurta Soomaaliyeed, Dawladda Federaalka ee Soomaaliya oo ay hogaamineyso Wasaaradda Waxbarashada ayaa horumarisay oo sameysay dib-u-habeeyn waxbarasho oo badan, siyaasado iyo qawaaniin, sida Qorshaha Istaraatiijiyadeed ee Waxbarashada 2018- 2020, Siyaasadda Waxbarashada Qaranka 2020, Waxbarashada Dadka Baahyaha Gaarka ah qaba iyo Siyaasadda Waxbarashada ee loo dhan yahay 2018, Siyaasadda Jinsiga ee Qeybta Waxbarashada 2020, Sharciga Waxbarashada Guud 2021 iyo Siyaasadda Macallinka 2021.

Marka laga hadlayo la tacaalidda saboolnimada, Wasaaradda Shaqada iyo Arrimaha Bulshada ayaa sameysay Siyaasadda Qaran ee Ilaalinta Bulshada 2019 kii, taasi oo ka caawisa Dawladda Federaalka horumarinta iyo hirgelinta aragti cad oo wax ku ool ah oo ku saabsan si bulshada nugul looga ilaaliyo aafuoyinka deg degga ah iyo maareynta khataraha. Wasaaraddu waxay billowday barnaamijka Baxnaano oo loogu talagalay 188,677 qoys oo ka kooban in ka badan hal milyan oo qof oo dadka ugu saboolsan uguna nugul Soomaaliya, iyada oo loo dirayo kaalmo lacageed. Ujeeddada mashruuca Baxnaano waa in qoysaska saboolka ah iyo kuwa nugul la siiyo kaalmo lacageed iyo in la hirgaliyo hannaan bad-qab iyadoo laga jawaabayo aafuoyinka deg degga ah.

Si wax looga qabto arrimaha dadweynaha, waxa loo baahan yahay xogo tayo leh. Si taas loo gaaro, dawladda Soomaaliya waxay qorsheynaysaa inay sameyso tirakoobka dadka iyo guryaha ee 2024/25 iyada oo ay fulinayso Hay'adda Istaatistikada Qaranka Soomaaliyeed. Tirakoobku wuxuu bixin doonaa macluumaad sax ah, waqti ku habboon iyo xog la isku halleyn karo oo ku saabsan macluumaadka iyo astaamaha dhaqan-dhaqaale ee dadka Soomaaliyeed. Xogtu waxay caawin doontaa sameynta siyaasado iyo barnaamijyo horumarineed, iyo sidoo kale la socodka iyo qiimeynta xaaladda dhaqan-dhaqaale ee dadka Soomaaliyeed.

Xogtu waxay caawin doontaa sameynta siyaasado iyo barnaamijyo horumarineed , iyo sidoo kale la socodka iyo qiimeynta xaaladda dhaqan-dhaqaale ee dalka.

5. QAYBTA 3AAD: SHARAFTA IYO SINNAANTA



Qeybtani waxa ay ka hadlaysaa siyaasadaha, hanaanka iyo hab-dhaqanka ay dawladdu qaadatay si loo xaqiijiyo nolol wanaagsan oo dadku u siman yihiin. Qeybtan, waxaa si gaar ah diiradda loogu saaray arrimaha la dagaalanka faqriga iyo sinnaan la'aanta.

5.1. HESHIISYADA XUQUUQDA AADANAHA EE CAALAMIGA AH EE AY DAWLADDA SOOMALIYA ANSIXISAY TAN IYO 2018 KII

5.1.1. DADKA NAAFADA AH

Axdiga Qaramada Midoobay ee Xuquuqda Dadka Naafada ah

Tallaabadii ugu horeysay ee dhinaca xaqiijinta xuquuqaha dadka naafada ah ayaa ka bilaabmatay Heshiiska Hiigsiga Cusub ee Soomaaliya. Natiijadii ugu weynayd ee ka soo baxday heshiiskaas waxay ahayd Dastuurka Federaalka Ku-meel-gaarka ah ee la ansixiyay 2012kii. Dastuurku wuxuu dib u dhisay hay'ado muhiim u ah horumarinta iyo ilaalinta xuquuqda aadanaha, wuxuu ku qotomaa waajibaadka Soomaaliya ee ah ilaalinta heshiisyada gobolka iyo kuwa caalamiga ah (Qodobka 140), wuxuuna qeexayaa ku dhaqanka mabda'a sinnaanta iyo takoor la'aanta ee dadka naafada ah (Qodobka 11).

Soomaaliya ayaa kamid noqotay wadamada u ololeeya xuquuqda naafada, iyo daneeyayaasha

shirka caalamiga ah ee naafada Bishii Luulyo 24, 2018. Intii lagu guda jirey shir madaxeedkaas, Dawladda Federaalka Soomaaliya, iyadoo loo sii marayo Wasaaradda Haweenka iyo Horumarinta Xuquuqul Insaanka waxay la-tashi ballaaran la yeelatay Ururrada Naafada iyo daneeyayaasha kale, ka hor inta aan la samayn ballan-qaadyo la xiriira wax u qabashada dadka naafada ah. Soomaaliya waxay saxiixday in wax kabadal lagu sameeyo Axdigaas, waxayna samaysay siddeed ballan oo mudnaan leh oo dhinacyada soo socda ah: b) Khilaafaadka iyo Xaaladaha Bani'aadannimo, t) Kala saarida xogta, j) Ciribtirka faquuqa iyo takoorka, x) Ka faa'iidsiga tiknoolijiyadda iyo hal-abuurka, kh) Waxbarashada loo dhan yahay, d) helida ilo Dhaqaale r) Haweenka iyo Gabdhaha Naafada ah) iyo in cutubyo ka hadlaya xuquuqda dadka Naafada ah lagu daro dastuurka cusub si loo xaqiijiyo in loo wada dhan yahay ka-qaybgalka siyaasadda iyo hannaanka doorashada

Wax yar kadib ka qeybgalka Shir Madaxeedka, Soomaaliya waxay saxiixday Axdiga Qaramada Midoobay ee Xuquuqda Dadka Naafada ah oo ka dhigaya waddankii 178aad ee Dawlad ahaan saxiixa

Oktoobar 2018. Waxayna ansixisay Agoosto 6, 2019. U doodista iyo ansixintu waxay abuurtay in la xoojiyo horumarinta iyo ilaalinta xuquuqda dadka naafada ah, iyo ka qaybgalkooda siyaasadda iyo doorashada.

5.1.2 DADKA GUDAHA KU BARAKACAY

Axdiga Midowga Afrika ee Ilaalinta iyo Caawinta Barakacayaasha Afrika

Axdiga Midowga Afrika ee Ilaalinta iyo Caawinta Barakacayaasha Afrika ee loo yaqaano Heshiiska Kampala ayuu 26-kii Nofeembar 2019kii saxiixay Madaxweynihii hore ee Soomaaliya Mudane Maxamed Cabdullaahi Farmaajo, kadib markii baarlamaanku ku meel mariyeen cod aqlabiyad leh. Soomaaliya waa Dawladdii 30-aad ee Midowga Afrika xubin ka ah ee ansixisa heshiiskan tan iyo 2009-kii.

Soomaaliya waxay buuxisay dhammaan shuruudihii ku xirnaa ansixinta Axdiga Midowga Afrika ee Ilaalinta Dadka Gudaha ku barakacay “Axdiga Kampala” Guddiga Midowga Afrika ee Addis-Ababa, bishii Maarso 2020-kii.

Natijiyooyinka Istaraatiijiyadda Xalka Waara ee afarta ah waxay muujinayaan in bulshooyinka ay saameeyeen barakaca ay heli karaan cadaalad dhaqameed, mid ku meel gaar ah, iyo mid rasmi ah, oo ku saabsan rabitaanka dadka barakacayasha ah, ee soo celinta guryaha, xuquuqda dhulka iyo hantida, rabshadaha ku saleysan Jinsiga, iyo noocyada kale ee tacaddiyada. Haddaba si loo xaqiijiyo ujeedooyinka Istaraatiijiyadda Xalka Waara, Hay’adda Istaatistikada Qaranka Soomaaliyeed waxay diyaarisay Qorshaha Istaraatiijiyadda Barakacayaasha Gudaha ayada oo taageero ka helaysa JIPS iyadoo ka wakiil ah EGRIS.

Waxaa socda dadaallo lagu ansixinayo:

Axdiga Ciribtirka Takoorka Haweenka Soomaaliyeed wali ma aysan ansixin Soomaaliya. Si kastaba ha ahaatee, Wasaaradda Haweenka iyo Horumarinta Xuquuqul Insaanka ayaa hormuud u ahayd wadatashiyo ay la yeelatay qeybaha kala duwan ee ay quseyso hawshan iyo waddada loo marayo ansixinta Axdiga Ciribtirka Takoorka Haweenka. Wada-tashiyadan ayaa diiradda lagu saaray sidii ay iskaga kaashan lahaayeen daneeyayaasha heshiiskan xuquuqda aadanaha, Soomaaliyana

uga soo bixi lahayd doorkeeda iyo waajibaadka ka saaran ansixinta heshiis kan. Intaa waxaa dheer, 2017kii, Wasiirka Haweenka iyo Horumarinta Xuquuqul Insaanka, waxay la tashiyo kula yeelatay Guddoomiyaha fulinta ee CEDAW oo ah urur u dooda ciribtirka takoorka ka dhanka ah dumarka magaalada New York, shir doceed garab socday oo ay ku yeesheen Golaha loo dhan yahay ee Qaramada Midoobay si ay uga wadhadlaan suurtagalnimada ansixinta Soomaaliya ee heshiiskan iyo sidoo kale dadaallo olole sal-ballaaran loogu sameeyo si loo xaqiijiyo in shacabku fahmaan baahida loo qabo in Soomaaliya ay ansixiso heshiiska xuquuqda aadanaha.

Heshiiska Axdiga Afrika ee Xuquuqda Aadanaha ee ku aadan Xuquuqda Haweenka Afrika (Maputo Protocol)- Soomaaliya waxay bilowday la shaqeynta Midowga Afrika si loo fududeeyo ku biirista iyo ansixinta heshiiskaas iyo heshiisyada kale ee la xiriira.

Axdiga Caalamiga ah ee Ilaalinta Xuquuqda dhammaan Shaqaalaha Muhaajiriinta ah iyo Xubnaha Qoyskooda (ICRMW)- Bishii Jannaayo 2021kii, Soomaaliya waxay billowday hannaanka wadatashi ee ku aadan ansixinta Axdiga Caalamiga ah ee Ilaalinta Xuquuqda Dhammaan Shaqaalaha Muhaajiriinta ah iyo Xubnaha Qoysaskooda.

5.2 SIYAASADAHA AMA SHARCIGA LA XIRIIRA QOYSKA EE LA ANSIXIYEY, DIB LOO HABEYEY, AMA LA DHAQAN GELIYEY TAN IYO 2018 KII

Dejinta Sharciga Xuquuqda Naafada iyo Samaynta Hay’adda Naafada

Soomaaliya waxay samaysay sharci loo dhan yahay oo xuquuqda naafada ah iyadoo la kaashanaysa daneeyayaasha dadka naafada ah ee Soomaaliyeed, kaas oo hadda ku dhow in la meel-mariyo. Intaa ka hor, WH&HXA waxay fududaysay iskuna dubaridday samaynta sharciga lagu dhisayo Hay’adda Naafada Qaranka Soomaaliyeed Diseember 2018kii. Hay’addan qaran waxaa loo igmaday inay wax ka qabato caqabadaha soo wajaha dadka naafada ah, isla markaana ay dawladda kala xisaabtanto ilaalinta xuquuqda dadka naafada ah iyo in la hubiyo ka qaybgalka wax ku oolka ah ee dhammaan dhinacyada bulshada, oo ay ku jiraan maamulka iyo qaybaha horumarinta.

Siyaasadda Barakacayaasha

Dawladda Soomaaliya ayaa sameysay siyaasad cusub oo heer qaran ah oo ku saabsan Barakacayaasha iyo qaxootiga dalka dib ugu soo laabanaya Noofembar 2019kii. Siyaasaddan waxaa wehliya habraaca dib u dejinta dadka laga rarayo goobaha danta guud, iyo deegaan u sameynta dadka qaxootiga ah ee dalka dib ugu soo laabanayaayaa sidoo kale la dajiyay. Hanaanka dib udejinta qaranku waxay bixinaysaa ilaalin sharciyeed iyo habraacyo cad marka ay dhacdo in cid la raro. Siyaasadan ayaa loo baahanyahay si loo taageero soo noqoshada iskood ah, dib-isu-dhexgalka, iyo ku ilaalinta Soomaalida ku soo laabanaysa gobollada xasiloon ee dalka iyo in la horumariyo ilaalinta dadka barakacay. Dad lagu qiyaasay 2.1 milyan oo qof ayaa ku barakacay gudaha dalka.

Siyaasadda Qaranka waxa ay bixisaa qaab-dhismeed lagu raadinayo in laga ilaaliyo dadka - barakacayaasha, iyo qaxootiga dalka ku soo laabanaya - barakicinta khasabka ah, bixinta ilaalinta iyo caawinta inta lagu jiro barakaca iyo in loo helo xal waara barakacooda. Ansixinta Siyaasaddani waxay muujisay aqoonsiga iyo aqbalaadda dawladda mas'uuliyadda ka saaraan in ay xal waara ugu hesho qaxootiga dalka ku soo laabtay iyo barakacayaasha.

Sharciga Xuquuqda Caruurta

Bishii Nofeembar 2017kii, Wasaaradda Haweenka iyo Horumarinta Xuquuqul Insaanka ayaa qaaday tallaabo weyn oo lagu xoojinayo xuquuqda caruurta iyadoo daah-furtay hannaanka qorista Hindise-sharciyeedka Xuquuqda Caruurta si loo sameeyo sharci jideynaya horumarinta iyo ilaalinta dhammaan xuquuqda caruurta ee dalka. Si kastaba ha ahaatee ilaa iyo hadda sharcigan lagama ansixin golaha wasiirrada. Wasaaradda haweenka waxaa ka go'an ansixinta sharciga xuquuqda caruurta ee golaha wasiirrada iyo baarlamaanka. Marka la meel mariyo sharcigan, waxaa uu u damaanad qaadi doonaa mustaqbal wanaagsan dhammaan caruurta Soomaaliyeed maadaama uu wax ka qaban doono xuquuqda aasaasiga ah ee ubadka Soomaaliyeed.

Kadib diyaarinta Hindise Sharciyeedka Xuquuqda Caruurta, Dawladdu waxay guda geli doontaa diyaarinta Qorshaha Waxqabadka Qaran ee carruurta. Dawladaha xubnaha ka ah Dawladda Federaalka waxay sidoo kale ku jiraan heerar kala duwan oo ay ku horumarinayaan Siyaasadaha Ilaalinta Caruurta, waxayna Wasaaradda haweenka ku taageeri doontaa inay is waafajiyaan dukumeentiyadaas heer Federaal iyo kuwa dawlad goboleedyada.



Baarlamaanka Somaliland wuxuu ansixiyay Xeerka Caruurta bishii February 2022kii. Xeerku waxa uu mamnuucayaa dhammaan noocyada xadgudubka iyo dayaca ka dhanka ah caruurta.

Hindise-Sharciyeedka Gudniinka Fircooniga

In kasta oo Dawladda Federaalka Soomaaliya ay ka go'antahay inay meesha ka saarto gudniinka fircooniga ah iyo noocyada kale ee xadgudubyada jinsiga, ilaa hadda ma jiro sharci qaran oo dalka ka jira kaas oo si cad dembi uga dhigaya, ciqaabayana ku dhaqanka ficilladaas. Si kastaba ha ahaatee, Puntland, oo ka mid ah Dawlad Goboleedyada Soomaaliya ayaa 10kii Juun 2021kii meel marisay Hindise Sharciyeedka Dulqaad la'aanta Gudniinka Fircooniga ah. Ku dhawaad haweenka Soomaaliyeed 99 boqolkiiba ayaa la gudahay.

Qorshe hawleedka qaran ee gudniinka Fircooniga ah ee ay taageerto hay'adda UNFPA ayaa la diyaariyey. Si kastaba ha ahaatee, nuqulka ugu dambeeyay lama daabicin. Hay'adaha UNFPA, UNDP, UNICEF iyo UNWomen waxay iska kaashanayaan hirgelinta barnaamijka sinnaanta jinsiga iyo xoojinta haweenka si loo taageero qorshaha istiraatiijiyadda qaran ee tacaddiyada ka dhanka ah haweenka.

5.3 SHARCIYADA GUURKA EE DIB LOO HABEYAY SI LOOGA HORTAGO GUURKA CARUURTA IYO KAN KHASABKA AH

Ma jiro wax heshiis ah oo ka dhexeeya dhinacyada saameeynta ku leh guurka xiliga hore sida culamada iyo hay'adaha kale ee dawladda. Xeerka qoyska ee soo baxay 1975kii ee weli ka jira Soomaaliya wuxuu dhigayaa da'da guurka ee labada Jinsiba in ay tahay 18 sano, intaas waxaa dheer in sharcigu ogol yahay guurka gabdhaha jira 16 sano lkn hela ogolaanshaha mas'uulkooda. Shareecada Islaamka oo ah diinta dalka, waxay sheegaysaa in ragga iyo dumarkaba ay is guursan karaan marka ay qaan gaaraan ama ay baaluqaan.

5.4 SIYAASADAHA AMA ISTIRAATIJIYADHA QARAN EE LAGULA DAGAALAMAYO SABOOLNIMADA IYO XOOJINTA DHAQAALAH

Bishii Janaayo 2016kii, Soomaaliya waxay ku dhawaaqday qorshayaal lagu fulinayo Ajandaha

2030-ka ee Himilooyinka Horumarka Waara iyo iswaafajinta qorshayaasha qaranka, kaas oo ay ku jiraan ballan-qaadyo lagu soo afjarayo dhammaan saboolnimada noocyadeeda kala duwan. Soomaaliya waxaa ka go'an in dhammaan dadkeeda meel kasta oo ay dalka ka joogaan ay helaan nolol wanaagsan iyo inay ilaalisu bulshada danyarta ah iyo kuwa nugul iyo sidoo kale dadka ay sameeyeen colaadaha iyo khataraha dabiiciga inay helaan taageerada ay u baahan yihiin iyo adeegyada asaasiga ah.

Qorshaha Horumarinta Qaranka wuxuu ballan qaadayaa in la yareeyo saboolnimada dalka. Si taas loo gaaro, Istiraatiijiyadda Ku meel gaarka ah ee Yareynta Saboolnimada ayaa la sameeyay si loo yareeyo faqriga. Istiraatiijiyaddu waxay diiradda saaraysaa in la xoojiyo awoodda haweenka iyo sinnaanta bulshada, dhisidda adkeysiga qoysaska iyo bulshada iyo sidoo kale in si wanaagsan loo maareeyo deegaanka iyo kheyraadka dabiiciga ah ee dalka, in mudnaanta koowaad la siiyo xalalka waara ee barakaca muddada dheer, in la xoojiyo xiriirka horumarinta bini'aadannimada iyo in la dhiso awoodda hay'adaha dawladda. Qorshaha Horumarinta Qaranka waxa uu diiradda saarayaa in la adeegsado xeelado xoojinaya xasilloonida siyaasadeed iyo dib-u-heshiisiinta, amniga qaranka iyo ku dhaqanka sharciga iyo horumarinta dhaqaalaha loo dhan yahay.

Marka la eego xaaladda dib u soo kabashada dhaqaalaha Soomaaliya, Dawladda Federaalku waxay gaartay heerka go'aan ka gaarida deyn cafinta iyadoo la raacayo Hindisaha Waddamada Saboolka ah ee Deymahu Cusleeyeen bishii Maarso 2020kii. Tani waxay gebo-gabo u ahayd dadaallada Dawladda Federaalka ah ee lagu xaqiijinayo in deymaha laga cafiyo dalka si uu awood ugu yeesho dib u habeynta iyo dib u dhiska dalka. Dawladda Federaalka waxaa ka go'an in ay ka faa'iideysato fursadaha uu siinayo hindisahan si ay hormar uga sameeyso dib u habeynta dhinacyada amniga ilaalinta xuquuqda aadanaha ee dalka. Istiraatiijiyadda kumeel gaarka ah ee lagu yareynayo Saboolnimada waxay u ogolaanaysaa Soomaaliya in deynta laga cafiyo, Tani waxay noqon doontaa guul muhiim u ah geeddi-socodka yareynta faqriga ee dalka.

5.5 DIB-U-HABEYN LAGU SAMEYNAYO QEEYBSIGA KHEEYRAADKA DALKA IYO TAAGEERIDDA DADAALLADA HORUMARINTA

Soomaaliya waxay gaartay barta go'aan qaadashada ee wadamadda saboolka ah ee deeymuhu cusleeyeen (HIPC) bishii Maarso 2020kii, iyo ineen dib u hesho deeqaha caalamka horayna ugu socoto hanaanka deyn cafiska. Waxay iska bixisay deymihii ay ku lahaayeen Bangiga Horumarinta Afrika, Sanduuqa Lacagta Adduunka, iyo Ururka Horumarinta Caalamiga ah, waxayna hoos u dhigtay deynta dibadda looga lahaa oo gaareysay \$5.3 bilyan lana gaarsiiyey illaa \$3.3 bilyan sanadkii 2021, oo u dhiganta 45 boqolkiiba wax-soo-saarka guud ee dalka (Sanduuqa Lacagta Adduunka, 2020).

Soomaaliya waxay heshiisyo la gashay wadamada deymaha kuleh ee kamid ah Paris Club bishii Maarso 2020kii oo ku saabsan shuruudihii kaga xirnaa deyn cafinta, ee Ururka Horumarinta Caalamiga ah. Si ay u hesho deeyn cafin dhameeystiran waa in ay sameeysaa siyaasado taageeraya hanaan maaliyeed oo hufan ugu yaraan halsano, oo ay dhamaystirto tallaabooyinka siyaasadeed, oo lagama maarmaanka u ah hanaanka deeyn cafinta ee laxariira istaatiijiyadaha kor loogu qaadayo koboc dhaqaale oo loo dhanyahay laguna yareynayo faqriga iyo saboolnimada.

Diseembar 22, 2022kii, Bangiga Adduunka ayaa ansixiyay \$75 milyan oo lagu maalgelinayo Mashruuca Horumarinta iyo Maamul wanaaga Hantida Dawladda, kaasoo ka taageeraya Soomaaliya dowlad dhiska si loo yareeyo habacsanaanta iyo maamul xumadda ka dhex jirta hay'adaha dawladda, iyo sidoo kale xoojinta iyo hormarinta adeegyada ay bixiyaan hay'addaha dawladda. Mashruucaan waxaa iska kaashaday Ururka Horumarinta Caalamiga ah iyo deeq ka timid Sanduuqa Iskaashiga dhinacyada Badan ee Soomaaliya. Ujeedada ugu weyn ee mashruucaan ayaa ah in la xoojiyo isla xisaabtanka, daah-furnaanta, iyo awoodda maamul ee hay'adaha dawladda kuwaas oo qeeyb ka ah mashruucaan kor loogu qaadayo aqoontooda iyo wada shaqeyntooda. Tan waxaa la samayn doonaa iyadoo qorshe dib u habayneed oo waara, oo joogto ah, oo isku xidhan loo dajinayo maamulidda dhaqaalaha dad weynaha iyo khayraadka aadanaha.

Natijiyooyinka wanaagsan ee habkan isku dhafan ee dib-u-habeynta ayaa gacan ka geysan doona in lagu kalsoonaado habka maareynta maaliyadda dalka. Mashruucaan waxa uu sidoo kale bixin doonaa fursad lagu hagaajinayo nidaamka, xirfadaha shaqaalaha, iyo wax ku oolnimada maamulka adeegga bulshada si loo horumariyo awoodda dawladda si ay u gaarsiiso adeegyada muwaadiniinta soomaliyeed (Bangiga Adduunka, 2022).

Barnaamijka Taageerada Dib-u-habaynta Dhaqaale iyo Maaliyadeed waxaa uu bilaabmay bishii Febraayo 2022kii. Barnaamijku wuxuu dhammaystirayaa dadaallada dawladda Soomaaliya ay ku horumarinayso ajandayaasheeda horumarineed (xoojinta nabadda, dardargelinta dhimista saboolnimada iyo u sinnaan la'aanta fursadaha) taas oo kor u qaadeysa maalgelinta loo baahan yahay ee kobcinta kaabayaasha dhaqaalaha. Mashruucaan waxa uu ka kooban yahay laba qeybood oo ballaaran oo kala ah: (1) xoojinta abaabulka dakhliga gudaha iyo maamulka maaliyadda dawladda; (2) horumarinta waaxda maaliyadda. Barnaamijkan waxaa loo qaabeeyey iyadoo Soomaaliya laga sugayo bixinta deymaha; Hannaankan oo ay ay fulinayso Boqortooyada Ingiriiska. Waxay sidookale tixgalinaysaa baahida loo qabo in Bangigu uu dardargeliyo la shaqeyntiisa Soomaaliya, ka-dhaafitaannada deymaha, iyo in la taageero isbedellada dhaqaale iyo midka maaliyadeed ee dalka ka socda. Dhaqangelinta dib-u-habeynta lagu taageerayo barnaamijka ayaa la filayaa in ay u horseeddo Soomaaliya kobac sare, waara oo loo dhan yahay. Hawlgalkan waxaa qeyb ka ah Bangiga Adduunka iyo Sanduuqa Lacagta Adduunka.

5.6 ISTIRAATIJIYADDA QARAN EE ILAALINTA BULSHADA

Wasaaradda Shaqada iyo Arrimaha Bulshada ee Soomaaliya ayaa soo saartay siyaasaddii ugu horreysay ee Qaran ee Ilaalinta Bulshada, taas oo la soo bandhigay bishii Maarso 2019kii. Hannaanka ilaalinta bulshada ee Soomaaliya ayaa looga golleeyahay yareynta nuglaanshaha, sare u qaadida is waafajinta mudnaanta bini'aadannimada iyo horumarka, iyo wax ka qabashada ku tiirsanaanta gargaarka bini'aadannimada. Tani waa mudnaanta koowaad ee Soomaaliya, iyadoo la tixgelinayo masiibooyinka dabiiciga ah ee soo noqnoqda kuwaas saameeyn ba'an ku yeesha bulshada Soomaliyeed. Tani waxay sidoo kale awood u siin doontaa dadka

Soomaaliyeed inay noqdaan kuwo adkeysii leh oo awoodna u leh inay yareeyaan aafuudka ayna raacaan habka yareynta faqriga. Intaa waxaa dheer, siyaasaddani waxay fududeyn doontaa helitaanka adeegyada bulshada ee la hormariyey iyo caawinta iyada oo loo marayo hindiseyaal u adeegga bulshada aadka u nugul, oo ay ku jiraan haweenka, caruurta, dadka naafada ah, barakacayaasha, waayeelka iyo kooxaha kale ee nugul.

Wasaaradda Haweenka iyo Horumarinta Xuquuqda Aadanaha ee Soomaaliya, iyadoo la kaashanaysa jaamacadaha Soomaaliya iyo hay'adda UNICEF, waxay dejisay barnaamijka shahaadada Shaqada Bulshada 2020kii si loo yareeyo saameynta cudurka COVID-19 ee caruurta iyo qoysaska Soomaaliyeed. Ujeedada barnaamijkan waa in la xoojiyo awoodda dawladda iyo ururrada bulshada rayidka ah iyada oo loo marayo tababarka ardayda baratay cilmiga bulshada ee casriga ah, iyaga oo ka jawaabaya Ilaalinta caruurta iyo arrimaha la xiriira rabshadaha ku saleysan jinsiga. Barnaamijka gaarka ah ee COVID-19 wuxuu diiradda saarayaa dhisidda awoodaha ardayda, Shaqaalaha iyo bulshada si ay u ogaadaan oo ay u xakameeyaan faafitaanka COVID-19 isla markiiba. Waxqabadada aasaasiga ah ee barnaamijkan waxaa ka mid ah, (1) wacyi-gelinta, ka-hortagga & hawlaha yaraynta COVID-19, (2) yaraynta iyo ka jawaabista khataraha ilaalinta caruurta SGBV ee ka dhalanaya faafitaanka suurtagalka ah ee COVID-19 ee Soomaaliya, (3) isbedelka hab-dhaqanka ee heerka bulshada, kaas oo isla markaas horseedi doona in la xakameeyo kororka tirada dadka qaba COVID-19, iyo (4) diiwaangelinta kororka iyo hoos u dhaca tirada kiisaska la xiriira iyo Ilaalinta caruurta iyo kordhinta u gudbinta kiisaska hay'adaha ku haboon ee dalka.

5.7 CAQABADHA LA DAGAALLANKA FAQRIGA IYO SINNAAN LA'AANTA

Waxyaabaha sababa faqriga waa ay badan yihiin, waxaana ka mid ah: xasillooni darro siyaasadeed iyo amni, kaabayaasha iyo kobaca dhaqaalaha oo xaddidan, isbedelka cimilada, ku tiirsanaanta hab-nololeedyada soo jireenka ah iwm. Isbedelka cimilada waxa uu sababaa barakac ballaaran, gaajo, nafaqo darro iyo faqri. Nidaamyada loo dejiyey

si wax looga qabto faqriga iyo sinnaan la'aanta, waxay noqon doonaan kuwo aan waxba tarayn haddii aan wax laga qaban arrinta abaaraha iyo fatahaadaha ka dhasha isbedelka cimilada.

5.8 WAXYAABAH TAAGEERAYA LA DAGAALLANKA FAQRIGA IYO SINNAAN LA'AANTA

Qorshaha Ciribtirka Saboolnimada Qaran wuxuu gacan ka geysanayaa in lagu guuleysto yareynta faqriga iyo sinnaan la'aanta Soomaaliya. Qorshahan, waa istaraatiijiyad qaranku leeyahay, waxayna u adeegtaa sidii loo dhiirigelin lahaa dhammaan daneeyayaasha ku lugta leh si loo xaqiijiyo hirgelinteeda. Istaraatiijiyaddan waxay diiradda saaraysaa waxyaabaha ugu waaweyn ee faqriga u horseedaya Soomaaliya oo ay ka mid yihiin: deganaansha la'aanta siyaasadeed, colaadaha, amni-darrada, nidaam la'aanta iyo xaaladaha isbeddelka cimilada. Sidaa darteed, qorshahani waa istaraatiijiyad udub dhexaad u ah wax ka qabashada arrimaha muhiimka ah ee sii waarinaya faqriga Soomaaliya. Waxaa kale oo la dejiyey istaraatiijiyaddan iyada oo lagu saleynayo falanqayn lagu sameeyay guulihii iyo gol-daloolooyinkii istaraatiijiyaddii hore ee ciribtirka faqriga iyo sinnaan la'aanta iyo sidii wax looga baran lahaa caqabadihii hore.

5.9 AHMIYADHA LA DAGAALLANKA FAQRIGA IYO SINNAAN LA'AANTA

Fursadaha kobcinta dhaqaalaha waxay aasaas u noqon doonaan u raadinta xal waara yareynta faqriga iyo nuglaanshaha. Istaraatiijiyadaha shaqo abuurka, waxay si gaar ah muhiim ugu tahay dhallinyarada Soomaaliyeed. Hagaajinta bixinta adeegyada loo dhan yahay ayaa muhiim u ah kor u qaadista awoodda wax soo saarka aadanaha. Kordhinta adkeysiga ayaa loo baahan yahay si loo ilaaliyo nolol maalmeedka qoysaska nugul ee tuulooyinka, loogana hortago abaaraha imaan kara mustaqbalka. Tallaabooyinka noocan ah waxaa ka mid noqon kara caymiska beeraha oo awood u siinaya qoysaska inay dakhli kala duwan helaan, iyo hagaajinta helitaanka waddooyinka iyo biyo nadiif ah.

6. QEYBTA 4AAD: DHALLINYARADA



Qeybtani waxay diiradda saaraysaa siyaasadaha iyo tallaabooyinka ay qadayaan dawladaha si loo awood-siiyo dhallinyarada rag iyo dumarka si ay uga qeyb noqdaan horumarinta qaranka.

6.1. DIB-U-HABEYNTA SIYAASADDA DHALLINYARADA TAN IYO 2018KII

Wasaaradda Dhallinyarada iyo Isboortiga ee Soomaaliya (WDH&IS) ayaa dejisay Siyaasadda Qaran ee Dhallinyarada (2017-2021) taasoo si buuxda uga tarjumeysa baahiyaha dhallinyarada Soomaaliyeed.

Siyaasadda Qaran ee Dhallinyaradu waxa ay leedahay ujeedooyin dhawr ah oo lagu xoojinayo dhallinyarada Soomaaliyeed iyo in la hubiyo ka-qaybgalkooda dawlad dhiska iyo wax-ka-qabashada caqabadaha haysta dhallinyarada, sida b) horumarinta waxbarashada iyo xirfadaha, t) shaqo abuurka iyo kobcinta dhaqaalaha, j) caafimaadka dhallinyarada, x) arrimaha la xiriira ilaalinta badqabka dhallinyarada, kh) ka qeybgalinta dhallinyarada la haybsooco dib u dhiska dalka d) Iyo kor u qaadida mabaadi'da takoor la'aanta ku saleysan (sinnaanta dadka, taageeridda dhallinyarada naafada ah, barakacayaasha, iwm).

Siyaasaddu waxay ku qotontaa muhiimadda ay leedahay wada shaqeyn wax ku ool ah iyo isku-dubbaridka dhammaan daneeyayaasha horumarinta

dhallinyarada si loo hubiyo in dhallinyaradu ay helaan fursado siman oo lagu horumarinayo awooddooda bulsho, dhaqaale iyo siyaasadeed. Sannadkii 2021kii, iyadoo Wasaaraddu kaashanaysa hay'adda UNFPA, waxay dib-u-eegis ku samaysay Siyaasaddii hore, sidoo kalena waxa ay sameysay Siyaasadda Cusub ee Dhallinyarada Soomaaliyeed 2022-2026.

6.2 KU DARIDDA ARRIMAHA DHALLINYARADA SIYAASADHA DAWLADDA IYO BARNAAMIJYADEEDA

Dawladda Soomaaliya waxay ku dartay baahiyaha dhallinyarada barnaamijyada hor-tabinta u leh dawladda si ay u helaan fursadaha dhaqan-dhaqaale, kana qayb qaataan geedi socodka dimuqraadiyadda iyo horumarinta, iyo inay yeeshaan cod xoog leh kana qeyb qaataan horumarinta hay'adaha dawladda.

Qorshaha Horumarinta Qaranka 9aad wuxuu tilmaamayaa dhallinyarada inay ka mid yihiin dadka ugu nugul ee u baahan tixgelin gaar ah. Barnaamijyo farsamada gacanta ah iyo tababarro xirfadeed ayaa

la siin doonaa dhallinyarta, gaar ahaan kuwa nugul. Sidoo kale, Axdiga Haweenka Soomaaliyeed ayaa tilmaamaya fursadaha dhaqaale ee jira, waxaana haweenka Soomaaliyeed iyo dhallinyaradaba ay dhawaan ansixiyeen Istiraatiijiyado Qaran oo si toos ah u saamaynaya arrintan. Waaxyaha ganacsiga qaarkood waxay doorbidaan shaqaaleysiinta dumarka, sida farsamaynta kalluunka iyo tafaariiqlayaasha yar yar (gaar ahaan kuwa aan rasmiga ahayn).

6.3 ISTIRAATIJIYADDA QARAN EE DHALLINYARADA, AMNIGA IYO NABADDA

Dawladda Soomaaliya waxay aqoonsan tahay in dhallinyaradu ku leeyihiin kaalin muhiim ah nabadeynta dalka. Siyaasadda Qaran ee Dhallinyarada waxay leedahay tiir gaar u ah Dhallinyarada, Nabadda iyo Amniga, sidoo kale Wasaaradda dhallinyaradu waxay waddaa qorshe lagu horumarinayo istiraatiijiyad heer qaran ah oo ku saabsan tiirkaas oo fulin doonta siyaasado iyo barnaamijyo dhallinyarada ah si loo fududeeyo ka-qaybgalkooda wax-ku-oolka ah iyada oo loo marayo qorshayaasha qaran iyo kan gobolkaba ee ku aadan Agendaha Dhallinyarada, Nabadda iyo Amniga.

6.4 ISKU XIRKA HAY'ADAHA DAWLADDA, SIYAASADHA IYO BARNAMIJYADA DHALLINYARADA

Wasaaradda Dhallinyarada iyo Isboortiga ayaa mas'uul ka ah horumarinta iyo hirgelinta siyaasadaha, barnaamijyada, iyo mashaariicda horumarinta iyo daryeelka dhallinyarada Soomaaliyeed. Wasaaraddu waxa ay la shaqaysaa hay'adaha kale ee dawladda, ururrada bulshada rayidka ah, iyo saaxiibada caalamka si loo hirgeliyo barnaamijyada iyo hindisayaasha dhallinyarada. Hadda waxaa socda qorshe lagu dhisayo madal dhallinyaro oo isku xirta isuna keenta dhammaan daneeyayaasha ka shaqeynaya horumarinta dhallinyarada Soomaaliyeed.

Golaha Dhallinyarada Qaranka Soomaaliyeed: waa urur aan dawli ahayn oo u taagan danaha dhallinyarada Soomaaliyeed. Waxa uu u adeegaa sida madal u olo-laysa ka-qaybgalka dhallinyarada ee siyaasadda, u doodista, iyo isku-dubbaridka arrimaha saameeya dhallinyarada, oo ay ku

jiraan waxbarashada, shaqada iyo ka-qaybgalka horumarka bulshada.

Madasha Horumarinta Dhallinyarada Soomaaliyeed: waa dallad ay ku mideysan yihiin ururo ay dhallinyaradu hormuud u yihiin oo ka shaqeeya sidii kor loogu qaadi lahaa awoodda iyo horumarinta dhallinyarada Soomaaliyeed. Waxay diiradda saartaa kor u qaadista ka-qaybgalka dhallinyarada ee siyaasadda, u doodista xuquuqda dhallinyarada iyo dhisidda awoodda ururrada ay dhallinyaradu hoggaamiso.

Barnaamijka nolol maalmeedka ee Dhallinyarada Soomaaliyeed: waa hindise ay iska kaashadeen dawladda Soomaaliya, Bangiga Adduunka iyo saaxiibada kale ee caalamka. Waxay ujeedadiisu tahay in dhallinyarada Soomaaliyeed uu siiyo fursado dhaqaale iyadoo loo marayo tababarro, shaqo iyo hal-abuur ganacsi.

Wasaaradda Shaqada iyo Arrimaha Bulshada (WSH&AB) iyadoo tixgelinaysa baahida dhallinyarada waxay dejisay Siyaasadda Shaqaaleynta Qaranka taasoo kor u qaadaysa fursadaha shaqo ee hufan oo leh saddex ujeedo oo waaweyn: 1) In la qeexo lana tayeeyo qeybaha muhiimka ah ee fursadaha shaqo, 2) Horumarinta ganacsiyada yaryar iyo kuwa dhexe 3) Iyo in la dhiso nidaam iyo maamul shaqo oo kormeera iskuna dubbarida shaqada dawladda. Wasaaradda ayaa sidoo kale hirgelisay barnaamijka shaqo abuurka dhallinyarada ee sanadihii 2018-2020kii kaas oo ay si wada jir ah u fuliyeen hay'adaha Qaramada Midoobay iyo Dawladda Federaalka.

Dhanka horumarinta xirfadaha dhallinyarada, Wasaaraddu waxay ka dhistay Soomaaliya saddex xarumood oo lagu barto farsamada gacanta sida magaalooyin kamid ah Somaliland, Putland iyo Jubaland.

Barnaamijka Shaqaaleysiinta Qaranka: Barnaamijkan hadda waa uu socdaa, waxaana la sameeyay qiimeyn ku saabsan baahiyaha dhallinyarada, waxaana natiijadii hordhaca ahayd loo soo bandhigay dhinacyada ay khusayso taariikhda markii ay ahayd 11-12 Maarso ee sanadkan 2023ka. Barnaamijkan ayaa ujeedadiisu tahay sidii fursado shaqo loogu abuur lahaa dhallinyarada.

Intaa waxaa dheer, WSH&AB waxay samaysay Siyaasadda Caafimaadka iyo Badbaadada Shaqada

si ay u nidaamiso dhammaan hawlaha maareynta bad-qabka iyo khatarta caafimaadka ee goobaha shaqada iyo inay bixiso tallaabooyin lagu hubinayo bad-qabka iyo faya-qabka ragga iyo dumarka ee goobaha shaqada.

Dhinaca kale, waxaa la sameeyay xeerka shaqaalaha kaasoo ilaalinaya xuquuqda shaqaalaha maadaama inta badan dadka shaqeeya ay yihiin dhallinyaro. Waxay kaloo xallisaa khilaafyada ka dhasha heshiiska shaqo ee u dhexeeya loo shaqeeyaha iyo shaqaalaha.

Dhanka kor u qaadida nolol maalmeedka dhallinyarada, Wasaaradda shaqadu waxay aasaastay Xarunta Adeegga Shaqaalaysiinta

Qaranka ayada oo kaashanaysa Hay'adda Save the Children. Xaruntu waxa ay bixisaa laba shaqo oo waaweyn: 1) In la fududeeyo is-waafajinta shaqo-doonka iyo loo sahqeeyaha 2) iyo in kor loo qaado xirfadaha dhallinyarada la tababarayo si ay uga qayb-qaataan suuqa shaqada.

Isku soo wada duuboo, 600 oo dhallinyaro ah ayaa la baray xirfado la suuq geyn karo sida tamarta dib loo cusboonaysiiyo, dhismaha, nijaarnimada (faryaamo), iyadoo ku dhawaad boqolkiiba sodon ka mid ahi ay galeen suuqa shaqadda. Intaa waxaa dheer, xaruntu waxay qorsheyneysaa inay 2000 oo dhallinyaro ah u tababarto hal-abuurka ganacsiga sida korontada, naqshadeynta mareegaha iyo makaanikada.



Barnaamijka Qaramada Midoobay ee la shaqeeya Dhallinyarada Soomaaliyeed: waxa uu la shaqeeyaa hay'adaha maxalliga ah iyo kuwa caalamiga ah si ay u taageeraan dadaallada horumarinta dalka. Waxaa uu diiradda saarayaa horumarinta iyo ka-qaybgalka dhallinyarada nabad-dhiska, hal-abuurka ganacsiga, waxbarashada iyo ka-qaybgalka arrimaha madaniga ah.

Hay'adahani waxay door muhiim ah ka ciyaaraan isku xirka siyaasadaha iyo barnaamijyada loo qabanayo dhallinyarada Soomaaliyeed. Si kastaba ha ahaatee, colaadaha iyo nabad la'aanta dalka ka jirta ayaa caqabad weyn ku ah dadaallada lagu horumarinayo dhallinyarada, waxaana loo baahan yahay in wax badan laga qabto sababaha keenay faquuqidda iyo awood la'aanta dhallinyarada..

6.5 DIB-U-HABEYN LAGU HORMARIYO TAYADA WAXBARASHADA IYO KA JAWAABISTA BAAHIDA SUUQA SHAQADA

Dawladda iyo daneeyayaasha kale waxay wadeen dib u habeyn kor loogu qaado tayada waxbarashada iyo ka jawaabista baahiyaha suuqa shaqada. Waa kuwan qaar ka mid ah:

Qorshaha Istaraatiijiyadda Waxbarashada: Qorshaha Istaraatiijiyadeed ee Waxbarashada waa qaab-dhismeed ay soo diyaarisay dawladda Soomaaliya oo kaashanaysa dhinacyada ay khusayso, oo ay ku jiraan hay'adaha UNICEF iyo Global Partnership for Education, si loo sameeyo dib-u-habeynta waxbarashada. Qorshahani wuxuu hiigsanayaa inuu horumariyo helidda waxbarasho tayo leh, xoojinta awoodda nidaamka waxbarashada, iyo hubinta in waxbarashadu ay la jaanqaado baahida suuqa shaqada.

Waxbarashada Farsamada Gacanta (TVET): Dawladda Soomaaliya oo kaashanaysa hay'ado caalami ah ayaa waday horumarinta iyo hirgelinta barnaamijyada TVET-ka si loo helo xirfado iyo aqoon ku habboon dhallinyarada iyo dadka waaweyn. Barnaamijyada TVET-ka waxa ay diiradda saaraan qeybo kala duwan sida beeraha, dhismaha, caafimaadka, IWM.

Dib-u-habeynta Manhajka: Dawladda Soomaaliya waxay waday dib-u-habeyn lagu samaynayo manhajka waxbarashada si kor loogu qaado tayada

waxbarashada iyo in la waafajiyo baahida suuqa. Manhajka cusub wuxuu xooga saarayaa horumarinta fikirka, xallinta khilaafaadka iyo xirfadaha xiriirka.

Tababarka Macallimiinta: Dawladda Soomaaliya iyo Hay'ado caalami ah ayaa muddooyinkan waday tababarro dhanka macallimiinta ah si kor loogu qaado tayada waxbarashada iyo dugsiyada. Barnaamijyada tababarrada waxay ujeedadoodu tahay in la baro macallimiinta xirfadaha iyo aqoonta lagama maarmaanka ah si ay u bixiyaan waxbarasho tayo leh.

Kaabayaasha Waxbarashada: Dawladda Soomaaliya oo taageero ka helaysa saaxiibada caalamka, waxa ay dhistay dugsiyo cusub, sidoo kale waxa ay dib u dayactir ku samaysay iskuullada, si loo horumariyo helitaanka waxbarashada.

Dib-u-habeyntan waxbarasho ayaa looga dan leeyahay in lagu horumariyo tayada waxbarashada iyo in la waafajiyo baahida suuqa shaqada ee Soomaaliya. Si kastaba ha ahaatee, hirgelinta dib-u-habeyntan ayaa wajahaysa caqabado waaweyn, oo ay ku jiraan amni-darro, dhaqaale la'aan, iyo awoodda hay'adaha dawladda oo xaddidan. Waxaa loo baahan yahay in wax badan laga qabto caqabadahan si loo xaqiijiyo in dhammaan ubadka Soomaaliyeed ay helaan waxbarasho tayo leh iyo xirfadaha lagama maarmaanka ah si ay uga qeyb qaataan horumarka dalkooda.

6.6 BARNAAMIJYADA DAMAANADQAADAYA XUQUUQDA SHAQO HUFAN, BIXINAYANA FURSADO SHAQO, KUNA DARAYA DHALLINYARADA BARNAAMIJYADA ILAALINTA BULSHADA

Soomaaliya ayaa ka mid ah dalalka ugu saboolsan caalamka, waxaana dadkeeda dhallinyarada ah ay la kulmeen caqabado badan oo ku aadan helidda fursado shaqo oo hufan. Dawladda iyo hay'adaha caalamiga ah waxay fuliyaan barnaamijyo kala duwan si loo bixiyo fursado shaqo oo hufan iyo in dhallinyaradu ay qeyb ka noqdaan barnaamijyada ilaalinta bulshada. Waa kuwan qaar ka mid ah barnaamijyada iyo heshiisyada:

Wasaaradda Shaqada iyo Arrimaha Bulshada waxay ansixisay 7 heshiis sanadka 2021kii. Ansixintani waxay ka dhigan tahay guulo waaweyn oo horseedi

doona inay shaqaalaha dalka helaan xuquuqdooda. Heshiisyada waxaa ka mid ah:

- **CO97:** Isku socodka shaqaalaha (July 1, 1949)
- **CO155:** Caafimaadka iyo Badbaadada Goobta Shaqada.
- **CO144:** Wadatashiga saddex geesoodka ah si loo wanaajiyo xiriirka dadka wax soo saara iyo daneeyayaasha.
- **CO143:** Heshiiska Shaqaalaha Qaxootiga, 1975 (No. 143)
- **CO190:** Heshiiska Xadgudubyada iyo Dhibaateynta
- **CO181:** Shaqaaleysiinta ganacsiyada gaarka loo leeyahay, 1997
- **CO187:** Qaab dhismeedka horumarinta ee badbaadada shaqada iyo heshiiska caafimaadka, 2006

Xeerka shaqada waa la diyaariyay oo la turjumay. Hadda waa la tafatirayaa iyadoo diyaar u ah in loo gudbiyo golaha wasiirrada si loo ansixiyo. Xeerkan, haddii la ansixiyo, wuxuu ilaalin doonaa xuquuqda shaqaalaha, wuxuuna bixin doonaa hab lagu xalliyo khilaafaadka ka dhasha goobaha shaqada. Waxaa kale oo uu hagaajin doonaa xiriirka saddex geesoodka ah ee goobta shaqada.

Barnaamijka Shaqaaleysiinta Dhallinyarada: Dawladda Soomaaliya oo taageero ka heleysa Bangiga Adduunka ayaa waxa ay wadday barnaamijka shaqo abuurka dhallinyarada kaasoo fursado shaqo siinaya dhallinyarada dalka. Barnaamijku wuxuu diiradda saarayaa qeybaha beeraha, kalluumaysiga iyo dhismaha.

Barnaamijka Shaqo-abuurka Dhallinyarada: Barnaamijka shaqa abuurka Dhallinyarada oo uu maalgeliyo Midowga Yurub, ayaa dhallinyarada siiya tababarro xirfadeed iyo raasamaal bilow ah si ay dhallinyaradu u furtaan ganacsiyadooda. Barnaamijku wuxuu diiradda saarayaa qeybaha ganacsiga beeraha, tamarta la cusboonaysiin karo iyo hal-abuurka ganacsiyada.

Barnaamijka Baxnaano: Dawladda Soomaaliya oo taageero ka heleysa hay'ado caalami ah sida Barnaamijka Cunnada Adduunka, ayaa waxa ay hirgelisay barnaamijka baxnaano, kaas oo lacag

caddaan ah iyo gargaar cunto siiya qoysaska nugal. Barnaamijku wuxuu beegsanayaa qoysaska leh caruurta yaryar iyo haweenka uurka leh iyo kuwa nuujinaya.

Siyaasadda Qaran ee Shaqaaleysiinta: Siyaasadda Qaran ee Shaqaaleysiinta waxaa ansixiyay golaha wasiirrada 2019kii, waxayna ujeedadeedu tahay in kor loo qaado fursadaha shaqo iyo horumarinta suuqa shaqada. Siyaasaddu waxay diiradda saaraysaa xogta suuqa shaqada, horumarinta xirfadaha iyo ilaalinta bulshada.

Barnaamijka Hawlaha Guud: Barnaamijka Hawlaha Guud, oo uu maalgeliyo Bangiga Adduunka, wuxuu siinayaa fursado shaqo oo ku meel gaar ah dhallinyarada dalka. Barnaamijku wuxuu diiradda saarayaa qeybaha dhismaha waddooyinka, dayactirka dugsiyada iyo ilaalinta deegaanka.

Barnaamijyadan waxaa loogu talagalay in fursado shaqo la siiyo dhallinyarada, laguna daro barnaamijyada ilaalinta bulshada ee Soomaaliya. Si kastaba ha ahaatee, hirgelinta barnaamijyadan ayaa waxaa horyaalla caqabado waaweyn oo ay ka mid yihiin amni-darro, dhaqaale la'aan iyo awoodda hay'adaha dawladda oo xaddidan. Waxaa loo baahan yahay in wax badan laga qabto caqabadahan si loo xaqiijiyo in dhammaan dhallinyarada Soomaaliyeed ay helaan barnaamijyo shaqo oo hufan iyo ilaalin bulsho.

6.7 HAL-ABUURKA GANACSIYADA DHALLINYARADA, GANACSIYADA YARYAR IYO KUWA DHEXE

Hal-abuurka iyo ganacsiyada yaryar iyo kuwa dhexe ayaa muhiim u ah kobaca dhaqaalaha iyo shaqo abuurka Soomaaliya. Dhallinyarada ayaa ah qeybta ugu badan ee dadka Soomaaliyeed kuwaas oo la kulmay caqabado badan oo ku saabsan helitaanka fursado shaqo. Si kastaba ha ahaatee, dawladda iyo hay'adaha caalamiga ahi waxay wadeen barnaamijyo kala duwan oo lagu horumarinayo hal-abuurka dhallinyarada iyo horumarinta ganacsiyada yaryar iyo kuwa dhexe. Waa kuwan qaar ka mid ah barnaamijyada:

Hal-abuurka Ganacsiga Dhallinyarada: Hal-abuurkan waxaa maalgeliyay Bangiga Adduunka, waxa uu siiyaa tababarro hal-abuurnimo, hagid iyo in dhallinyarada hal-abuurka leh helaan maal gelin.

Barnaamijku wuxuu diiradda saarayaa qeybaha ganacsiga beeraha, kalluumeysiga iyo tamarta la cusboonaysiin karo.

Adeegyada Horumarinta Ganacsiga: Barnaamijka horumarinta ganacsiga oo ay maalgeliso hay'adda UNDP, wuxuu bixiyaa tababar iyo taageero ee ganacsiyada yaryar si kor loogu qaado ganacsiyadooda. Barnaamijku wuxuu diiradda saarayaa qeybaha ganacsiga, dalxiiska iyo dhismaha.

Helitaanka Maalgelinta Yar yar: Dawladda Soomaaliya iyo hay'adaha caalamiga ah waxay siiyaan dhallinyarada fursado dhaqaale si ay u bilaabaan ama u ballaariyaan ganacsigooda. Barnaamijka waxaa ku jira siinta deyn, deejo iyo damaanad ganacsi. Labadii sano ee la soo dhaafay, iyada oo uu maalgelinayo Midowga Yurub, UNFPA waxa ay siisay raasu-maal bilaw ah dhallinyarada ganacsiga yar yar leh si kor loogu qaado heerka dhaqan-dhaqaale ee dhallinyarada.

Wasaaradda Dhallinyarada iyo Isboortiga oo taageero ka helaya UNFPA iyo Midawga Yurub ayaa hadda fulinaya barnaamij dhaqaale ee dhallinyarada oo saddex sano ah; Ujeedada mashruucan waa in la dhiso nabadda iyo yareynta xagjirnimada ee dhallinyarada iyada oo la wanaajinayo fursadaha dhallinyarada si ay uga qeybqaataan dhismaha nabadda, horumarinta xirfadaha, dakhli-abuurista, hal-abuurka ganacsiga, ciyaaraha iyo dhaqanka.

Xarumaha Ganacsiga: Dawladdu iyadoo kaashanaysa hay'ado caalami ah, waxay samaysey xarumo ganacsi si ay u taageeraan horumarinta ganacsiyada yar yar iyo kuwa dhexe. Xarumuhu waxay siiyaan ganacsatada tababarro, hagd, helidda dhaqaale iyo suuqyo.

Siyaasadda iyo Qaab-dhismeedka maamul: Dawladdu waxay samaysey siyaasad iyo qaab-dhismeed sharci si ay u taageerto horumarinta hal-abuurka ganacsi. Qaab dhismeedkan waxaa ka mid ah hindiseyaal ay ka mid yihiin hagaajinta diiwaangelinta ganacsiga iyo hababka shati bixinta, fududeynta sharciyada canshuuraha, iyo yareynta caqabadaha ganacsiga.

Qorshayaashan waxaa loogu talagalay in lagu hormariyo hal-abuurka dhallinyarada iyo horumarinta ganacsiyada yaryar iyo kuwa dhexe ee Soomaaliya. Si kastaba ha ahaatee, hirgelinta barnaamijyadan ayaa waxaa horyaalla caqabado waaweyn oo ay ka mid yihiin amni-darro, dhaqaale la'aan, iyo awoodda hay'adaha oo xaddidan. Waxaa loo baahan yahay in wax badan laga qabto caqabadahan si loo xaqiijiyo in dhammaan dhallinyarada Soomaaliyeed ay helaan fursado ganacsi iyo barnaamijyada horumarinta ganacsiyada yar yar iyo kuwa dhexe.



6.8 KA QEYBQAADASHADA MADANIGA AH EE DHALLINYARADA

Ka-qeybgalka madaniga ah ee dhallinyarada waa arrin lagama maarmaan u ah dimuqraadiyadda iyo dawlad-wanaagga, waxayna Soomaaliya ka shaqaysay horumarinta ka-qaybgalka dhallinyarada ee siyaasadda iyo nolosha madaniga ah ee dalka. Waa kuwan qaar ka mid ah hindisayaasha loogu talagalay in lagu dhiirri geliyo ka-qeybgalka dhallinyarada ee arrimaha bulshada:

Siyaasadda Qaran ee Dhallinyarada: Dawladda Soomaaliya waxay diyaarisay siyaasadda Qaran ee Dhallinyarada taasoo ujeeddadeedu tahay in la horumariyo ka-qaybgalka dhallinyaradda ee siyaasadda iyo nolosha bulshada. Siyaasaddu waxay diiradda saaraysaa arrimo ay ka mid yihiin ka qaybgalka dhallinyarada ee siyaasadda, helitaanka waxbarasho, shaqo iyo ilaalinta xuquuqda dhallinyarada.

Barashada Wadaniyadda ee Dhallinyarada: Dawladda iyo hay'adaha caalamiga ah waxay siiyeen dhallinyarada Soomaaliyeed waxbarashada ku dhisan wadaniyadda si ay ugu suurtagasho inay si hufan uga qaybgalaan geeddi-socodka dimuqraadiyadda. Waxbarashada waxaa ku jira mawduucyo ay ka mid yihiin habka doorashada, xuquuqda Aadanaha iyo mas'uuliyadda madaniga ah.

Ka-qeybgalka Dhallinyarada ee Siyaasadda: Xukuumadda iyo xisbiyada siyaasadda waxay ku hawlanyihiin horumarinta ka-qeybgalka siyaasadda ee dhallinyarada iyadoo la kordhinayo tirada dhallinyarada ee murashaxiinta ah iyo kor u qaadista matalaadda dhallinyarada ee jagooyinka xukuumadda.

Tababaridda Dhallinyarada ee dhanka hogaaminta: Dawladda iyo hay'adaha caalamiga ahi waxa ay dhallinyarada siiyaan tababarro si ay u kobciyaan xirfadooda hoggaamineed, isla markaana ay u noqdaan kuwo u ololeeya bulshadooda.

Barnaamijyada Awood-siinta Dhallinyarada: Dawladda iyo hay'adaha caalamiga ahi waxa ay fuliyeen barnaamijyo lagu xoojinayo dhallinyarada kuwaas oo siinaya da'yarta agabka iyo xirfadaha ay u baahan yihiin si ay si hufan uga qeyb qaataan nolosha bulshada iyo siyaasadda.

6.9 WADA SHAQEYNTA DHALLINYARADA IYO DAWLADDA, BULSHADA RAYIDKA, IYO GANACSIYADA GAARKA LOO LEEYAHAY

Iskaashiga dhallinyarada iyo wadashaqeynta dawladda, bulshada rayidka ah iyo ganacsiga gaarka ah ayaa muhiim u ah horumarinta dhallinyarada iyo wax ka qabashada caqabadaha haysta dhallinyarada Soomaaliyeed. Waa kuwan qaar ka mid ah hindisayaasha loogu talagalay horumarinta iyo iskaashiga dhallinyarada Soomaaliyeed:

Golayaasha La-talinta Dhallinyarada: Dawladdu waxay samaysay golayaasha la-talinta dhallinyarada kuwaas oo kulmiya dhallinyarada ka kala yimid gobollada si ay fikrado uga dhiibtaan siyaasadaha iyo barnaamijyada saameeya noloshooda.

Iskaashiga Dawladda iyo Ganacsiyada Gaarka loo leeyahay: Dawladdu waxay la shaqaysay ganacsiyada gaarka loo leeyahay si kor loogu qaado hal-abuurka dhallinyarada iyo fursadaha shaqo. Iskaashiga waxaa ka mid ah hindiseyaal ay ka mid yihiin tababarro iyo dhaqaale oo la siiyo hal-abuurka ganacsiyada yar yar iyo abuurista fursadaha shaqo sida beeraha iyo tamarta la cusboonaysiin karo.

Ururrada ka shaqeeya isku-xirka Dhallinyarada: ururrada ka shaqeeya Isku xirka dhallinyarada ayaa la aasaasay si ay u horumariyaan wadashaqeynta iyo iskaashiga ka dhexeeya ururrada ay dhallinyaradu hogaamiso, bulshada rayidka ah iyo ganacsiyada gaarka loo leeyahay. Isbahaysigan waxa uu bixinayaa madal ay dhallinyaradu ku wadaagaan fikradaha iyo dhaqaalaha ayna iska kaashadaan mashaariicda.

Ururrada Bulshada Rayidka ah ee ay hogaamiyaan dhallinyarada: Waxaa Soomaaliya ka jira ururo badan oo ay hogaaminayaan dhallinyaro kuwaas oo ka shaqeeya arimaha ay ka midka yihiin xuquuqda aadanaha, sinnaanta dadka iyo awood siinta dhallinyarada. Ururradani waxay la shaqeeyaan dawladda iyo ganacsiyada gaarka loo leeyahay si kor loogu qaado horumarinta dhallinyarada iyo wax ka qabashada caqabadaha haysta dhallinyarada.

Barnaamijyada Awood siinta Dhallinyarada: Dawladda iyo hay'adaha caalamiga ahi waxa ay fuliyaan barnaamijyo lagu awood siinaayo dhallinyarada kuwaas oo siinaya da'yarta agabka

iyo xirfadaha ay u baahan yihiin si ay si hufan uga qeyb qaataan noloshada madaniga ah iyo hormarinta dhaqaalaha. Barnaamijyadani waxay inta badan ku lug leeyihiin iskaashiga u dhexeeya dawladda, bulshada rayidka ah, iyo ganacsiyada gaarka loo leeyahay.

Xogta iyo Istaatistikada Dhallinyarada

Heerka shaqo la'aanta dhallinyarada Soomaaliya waa mid aad u sarreeya, sidoo kalena dhallinyaradu waa tirada ugu badan ee bulshada. Marka loo eego Sahanka Qiyaasta Dadweynaha ee 2014kii, 45.6 boqolkiiba dadka Soomaaliyeed waxa ay ka yar yihiin da'da 15 jirka, ayadoo 75 boqolkiiba dadkuna ay ka hooseeyaan 30 sano, sidoo kale 37 boqolkiiba dhallinyarada ay da'doodu tahay 15-24 jir waa shaqo la'aan (UNFPA, 2014). Marka loo eego Sahanka Caafimaadka iyo Macluumaadka Dadka 2020kii, heerka hooyoyinka da'da yar ee da'doodu u dhaxayso 15 -19, 1,000 kii haween ahba waxa ay ka yihiin 118 (Hay'adda Istaatistikada Qaranka Soomaaliyeed, 2020).

Caqabadaha Hortaagan Awood-siinta Dhallinyarada

Awood-siinta dhallinyarada Soomaaliya waxa ay wajaheysaa caqabado waaweyn oo ay ka mid yihiin:

Colaadda iyo xasillooni-darrada: Colaadda iyo xasillooni-darrada ka jirta Soomaaliya waxay caqabado waaweyn ku abuureen awood-siinta dhallinyarada. Colaadda ayaa sababtay in malaayiin qof ay barakacaan, oo ay ku jiraan dhallinyaro, waxaana yaraaday fursadaha waxbarasho, caafimaad iyo shaqo.

Helitaanka waxbarashada oo xaddidan: Nidaamka waxbarashada Soomaaliya waxaa si weyn u saameeyay iska-hor-imaadyada iyo xasillooni darrada, waxaana weli xaddidan helitaanka waxbarashada, gaar ahaan gabdhaha. Waxbarasho la'aantu waxay xaddidaysaa fursadaha ay dhallinyaradu ku heli karaan xirfadaha iyo aqoonta ay u baahan yihiin si ay u hormariyaan noloshooda.

Shaqo la'aanta baahsan ee Dhallinyarada: Heerka shaqo la'aanta dhallinyarada Soomaaliya waa mid ka mid ah kuwa ugu sarreeya adduunka, iyadoo ay yar tahay fursadaha shaqo ee ay heli karaan dhallinyarada. La'aanta fursadaha shaqo ayaa

xaddidaysa awood-siinta dhaqaalaha waxayna gacan ka geysataa inuu kordho faqriga. Mid ka mid ah caqabadaha waaweyn ee soo wajaha dhallinyaradu waa is-waafaqsanaan la'aanta baahida suuqa iyo dhallinyarada shaqo raadiska ah, tusaale ahaan, waxaa jira shaqaale xad-dhaaf ah iyo baahida suuqa shaqada ka jirta oo yar.

Ilaha Dhaqaalaha oo kooban: Dhallinyarada Soomaaliya ayaa inta badan la kulma caqabado dhanka dhaqaalaha ah si ay ganacsiyo u bilaabaan, taasna waxa ay xaddidaysa awood-siinta dhaqaale ee dhallinyarada.

Awoodda hay'addeed oo Xaddidan: Dawladda Soomaaliya iyo ururrada bulshada rayidka ah ayaa inta badan aan lahayn awoodda iyo dhaqaalaha loo baahan yahay si ay u hirgeliyaan barnaamijyada loogu talagalay awood siinta dhallinyarada.

Sinnaan la'aanta Dadka Sinnaan la'aanta Dadka ayaa weli ah caqabad weyn oo ka jirta Soomaaliya, iyadoo haweenka da'da yar ay wajahayaan caqabado badan, oo ay ku jiraan waxbarasho, shaqo la'aan iyo ka qeyb gal la'aanta siyaasadda.

Wax ka qabashada caqabadahaas waxay u baahan tahay habab dhinacyo badan oo ay ku lug leeyihiin dawladda, bulshada rayidka ah, iyo ganacsiyada gaarka loo leeyahay. Wax badan ayaa loo baahan yahay in la sameeyo si loo maalgaliyo waxbarashada, loo abuurto fursado shaqo iyo in dhallinyarada Soomaaliyeed loo helo dhaqaale. Wax ka qabashada sinnaan la'aanta dadka iyo kor u qaadida awood-siinta haweenka ayaa sidoo kale muhiim u ah horumarinta awood-siinta dhallinyarada iyo horumarka waara ee Soomaaliya.

6.10 QODOBADA GUUSHA

Marka laga soo tago caqabadaha heysta dhallinyarada Soomaaliya, haddana waxaa jira arrimo xoojinaya dhallinyarada kuna kaalmaynaya inay guul gaaraan. Qodobbadaas waxaa ka mid ah:

Waxbarashada: Waxbarashadu waa waxa ugu muhiimsan ee keena guusha. Helitaanka waxbarashada waxay siin kartaa dhallinyarada xirfado iyo aqoon ay u baahan yihiin si ay u hormariyaan noloshooda, sida inay abuuraan ganacsi, helaan fursado shaqo iyo mid hogaamineed.

Hal-abuurka ganacsiga: Ganacsigu waxa uu dhallin karaa fursado ay dhallinyaradu ku abuuraan ganacsigooda oo ay dakhli ka soo saaraan, taas oo ka qeyb qaadanaysa xoojinta dhaqaalaha iyo yareynta faqriga.

Helid Dhaqaale: Helitaanka dhaqaale waxa uu u sahlayaa dhallinyaradu in ay ganacsi bilaabaan, taas oo ka qeyb qaadanaysa xoojinta dhaqaalaha iyo yareynta faqriga.

Iskaashi iyo wadashaqeyn: Wadashaqeynta iyo iskaashiga ka dhexeeya dawladda, bulshada rayidka ah, iyo ganacsiyada gaarka ah waxay u abuuri karaan dhallinyarada fursado waxayna kor u qaadaan ka qayb qaadashadooda siyaasadeed.

Barnaamijyada ilaalinta bulshada: Barnaamijyada ilaalinta bulshada waxay siin karaan da'yarta nugul taageero iyo agab si ay u horumariyaan heerkooda nololeed iyo in ay helaan fursadaha ay ku kobcin karaan xirfadahooda.

Horumarinta hoggaaminta: Barnaamijyada horumarinta hoggaamintu waxa ay dhallinyarada siin karaan xirfado iyo kalsoonida ay u baahan yihiin si ay u noqdaan hoggaamiyeyaal wax ku ool u ah bulshadooda, kana qeyb qaatan horumarinta bulsho iyo dhaqaale ee dalkooda.

Tiknoolijiyadda: Tiknoolijiyaddu waxay siin kartaa da'yarta helitaanka macluumaadka, waxbarasho, iyo fursado shaqo, taasoo ka qeyb qaadanaysa xoojinta dhaqaalaha bulshada.

6.11 WAXYAABAHA HORTABINTA LEH EE AWOOD SIINAYA DHALLINYARADA

Awood-siinta dhallinyarada Soomaaliya waxay u baahan tahay hannaan dhamaystiran oo wax looga qabanayo caqabadaha kala duwan ee ay dhallinyaradu la kulmaan. Waa kuwan qaar ka mid ah waxyaabaha awood siinaya dhallinyarada Soomaaliyeed:

Waxbarashada: Horumarinta waxbarashada ee dhammaan dhallinyarada, oo ay ku jiraan gabdhuhu, waa inay noqotaa mudnaanta koowaad. Tan waxaa

ka mid ah maalgelinta kaabayaasha waxbarsho, tababarka macallimiinta, iyo horumarinta manhajka si loo hubiyo in dhallinyaradu helaan waxbarasho tayo leh.

Shaqaalaysiinta: Abuurista fursadaha shaqo ee dhallinyarada ayaa muhiim u ah awood-siinta dhaqaale. Tani waxay u baahan tahay maalgelinta qaybaha shaqo abuurka, iyo sidoo kale siyaasado iyo barnaamijyo taageera hal-abuurka ganacsiga iyo horumarinta xirfadda.

Helidda Dhaqaalaha: Dhallinyaradu waxay u baahan yihiin inay helaan dhaqaale si ay ganacsi u bilaabaan. Waa in la sameeyaa siyaasado iyo barnaamijyo si loo helo dhaqaale, oo ay ku jiraan maalgelinta yar yar iyo noocyada kale ee maalgelinta.

Sinnaanta Dadka: Wax ka qabashada sinnaan la'aanta ee ku saleysan jinsiga ayaa lagama maarmaan u ah xoojinta haweenka da'da yar ee Soomaaliya. Tani waxay u baahan tahay maalgashiga waxbarashada, daryeelka caafimaadka iyo fursadaha dhaqaale ee gabdhaha iyo haweenka.

Ka-qeybgalka Madaniga ah: Kor-u-qaadista ka qeyb galka dhallinyarada ee siyaasadda waxay lama huraan u tahay awood-siinta dhallinyarada iyo horumarinta dimuqraadiyadda iyo maamul-wanaagga. Tan waxaa ka mid ah u abuurista dhallinyarada fursado si ay uga qeyb qataan waxbarashada madaniga ah, adeegga bulshada iyo horumarinta hoggaaminta.

Ilaalinta bulshada: Maalgelinta barnaamijyada ilaalinta bulshada waxay siin kartaa taageero iyo agab dadka da'da yar ee nugul iyo kor u qaadida faya-qabka iyo horumarkooda.

Horumarinta Kaabayaasha dhaqaalaha: Maalgelinta kaabayaasha dhaqaalaha, sida waddooyinka, biyo gelinta iyo faya-dhawrka waxay abuuri karaan fursado shaqo iyo horumarin dhaqaale, oo ay ka faa'iidaystaan dhallinyarada.

7. QEYBTA 5AAD: DADKA NAAFADA AH



Qeybtani waxaa ay diiradda saaraysaa siyaasadaha iyo tallaabooyinka ay qaadayaan dawlada ay loo ilaaliyo xuquuqda dadka naafada ah sarana loogu qaado helitaanka adeegyada iyo fursadaha ay helaan, iyada oo aan la takoorin laguna daro geedi-socodka horumarineed ee qaranka.

Axdiga Xuquuqda Dadka Naafada ah iyo heshiisyada kale waxaa lagu meel mariyay qaraar ka soo baxay Golaha Guud ee Qaramada Midoobay sanadkii 2006-dii. Axdigan wuxuu ka dhigan yahay fursad weyn oo horumar lagu gaarsiin karo qiyaastii 15 boqolkiiba dadka adduunka. Waxaa ka go'an xaqijinta ka-qeybgalka, sinnaanta iyo takoor la'aanta dadka naafada ah iyadoo si gaar ah isha loogu hayo haweenka iyo caruurta naafada ah. Sannadkii 2011kii, Hay'adda Caafimaadka Adduunka iyo Bangiga Adduunka ayaa ku qiyaasay in ka badan hal bilyan oo qof oo adduunka ku nool ay la nool yihiin nooc naafo ah, oo u badan haweenka. Hay'adani waxay saadaaliyeen in naafanimada baaxaddeedu ay sii kordheeyso. Tani waxa u sabab ah korodhka dadka da'da ah iyo dadka da'da ah ee naafada ah sidoo kale kororka caalamiga ah ee xaaladaha caafimaad ee riiqda dheer leh. Isla sannadkaas, hay'adaha Qaramada Midoobay oo ay weheliyaan bulshada rayidka ah ayaa hormuud ka ahaa dadaal iskaashi, oo ah Iskaashiga Qaramada Midoobay ee Xuquuqda Dadka Naafada ah.

Naafanimadu waa xaalad adag oo dhinacyo badan leh waana arrin isku-talaw ah oo saameyn ku

yeelan karta qofka mar kasta inta uu nool yahay. Naafanimada ayaa yeelan karta noocyo kala duwan, waxaa naafo noqon kara qofkasta iyadoo loo eegayn lab iyo dhedig, midab, qoomiyada, qaxooti iyo qaar kale. Naafanimadu inta badan ma aha mid ay sabab u tahay itaal-darrada qofka laakiin, waxaa sabab u ah xadididda ay soo rogtay bulshada ee ka hor istaagaya dadkan ka qaybqaadashada siman ee barnaamijyada bulshada. Dadka naafada ah waxay la kulmaan caqabado xagga aragtida bulshada, wadooyinka, dhismayaasha iyo deegaanka oo aan ahayn mid u diyaarsan. Caqabadahan ayaa sii xaddidaya ka qaybqaadashadooda bulsho, dhaqaale iyo madaniba. Shakhsiyadka ayaa sidoo kale wajaha naafanimada marka ay da'doodu weynaato. Caqabadaha waxaa loo kala saaraa: Caqabado aragtiyeed kuwaas oo ah dabeecado taban oo salka ku haya dhaqan, naceyb, sinnaan la'aan awood qaybsi, takoorid, eex, jaahilnimo, cuqdad iyo sababo kale. Caqabadaha kale waxaa ka mid ah naafanimada xubneed ee ka muuqata dadka naafada ah iyo dhismayaasha iyo deegaanka oo aan u diyaarsaneyn adeegsiga dadka naafada ah. Waxaa kaloo jira sharciyada iyo siyaasadaha hay'adaha dawlada oo aan tixgalin siinayn dadka naafada ah.

Sidoo kale, Shirweynaha Caalamiga ah ee Dadweynaha iyo Horumarinta 1994-kii waxa uu dib u milicsaday sida dunidu uga fikirto tirada dadka, horumarka iyo xuquuqda taranka iyada oo loo marayo hannaanka dadka udub dhexaadka u yihiin. Sannadka 2019-kii, sanad guurada 25-aad ee SHCDH ayaa lagu qabtay Nairobi, halkaas oo in ka badan 8,300 ergo oo ka kala yimid illaa 170 dal oo Soomaaliya ay ku jirto, ayaa ay dib u xaqiijiyeen in xuquuqda aadanaha, oo ay ku jiraan xuquuqda taranka, ay aasaas u yihiin horumarka iyo wax ka qabashada sinnaan la'aanta. Barnaamijka SHCDH ee Waxqabadku wuxuu ugu baaqayaa dawladda inay soo jeediyaan dareenkooda ku aaddan baahida caafimaadka taranka ee dadka naafada ah, wuxuuna dalbanayaa baabi'inta takoorka wax u dhimaya xuquuqda taranka ee dadka naafada ah.

Dadka naafada ah ee Soomaaliya waxaa lagu faquuqay dhammaan dhinacyada bini'aadannimada, oo ay ku jiraan xuquuqda dhaqaale, bulsho iyo dhaqan. Waxay ka mid yihiin xubnaha ugu nugul bulshada iyadoo ay ugu wacan tahay ceebeynta bulshada, fursad siin la'aan iyo takoorid. Waxayna la noolyihiin caafimaad xumo, heerka waxbarasho oo hooseeya, fursadaha dhaqaale oo yar, iyo heerka faqriga oo sarreeya marka loo eego dadka jir ahaan awood u leh ama si buuxda u dhaqdhaaqa sababo la xiriiira helitaan la'aanta adeegyada kala duwan.

Sidoo kale, qoysaska dadka naafada ah waxay had iyo jeer la kulmaan caqabado la xiriiira ceebeynta iyo adeeg la'aanta iyo fursadaha yar ee xubnaha qoyskooda ee naafada ah. Caruur badan oo naaf ah ma tagaan dugsiyada waxaana lagu hayaa guriga iyo meel aan la arkin. Caruurta iyo dadka waaweyn ee naafada ah waa la takooraa, waxaana loo bixiyaa magacyo baidil iyo magac wadareed. Colaadaha ayaa sii xumaynaya caqabadaha haysta caruurta naafada ah, gabdhaha iyo barakacayaasha naafada ah.

7.1 ANSIXINTA/WAX KA BEDELKA SHARCIYADDA IYO ISTARAAJIYADAHAA SI WAAFAQSAN AXDIGA QARAMADA MIDOOBEEY EE XUQUUQDA DADKA NAAFADA AH

Axdiga Qaramada Midoobay ee Xuquuqda Dadka Naafada ah waa heshiis caalami ah oo xuquuqda aadanaha ah kaas oo ujeedadiisu tahay dhiirigelinta, ilaalinta, iyo hubinta in si buuxda oo siman loo ilaaliyo

dhammaan xuquuqda aadanaha iyo xorriyaadka aasaasiga ah ee dadka naafada ah. Soomaaliya waxay saxiixday Axdiga Qaramada Midoobay ee Xuquuqda Dadka Naafada ah, waana dalkii 178-aad ee Dawladda xubinta ka ah, waxayna ansixisay Agoosto 6, 2019kii, iyada oo isku xilqaantay in ay qaaddo tallaabooyin lagu hubinayo in dadka naafada ah ay u helaan xuquuqdooda si la siman dadka kale.

Qaadashada iyo wax ka beddelka shuruucda iyo istaraatiijiyadaha la jaanqadaya axdigan ayaa muhiim u ah xaqiijinta, badbaadinta iyo horumarinta xuquuqda dadka naafada ah ee Soomaaliya. Qaar ka mid ah tallaabooyinka muhiimka ah ee ay Soomaaliya qaaday si loo dhaqan geliyo heshiiska waxaa ka mid ah:

Dastuurka Kumeelgaarka ah ee Jamhuuriyada Federaalka Soomaaliya wuxuu dhigayaa xuquuq siman oo la mid ah mida axdiga dadka naafada ah, wuxuuna ka mamnuucayaa dawladda in ay takoorto dadka naafada ah. Qodobka 11aad wuxuu qeexayaa (1) Dhammaan muwaadiniintu, iyadoo aanay u eegayn dhanka jinsiga, diinta, darajada bulsho ama dhaqaale, aragti siyaasadeed, qabiil, naafonimo, shaqo, dhalasho ama lahdad sharciga hortiiisa ku yeelanayaan xuquuq iyo waajibaad siman. (2) Takooristu waxaa loo arkaa inay dhacdo haddii saameynta falku uu curyaaminaayo ama xaddidayo xuquuqda qofka, xitaa haddii qofka uusan ku talagelin saameyntan. (3) Dawladdu waa in aanay qofna ku takoorin da'da, midabka, qabiilka, isirka, dhaqanka, lahdadda, jinsiga, dhalashada, naafada, diinta, fikirka siyaasadeed, shaqada iyo hantida. (4) Dhammaan barnaamijiyada dawliga ah, sida sharciyada, ama tallaabooyinka siyaasadeed iyo kuwa maamul ee loogu talagalay in lagu gaaro sinnaan buuxda, ama shakhsiyaadka ama kooxaha ay dhibaatooyinku ka soo gaareen ama la kulmay takoorid hore, waa in loo arkaa inaan la takoorin.

Soomaaliya waxay saxiixday shir-madaxeedka caalamiga ah ee arrimaha naafada 24 Luuliyo 2018kii ee London kaas oo ay ka sameysay siddeed ballanqaad oo dhinacyadan soo socda ah: b) khilaafaadka iyo Xaaladaha Bani'aadannimada, t) Xog-uruurinta, j) Ciribtirka ceebeynta iyo Takoorka, x) Ka faa'iideysiga Tiknoolajiyadda iyo Hal-abuurka, kh) Waxbarashada loo dhan yahay, d) Waddooyinka loo maro kobcinta dhaqaalaha, r) Haweenka iyo

Gabdhaha Naafada ah iyo, s) in lagu daro dadka naafada ah dastuurka cusub si loo xaqiijiyo in bulsho loo dhan yahay oo si wanaagsan looga wada qaybgalo siyaasadda oo ay ku yeeshaan matalaad geedi-socodka doorashada.

Si wax looga qabto awood-siinta dhaqaalaha, waxaa la soo saaray sharci Diseembar 2018kii, kaas oo lagu dhisay Hay'adda Naafada Qaranka oo u xilsaaran horumarinta xarumaha nolol maalmeedka iyo xirfadaha farsamada gacanta si dadka naafada ah ay u helaan fursado dhaqaale.

Sidaas awgeed, Hay'adda Qaran ee Naafada, ayaa la aasaasay sanadkii 2021kii taas oo qeyb ka ah ka jawaab-celinta sharci-dejinta ee Dawladda ee ansixinta Heshiiska Qaramada Midoobey ee Xuquuqda Dadka Naafada ah. Hay'adan mas'uuliyadeeda waxaa ka mid ah fududeynta helitaanka qalabka caawinta ah ee ay u baahan yihiin dadka naafada ah, tiknoolajiyadda iyo sidoo kale fududeynta tababarka xirfadaha ee dadka naafada ah si ay u helaan fursado dhaqaale sida bilawga maalgashiga iyo maalgelinta hay'adaha maaliyadeed iyada oo loo marayo Iskaashiga dawladda iyo ganacsiyada gaarka ah. Shan xubnood oo guddiga naafada ah ayaa lagu magacaabay Xeer Ra'iisul Wasaare Lr. 122 ee Janaayo 21, 2021. Ka kooban (3 dumar ah iyo 2 rag ah), Guddoomiye (lab) ku xigeenka (haween), Xoghayaha Guud (haween) iyo laba xubnood oo kale.

Horumar ayaa sidoo kale laga sameeyay dhinaca waxbarashada loo dhan yahay iyo kobcinta dhaqaalaha ee dadka naafada ah. Ururrada Naafada ayaa si guul leh ugu ololeeyay qaab dhismeedka dadka aragga naafada ka ah si ay u galaan imtixaannada qaran.

Ansixinta Axdiga Xuquuqda Dadka Naafada ah ee 2019kii kadib, Xukuumaddu iyada oo adeegsanaysa Wasaaradda Haweenka Federaalka waxay guda gashay horumarinta Hindise-sharciyeedka Naafada Qaranka, kaas oo qeybo ka mid ah uu socdo talooyinka daneeyayaasha ka hor inta aan la horgeyn golaha wasiirrada si loo ansixiyo hindise-sharciyeedkan. Si kastaba ha ahaatee, hadda ma jirto siyaasad nafo qaran iyo qorshe hawleed oo dadka naafada ah.

Wasaaradda Waxbarashada, Hiddaha iyo Tacliinta Sare ayaa diyaarisay markii ugu horreysay ee

Soomaaliya ay diyaarisay siyaasadda Naafada iyo Waxbarashada dadka baahiyaha gaarka ah qaba, taasoo dejineysa qaab-dhismeed ku saabsan wax ka qabashada, xaqiijinta iyo helitaanka waxbarashada dhammaan caruurta Soomaaliyeed.

7.2 BARNAMIYADA LAGU HORMARINAYO LAGUNA ILAALINAYO XUQUUQDA DADKA NAAFADA AH

Soomaaliya, dadka naafada ah waxaa ay wajahayaan caqabado waaweyn oo la xiriira helitaanka xuquuqdooda iyo inay si buuxda uga qeybqaataan horumarka bulshada. Hase yeeshee, waxaa jira qaar ka mid ah barnaamijyo la fuliyey si kor loogu qaado loona ilaaliyo xuquuqdooda. Waa kuwan tusaalooyin dhawr ah:

Wasaaradda Haweenka iyo Horumarinta Xuquuqda Aadanaha waxay Wasaaradda Arrimaha Dastuurka kala shaqeysay Arrimaha Dastuurka si loo abaabulo ka mid noqoshada iyo ka qeyb-gal wax ku ool ah ee dadka naafada ah ee Soomaaliyeed, waxaa la sameeyay dib-u-eegista Dastuurka Ku-meel-gaarka ah ee Federaalka 2018kii si loo xaqiijiyo in xuquuqda dadka naafada ah ay si wanaagsan ugu caddahay dastuurka.

Waxaa kale oo jira dadaallo la doonayo in lagu dhiso hannaanka isku dubaridka, u diyaar garowga iyo wax ka qabashada xasaradaha bani'aadannimada kuna saleysan mabda'a ah 'ha dhibaateyn'.

Waxaa sidoo kale horumar laga gaaray waxbarashada loo dhan yahay iyo xoojinta dhaqaalaha ee dadka naafada ah. Ururrada dadka Naafada waxay si guul leh ugu ololeeyeen hannaan u ogolaanaya dadka aragga naafada ka ah in ay ka qeyb qaataan imtixaanaadka qaranka.

Sida laga soo xigtay Wasaaradda Waxbarashada, Hiddaha iyo Tacliinta Sare, Qorshaha Istaraatiijiyadda Qaranka ee Waxbarashada (2022-2026), Soomaaliya waxay si rasmi ah u aqoonsatay dadka naafada ah inay yihiin dad nugul kuna jira qorshaheeda wax ka qabashada bani'aadannimada ee 2020ka, taas oo muujinaysa aqoonsigeeda caqabadaha dadka naafada ah ay kala kulmaan bulshada. Dastuurka ku meel gaarka ah ee Soomaaliya waxa uu damaanad qaadayaa xuquuqda muwaadiniinta oo dhan, iyada oo aan loo eegin xaaladda naafada. Baahida Waxbarashada

Gaarka ah iyo Siyaasadda Waxbarashada Loo Dhan Yahay ee dawladda federaalku waxay si cad u balaarisay Xuquuqda Waxbarashada. Si kastaba ha ahaatee, Soomaaliya, waxbarashada loo dhan yahay waa xaddidan tahay iyadoo ay ugu wacan tahay caqabadaha tirada badan ee ay la kulmaan caruurta naafada ah. Naafanimada inta badan waa la dhaleeceeyaa, Sidoo kale dhaqanka ku saleysan eexda, wuxuu ka ilaaliyaa caruurta naafada ah in ay aadan dugsiyada. Sidaa awgeed, waa in la hirgilyaa istaraatiijiyadaha si loo xaqiijiyo in caruurta naafada ahi ay helaan fursadaha horumarka loo maro, ayna u dhammeystaan waxbarashada asaasiga ah.

- Istaraatiijiyada 2.3.1: Kordhinta wacyigelinta bulshooyinka ee waxbarashada dadka Baahiyaha Gaarka ah qaba.
- Istaraatiijiyada 2.3.3: kor u qaadista aqoonta

Macallimiinta iyo Maamulayaasha ee waxbarashada loo dhan yahay.

- Istaraatiijiyada 2.3.2: Hagaajinta xarumaha waxbarashada, isla markaana in la siiyo agab waxbarasho oo ku habboon si loo daboolo baahida caruurta naafada ah.
- Istaraatiijiyada 4.1.1 Aasaasidda xarumaha waxbarashada degdegga ah
- Istaraatiijiyada 4.1.2: Kordhinta wacyiga bulshada ee waxbarashada degdegga ah

Sida ay sheegtay Wasaaradda Waxbarashada, Hiddaha iyo Tacliinta Sare, Soomaaliya waxaa ku yaalla dugsiyo ka badan 20, kuwaas oo taageera ardayda kala duwan ee naafada ah. Shaxda 1aad ee hoos ku xusan waxay muujinaysaa liiska dugsiyada khaaska ah ee dalka, tirada ardayda dhigata iyo degmada ay ku yaallaan:

| Tirada | Magaca Dugsiga | Tirada Ardayda | Goobta |
|--------|--|----------------|------------------------|
| 1. | Yaqshiid School for the Deaf | 155 | Yaaqshid-Banaadir |
| 2. | SONAD School for the Deaf | 176 | H/wadaag-Banaadir |
| 3. | Madina School for the Deaf | 45 | Wadajir-Banaadir |
| 4. | Al-Nur School for the Blind | 77 | Yaaqshid-Banaadir |
| 5. | Al-Basiir School for the Blind | 19 | H/wadaag-Banaadir |
| 6. | Somali Braille Printing and School for the Blind | 22 | Waaberi-Banaadir |
| 7. | Mustaqbal Special School (Autistic children) | 70 | Hodan- Banaadir |
| 8. | Daryel School for the Deaf | 20 | Ceelasha, KGS |
| 9. | Mustaqbal Integrated School | 235 | Baydhabo, KGS |
| 10. | Baidoa Disability School | 35 | Baydhabo, KGS |
| 11. | Autism Somalia Centre (autistic children) | 0 | Garoowe-Puntland |
| 12. | Al-Basar School for Blind | 40 | Garoowe-Puntland |
| 13. | Beder SNE School (deaf, blind and physical) | 104 | Kismaayo, Jubbaland |
| 14. | Puntland Deaf School | 50 | Garoowe, Puntland |
| 15. | Galmudug School for the Deaf (2 classes in Ablal School) | 25 | Dhuusamareeb, Galmudug |
| 16. | Adado school for the Deaf | 18 | Cadaado, Galmudug |
| 17. | Omar Bin Khatab Lower Primary School | 550 | Berbera, Somaliland |
| 18. | Hargeisa School for the Deaf | Don't Know | Hargaysa, Somaliland |
| 19. | Borama School for Deaf | 108 | Boorama, Somaliland |
| 20. | Sound and Silent primary school | Don't Know | Hargaysa, Somaliland |
| 21. | Burao School for Deaf | 100 | Hargaysa, Somaliland |

Siyaasadda Qaran ee Ilaalinta Bulshada oo ay ansixiyeen golaha wasiirrada sanadka 2019kii ayaa ujeedadeedu tahay in si tartiib ah loo ballaariyo helitaanka adeegga daryeelka bulshada iyadoo loo marayo barnaamijyo qaran oo taageera dadka ugu nugul gaar ahaan naafada, laakiin aan ku koobnayn keliya caruurta, haweenka, agoonta naafada ah, barakacayaasha, dadka qaba baahiyaha caafimaadka dhimirka iyo waayeelka laakiin sidoo kale iyada oo la tixgelinayo baahida kuwa leh awoodda shaqada si kor loogu qaado heerkooda nololeed si waafaqsan heerka ugu yar ee ilaalinta bulshada, iyadoo lagu darayo horumarinta dadka iyo dhisidda u adkeysiga aafuoyinka.

Mashruuca Baxnaano ee 2020kii oo soconaya muddo saddex sano ah ayaa waxaa lagu bartilmaameedsanayaa 200,000 oo qoys, gaar ahaan dadka ugu nugul iyo dadka laga tirada badan yahay, waxa lagu dhiirigelinayaa inay ka qeybqaataan horumarka bulshada. Waxaa tixgelin gaar ah la siin doonaa da'da, jinsiga, naafada iyo dadka kale ee matala bulshada. Qoysaska mudnaanta la siinayo waxaa ka mid ah; qoysaska leh caruurta da'doodu ka yar tahay shan sano, kuwa naafada ah, haweenka uurka leh iyo kuwa nuujinaya oo nafaqo-darida hayso, qoysaska halka qof keli ah u shaqeeya, qoysaska nolol maalmeed aan heysan ama xaddidan, qoysaska ay u shaqeeyaan caruurta iyo weliba qoysaska aan lahayn qof u shaqeeya, iwm.

Mashruuca SAGAL waa mashruuc loogu talagalay dadka nugul si loogu xoojiyo adkaysigooda colaadaha iyo dhibaatooyinka la xiriira cimillada. Mashruucan waxaa looga faa'ideynayaa 44,221 qoys, ama 265,326 qof, tixgelin gaar ah waxaa la siinayaa dadka barakacayaasha ah, dadka dalka dib ugu soo noqday iyo dadka deegaanka. Iyada oo la raacayo Axdiga Qaramada Midoobay ee Xuquuqda Dadka Naafada, mashruucu wuxuu xaqiijinayaa in guud ahaan ay ku jiraan dadka qaba baahiyaha gaarka ah.

Waxbarashada loo dhan yahay ee dadka Naafada: Dawladda ayaa dhaqan-gelisay siyaasado lagu xaqiijinayo in caruurta naafada ah ay helaan waxbarasho. Arrintan waxaa ka mid ah in la sameeyo iskuullada baahiyaha gaarka ah iyo in la siiyo macallimiinta tababarro ku saabsan sidii loo taageeri lahaa ardayda naafada ah.

Adeegyada dadka Naafada ah: Dawladdu weli ma aysan dhisin xarumo lagu taageero dadka naafada ah iyo meel ay ka heli karaan adeegyada ay u baahan yihiin sida Physiotherapy. Si kastaba ha ahaatee, Hay'adda Naafada Qaranka ayaa wadda qorshe ay sanadaha soo socda ka hirgelinayso magaalada Muqdisho xarun bixinaysa adeegyada naafada.

Urrurada u dooda xuquuqda Naafada : Soomaaliya waxaa ka jira hay'ado dhawr ah oo ka shaqeeya horumarinta iyo ilaalinta xuquuqda dadka naafada ah. Urruradani waxay u halgamaan sidii ay kor ugu qaadi lahaayeen wacyigelinta bulshada ee ku saabsan xuquuqda dadka naafada ah iyo in la helo isbedel siyaasadeed. Waxaa jira ku dhawaad 30 hay'adood oo ku hawlan u doodista xuquuqda dadka naafada ah.

Kaabayaasha ku haboon dadka Naafada ah iyo Xarumaha Adeegga bulshada: Ku dhawaad dhammaan dhismayaasha guud ee Soomaaliya iyo xarumaha dawladda looguma tala galin dadka naafada ah, sidaas oo kalena ma lahan marinno, suuliyo la geli karo, agab waxbarasho iyo meelo lagu socon karo.

7.3 XOGTA IYO ISTAATISTIKADA DADKA NAAFADA AH

Xogta iyo Istaatistikada dadka naafada ah ee Soomaaliya waa kuwo xaddidan oo ay adag tahay in la helo sababo la xiriira in aan mudo dheer wadanka laga samayn tirokoobka dadka. Si kastaba ha ahaatee, halkan waxaa ku qoran macluumaadka la heli karo:

Sahanka Muruq-maalka shaqaalaha ee ay sameysay Hay'adda Istaatistikada Qaranka Soomaaliyeed 2019kii, waxaa ku jiray macluumaadka bulshada ee la soo ururiyay qeybaha jinsiga, da'da iyo qeybta dadka naafada ah ayaa lagu ogaaday in 4 boqolkiiba dadka Soomaaliyeed ay yihiin kuwo la nool naafanimu. Noocyada ugu sarreeya ee naafanimada ayaa ah is-daryeelka qofeed, waxayna gaarayaan boqolkiiba 30, la tacaamulka dadka 24 boqolkiiba iyo naafada dhaqdhaqaaqa 18 boqolkiiba. Intaas waxaa dheer, natiijooyinka sahanka ayaa muujiyay in dadka qaba naafanimada dhinacyo badan leh, ku dhawaad saddex-meelood laba (67 boqolkiiba) ay la il daran yihiin naafodhaqdhaqaaq la'aan ah.

Sahan kale ee qaran ee la yiraahdo Sahanka Caafimadka iyo Macluumadka Dadka Soomaaliyeed oo ay sameysay Hay'adda Istaatistikada Qaranka Soomaaliyeed oo soo baxay 2020kii ayaa muujinaya in ku dhawaad 5 boqolkiiba dadka ay la nool yihiin naafanimada. Tirada naafada ee dumarka iyo ragga waa isku mid, waana 5 boqolkiiba. dadka ugu da'da yar, waa caruurta ka yar shanta sano oo la nool naafanimada waana 5 boqolkiiba. Baaxadda naafanimada ayaa hoos ugu dhacday 3 boqolkiiba dadka da'doodu u dhaxayso 5-9 sano, ka hor inta aysan si joogto ah kor ugu kicin 30 boqolkiiba kuwa da'doodu tahay 70 sano iyo wixii ka sareeya (Hay'adda Istaatistikada Qaranka Soomaaliyeed, 2020).

Marka loo eego Sahanka Miisaaniyadda Qoyska ee Isku-dhufan ee Soomaaliya oo ay hirgelisey Hay'adda Istaatistikada Qaranka Soomaaliyeed 2022kii, ku dhawaad 8.3 boqolkiiba dadku waa naafo. Heerka naafanimada dumarku waxay wax yar ka sarreysaa ta ragga (8.8 boqolkiiba ilaa 7.8 boqolkiiba).

Xaaladda bani aadannimada: Dadka naafada ah ayaa ka mid ah kooxaha ugu nugul ee dalka, iyadoo qaar badan oo ka mid ah ay wajahayaan caqabado dheeraad ah oo ay ugu wacan tahay dagaallada iyo barakaca ka socda Soomaaliya.

7.4 WADA SHAQEYNTA URURRADA NAAFADA

Iskaashiga ay la leeyihiin ururrada dadka naafada ah ee Soomaaliya ayaa lagama maarmaan u ah dhiirigelinta iyo ilaalinta xuquuqda dadka naafada ah iyo hubinta in ay ka qeyb noqdaan arrimaha bulshada. Urruradan ayaa la shaqeeya dadka naafada ah ee Soomaaliya:

Daladda Awoodsiinta Naafada Soomaaliyeed (SODEN): waa hay'ad aan dawli ahayn oo ka shaqeysa arrimaha naafada ujeeddadeeduna tahay awoodsiinta dadka naafada ah iyada oo loo marayo u doodista, kobcinta awoodda, iyo wacyi gelinta.

Humanity Inclusion: waa hay'ad caalami ah oo la shaqeysa dadka naafada ah ee Soomaaliyeed, waxayna bixisaa adeegyada daryeelka, dhiirgalinta waxbarasho loo dhan yahay iyo taageeridda awooddooda dhaqaale.

Ururka Naafada Haweenka Soomaaliyeed (SAFDI): waa hay'ad aan dawli aheyn oo ka shaqeysa horumarinta xuquuqda haweenka naafada ah ee Soomaaliya. Hay'addu waxa ay bixisaa tababarro iyo taageero ay siiso haweenka naafada ah si ay ugu suurtagasho inay si buuxda uga qeyb noqdaan bulshada.



Ururka Dhagoolayaasha Soomaaliyeed (SNAD):

Waxaa la aasaasay bishii Abriil 2007-dii, wuxuuna u dooda xuuqda dadka maqalka naafada ka ah ee Soomaaliyeed. Ururkani waxa uu bixiyaa adeegyada tarjumaadda luuqadda dadka maqalka naafada ka ah, wuxuuna ka shaqeeyaa sidii kor loogu qaadi lahaa ka mid noqoshada dhagoolayaasha ee arrimaha bulshada. Wuxuu sidoo kale siiyaa tababar dadka dhagoolayaasha ah.

Hay'adda Gargaarka Naafada (DAF): Waa hay'ad ka shaqeysa sidii loo awoodsiin lahaa dadka naafada ah ee Soomaaliyeed iyo guud ahaan Afrika oo dhan. Hay'addu waxay u dooda xuuqda iyo ka-qeybgalka dadka naafada ah. La-shaqeynta saaxiibada iyo bulshooyinka si loo dhiso bulsho loo dhan yahay oo dadka naafada ah ay si siman u heli karaan adeegyada waxbarashada, caafimaadka iyo ilaalinta bulshada.

Hay'adahan ayaa si dhow ula shaqeysa dadka naafada ah ee Soomaaliya si ay u ogadaan baahidooda iyo waxyaabaha mudnaanta u leh iyo inay horumariyaan istiraatiijiyado wax looga qabanayo. Iyada oo la kaashanayo dawladaha, deeq-bixiyeyaasha, iyo daneeyayaasha kale ee ka shaqeeya arrimaha naafada, waxaa lagu guuleysan karaa in la maqlo codadka iyo aragtiyaha dadka naafada ah iyo in xuuqdooda si buuxda loo xushmeeyo loona ilaaliyo.

Daladda Waxbarashada Loo Dhanyahay ee Soomaaliyeed (SIEN): waxay ka shaqeeyaan taageerada iyo u doodista barnaamijyada waxbarashada loo dhan yahay ee dadka naafada ah. Waxay tababaraan macalimiinta, taageeraan waxbarashada ardayga iyo manhajka.

Ururka Midawga Naafada Soomaaliyeed: waa koox isu keentay 27 Hay'adood oo Naafada ka shaqeeya. Waxay isku dubaridaa dadaallada wadajirka ah ee wax looga qabanayo caqabadaha ka dhanka ah dadka naafada ah ee dalka.

7.5 CAQABADHA LAGALA KULMO HORUMARINTA XUQUUQDA DADKA NAAFADA AH

Waxaa jira caqabado waaweyn oo ku aadan horumarinta xuuqda dadka naafada ah ee Soomaaliya taas oo ay ugu wacan tahay arrimo badan, waxaana ka mid ah;

Dhaqaalo yari: Soomaaliya waa dal ka mid ah dalalka ugu saboolsan adduunka, waxaana jira ilo dhaqaale oo kooban oo loogu talagalay in lagu taageero dadka naafada ah. Tani waxay caqabad ku tahay bixinta adeegyada lagama maarmaanka ah iyo taageerada si kor loogu qaado xuuqdooda iyo ka qeyb ahaanshadda arrimaha horumarinta bulshada.

Wacyigelin la'aan: Guud ahaan Soomaaliya waxaa ka jira wacyigelin iyo faham la'aan ku aaddan arrimaha naafada, tani waxay caqabad ku noqon kartaa helidda taageerada dadaalada la xiriira naafada.

Hannaanka sharci oo aan dhameystirneen: Qaab dhismeedka sharci ee xuuqda naafada Soomaaliya waa mid aan ku filneyn wax ka qabashada dhibaatooyinka dadka naafada ah, waxaana jirta in aan wali la dhaqan gelin sharciyadii iyo siyaasadihii horay u jiray. Tani waxay culeys ku noqon kartaa in dawladaha iyo ururada kale lagala xisaabtamo ilaalinta xuuqda dadka naafada ah.

Colaadaha iyo xasillooni-darrada: Soomaaliya ayaa sannado badan waxaa ragaadiyay colaado iyo xasillooni-darro, waxayna taasi saameyn taban ku yeelatay nololsha dadka naafada ah. Rabshadaha socda iyo barakaca waxay sii adkayn karaan inay helaan adeegyo iyo taageero.

Ceebeynta iyo takooridda: Dadka naafada ah ee ku nool dalka Soomaaliya waxa ay la kulmaan ceebeyn iyo takoor weyn, taasoo ka hor-istaagi karta in ay si buuxda uga qeyb qaataan horumarka bulshada, helitaanka adeegyada iyo taageerada ay u baahan yihiin.

Xog la aanta: Sidaan horey u soo sheegnay, waxaan la heyn xog la isku halleyn karo oo dhammeystiran oo ku saabsan dadka naafada ah, taasoo adkeyneysa in la fahmo baahiyaha iyo caqabadaha ay la kulmaan dadka naafada ah iyo in la sameeyo siyaasado iyo barnaamijyo loogu talo galay in loogu adeego.

Helidda kaabayaal ku habboon: Goobaha dadweynaha iyo dhismayaasha ma lahan marino ku habboon adeegsiga dadka naafada ah, taas oo caqabad weyn ku ah nololsha dadka naafada ah.

Shaqaleynta: Inta badan dadka naafada ah waxay la kulmaan dhibaatooyin shaqo helista ah sababo la xiriira takoorid iyo xirfado la'aanta darteed.

Wax ka qabashada caqabadahaas waxay u baahan tahay wada shaqeyn dhinacyo badan leh oo dhex marta dawladda, ururrada bulshada rayidka ah, iyo qeybaha kale ee ay khusayso. Waa muhiim in mudnaanta la siiyo codadka iyo aragtida dadka naafada ah, in laga qeybgeliyo qaabeynta, hirgelinta hindisayaasha loogu talagalay horumarinta xuquuqdooda iyo ka mid noqoshadooda bulsho.

7.6 MUDNAANTA, DHAWRISTA IYO AWOODSIINTA DADKA NAAFADA AH

Ilaalinta iyo awoodsiinta dadka naafada ah ee Soomaaliya waxay u baahan tahay hannaan dhammeystiran oo wax looga qabanayo caqabadaha badan ee ay la kulmaan dadka naafada ah. Waa kuwan qaar ka mid ah waxyaabaha mudnaanta u leh horumarinta xuquuqda dadka naafada ah ee Soomaaliya:

Xoojinta qaab-dhismeedka sharciga: Waxaa loo baahan yahay in la xoojiyo qaab-dhismeedka sharci ee xuquuqda naafada Soomaaliya iyo in la xaqiijiyo fulinta sharciyada iyo siyaasadaha jira. Tan waxa ku jira sameynta sharciyo iyo siyaasado cusub si wax looga qabto gol-daloolooyinka sharciyada hadda jira. Hindise-sharciyeedka naafada qaranka ee hadda horyaalla golaha wasiirrada, haddii la ansixiyo, waxa uu fursad siin doonaa dadka naafada ah, maadaama uu dhigayo 5 boqolkiiba (kootada) ee shaqooyinka shaqaalaha dawladda in loo qoondeeyo dadka naafada ah.

Kor u qaadista Wacyiga iyo fahanka bulshada: Waxaa jirta baahi loo qabo in la horumariyo helitaanka daryeelka caafimaadka, waxbarashada, iyo adeegyada kale ee muhiimka u ah dadka naafada ah ee Soomaaliya. Tani waxa ku jira hubinta in adeegyadan yihiin kuwo la heli karo oo loo wada dhan yahay.

Taageeridda awood-siinta dhaqaalaha: Dadka naafada ah ee Soomaaliya waxay la kulmaan caqabado waaweyn oo xagga shaqada iyo awoodsiinta dhaqaalaha ah. Waxaa loo baahan yahay in la horumariyo barnaamijyo iyo hindisayaal awoodsiinaya dadka naafada ah, loona suurageliyo in ay si buuxda qeyb uga ahaadaan shaqaaleysiinta.

Kobcinta xog ururinta iyo cilmi baarista: Waxaa jirta baahi loo qabo in sare loo qaado xog arurinta iyo cilmi baarista dadka naafada ah ee Soomaaliya

si loo fahmo baahiyaha iyo waaya aragnimada dadka naafada ah loona horumariyo siyaasadaha iyo barnaamijyada loogu talagalay.

Xoojinta iskaashiga: Iskaashiga u dhexeeya dawladda, ururrada bulshada rayidka ah iyo daneeyayaasha kale ayaa lagama maarmaan u ah horumarinta iyo ilaalinta xuquuqda dadka naafada ah ee Soomaaliya. Waxaa loo baahan yahay in la xoojiyo iskaashigaas si dadka naafada ah looga qeybgeliyo naqshadeynta iyo hirgelinta hindisayaasha loogu talagalay horumarinta xuquuqdooda iyo ka mid noqoshadooda bulshada.

Wax ka qabashada arrimahan mudnaanta leh waxay u baahan tahay dadaal iyo dhaqaale joogto ah oo laga helo dawladda, deeq-bixiyeyaasha, ururrada bulshada rayidka ah, iyo daneeyayaasha kale. Iyadoo mudnaanta la siinayo ilaalinta iyo awoodsiinta dadka naafada ah, Soomaaliya waxay ka shaqeyn kartaa sidii loo dhisi lahaa bulsho loo wada dhan yahay oo loo siman yahay.

7.7 FURSADHAHA JIRA EE DADKA NAAFADA AH

Dadka naafada ah ee Soomaaliya waxay wajahayaan caqabado fara badan oo ka hortaagan ka mid ahaanshahooda iyo ka-qeybgalkooda bulshada. Si kastaba ha ahaatee, waxaa sidoo kale jira dhawr arrimood oo gacan ka geysan kara isla markaana awoodsiin kara hagaajinta xaaladdooda:

Hannaanka sharciga: Soomaaliya waxay ansixisay Axdiga Qaramada Midoobay ee Xuquuqda Dadka Naafada ah, waxayna soo saartay Xeerka Aasaasidda Hay'adda Naafada Qaranka si loo ilaaliyo xuquuqda dadka naafada ah.

Hay'adaha ka shaqeeya Arrimaha Naafada: Soomaaliya waxaa ka jira dhawr hay'adood oo aan dawli ahayn, kuwaas oo diiradda saara arrimaha naafada, una fidiya taageero iyo adeegyo.

Kaabayaasha Dhismayaasha iyo Wadooyinka: Qaar ka mid ah dhismayaasha dadweynaha, adeegyada gaadiidka iyo goobaha dadweynaha ee Soomaaliya ayaa loogu tala galay ama wax laga bedelay si ay ugu suurta gasho inay adeegsadaan dadka naafada ah.

Waxbarashada: Inkasta oo uu jiro dib u dhac weyn oo dhanka helitaanka waxbarashada ee dadka naafada ah ee Soomaaliyeed, haddana qaar ka mid ah dugsiyada iyo jaamacadaha ayaa bilaabay bixinta waxbarasho loo dhan yahay.

Fursadaha shaqo: Qaar ka mid ah shaqo-bixiyeyaasha Soomaaliya waxay bilaabeen inay aqoonsadaan qiimaha ay leedahay in la shaqaaleysiyo dadka naafada ah, waxayna isku deyayaan in la abuurto goobo shaqo oo loo siman yahay.

Caawimaadda Tiknoolajiyadda: Horumarinta tiknoolajiyadda ayaa u suurta gelinaysa dadka naafada ah in ay helaan aalado iyo barnaamijyo waxtar leh oo kala duwan, kuwaas oo ka caawin kara in ay si xor ah u noolaadaan si buuxdana uga mid noqdaan bulshadooda.

U doodista Xuquuqda Naafada: Soomaaliya waxaa ka jira ururo u dooda xuquuqda dadka naafada ah oo ka shaqeeya horumarintooda iyo wacyigelinta bulshada.

Guud ahaan, iyadoo ay weli jiraan caqabado badan oo ay wajahayaan dadka naafada ah ee Soomaaliya, hadana arrimahan aan kor ku soo xusnay iyo fursadaha jira ayaa sahlaya in la wanaajinayo xaaladda dadka naafada ah iyo in kor loo qaado ka mid noqoshadooda buuxda ee bulshada.

8. QEYBTA 6AAD: CAAFIMAADKA



Qeybtani waxa ay diiradda saaraysaa siyaasadaha iyo tallaabooyinka ay qadayaan dawladuhu si loo xaqiijiyo nolol caafimaad qabta iyo daboolida baahiyaha la xiriira xuquuqda taranka iyo adeegyada caafimaadka taranka.

8.1. SHARCIYADA IYO SIYAASADAHA LA MEELMARIYAY AMA WAX LAGA BEDELAY SI WAX LOOGA QABTO BAAHIYAHA XUQUUQDA IYO BIXINTA ADEEGYADA CAAFIMAADKA TARANKA.

Soomaaliya waxaa ka jiray xasillooni darro siyaasadeed iyo iska-horimaadyo mudo tobanaan sano ah, kuwaasoo caqabado waaweyn ku noqday bixinta adeegyada caafimaadka taranka, iyo sidoo kale ilaalinta xuquuqda taranka. Sidaas darteed, waxaa la dhihi karaa Soomaaliya waxay ku jirtaa xaalad adag oo siyaasadeed iyo mid sharciba, waxaana wali xadidan helitaanka adeegyada caafimaadka taranka oo haween iyo gabdho badan ayaan heli Karin, gaar ahaan meelaha aan la gaari karin, xeryaha barakacayaasha iyo sidoo kale dhulka miyiga iyo reer guuraaga.

Waxaa jiray dadaallo lagu sameeyay sharciyo iyo siyaasado wax looga qabanayo arrimaha caafimaadka taranka ee Soomaaliya. Sanadkii 2015kii, dawladda Soomaaliya waxay diyaarisay Istiraatiijiyadda Caafimaadka Taranka iyo Qorshe Hawleedka Qaranka 2016-2019 oo looga gol

leeyahay in lagu horumariyo helitaanka adeegyada caafimaadka taranka iyo wax ka qabashada dhimashada hooyada heerka sare ah ee dalka. Qorshuhu wuxuu diiradda saaray horumarinta, helitaanka iyo tayada adeegyada caafimaadka taranka, kordhinta wacyiga bulshada iyo ka-qeybgalka arrimaha caafimaadka taranka, iyo xoojinta awoodda shaqaalaha caafimaadka si ay u bixiyaan adeegyada caafimaadka taranka oo dhameystiran.

Sannadkii 2018kii, waxaa la sameeyay sharciga daryeelka caafimaadka hooyada iyo dhallaanka. Sharcigan ayaa ogolaanaya adeegyada daryeelka hooyada iyo dhallaanka bilaashka ah ee xarumaha caafimaadka dadweynaha, oo ay ku jiraan daryeelka iyo adeegyada dhalmada iyo daryeelka umusha ka dib. Isla sanadkaas, sharciga gudniinka Fircooniga ayaa la qoray. Hindise-sharciyeedkan haddii uu dhaqan galo waxa uu dembi ka dhigayaa hab-dhaqannada gudniinka Fircooniga ah ee lagu saameeyo gabdho iyo haween badan oo dalka ku nool.

Sannadkii 2019kii, waxaa la hormariyay Siyaasadda Qaranka ee Caafimaadka Taranka oo qeexaysa sida

ay dawladda uga go'an tahay in ay horumariso helitaanka adeegyada caafimaadka taranka ee dhammaan muwaadiniinta, oo ay ku jiraan kala dheeraynta dhalmada iyo daryeelka dhalmada kadib. Siyaasadda Caafimaadka Taranka ayaa dhanka kale ujeedadeedu tahay in kor loo qaado sinnaanta dadka iyo xoojinta haweenka iyo gabdhaha Soomaaliya, oo ay ku jirto in la hormariyo helitaanka adeegyada caafimaadka taranka.

8.2 ISTARAAJIYADAHHA IYO QORSHAYAASHA LOOGU TALA GALAY BAAHIYAHA LA XIRIIRA XUQUUQDA IYO ADEEGYADA CAAFIMAADKA TARANKA

Helitaanka xuquuqda iyo adeegyada caafimaadka taranka ayaa weli ah arrin aad muhiim u ah Soomaaliya, gaar ahaan haweenka iyo gabdhaha. Waxaa jira dhawr istaraatiijiyadood, qorshayaal fulineed iyo barnaamijyo la diyaariyay kuwaas oo loogu talagalay in wax looga qabto baahiyahaas;

Xoojinta Nidaamyada Caafimaadka: Hal istaraatiijiyad oo muhiim ah ayaa ah in la xoojiyo nidaamyada caafimaadka ee Soomaaliya si loo bixiyo adeegyo caafimaad oo dhammaystiran oo dhanka taranka ah. Tani waxay ku lug yeelan kartaa hagaajinta kaabayaasha, tababarka shaqaalaha, daryeelka caafimaadka, iyo kordhinta helitaanka dawooyinka iyo sahayda muhiimka ah. Sannadka 2019kii, dawladdu waxay horumarisay Istaraatiijiyadda Caafimaadka Dhalmada ee Hooyada, Dhallaanka, ilmaha iyo Caruurta 2020-2024, kaas oo ah qorshe 5 sano soconaya, hubina doona dadaallada la isku duba-riday ee la-hawlgalayaasha ka shaqeynaya si ay u taageeraan caafimaadka taranka, hooyada, dhallaanka, caruurta iyo dhallinta Soomaaliyeed.

Sanadkii 2021kii, Wasaaradda Caafimaadka iyo Daryeelka Bulshada ayaa dalka ka aasaastay mashruuc lagu horumarinayo adeegyada caafimaadka oo lagu magacaabo Damal Caafimad. Mashruucan waxaa maalgeliyay Bangiga Adduunka isagoo u soo marsiiyay deeq ka timid Xarunta Maalgelinta Caalamiga ah ee Haweenka, Caruurta iyo Dhallinyarada. Barnaamijka Caafimaadka iyo Nafaqada Soomaaliyeed (SHINE) waa mashruuc ay maalgeliso FCDO 2019-2021 oo socon doona muddo shan sano ah, ujeeddadiisuna tahay sidii kor loogu qaadi lahaa xaaladda caafimaadka iyo nafaqeynta Soomaalida, iyadoo si gaar ah

diiradda loo saarayo haweenka iyo caruurta. Mashruuca SHINE, waa nidaam hagaajinaya maamulka shaqaalaha caafimaadka iyo horumarinta siyaasadda.

Adeegyada Caafimaadka ka turjumaya baahida bulshada: Istaraatiijiyad kale ayaa ah in la bixiyo adeegyada caafimaadka taranka iyadoo loo marayo habab bulshada ku salaysan. Tani waxay ku lug yeelan kartaa tababarka shaqaalaha caafimaadka bulshada si ay u bixiyaan adeegyada aasaasiga ah, sida la-talinta kala dheeraynta dhalmada iyo isku xirka bulshooyinka iyo xarumaha caafimaadka.

Waxbarashada iyo Wacyi-gelinta: Waxbarashada iyo barnaamijyada wacyi-gelinta waxay gacan ka geysan karaan kordhinta aqoonta ku saabsan xuquuqda iyo caafimaadka taranka, yareeynta dhaleeceynta iyo takoorka, iyo horumarinta dhaqannada caafimaadka qaba. Barnaamijyadaas oo kale waxaa loo qaban karaa dad gaar ah, sida dhallinyarada ama haweenka. Tusaale ahaan, Hay'adda Global Partnership For Education waxay bixisaa waxbarasho iyo wacyigelin.

Shaqaalaha caafimaadka ee dumarka ah ayaa bixiya adeegyada aasaasiga ah, hawlaha horumarinta caafimaadka oo ay ku jiraan adeegyada kala korinta ubadka.

Iskaashiga iyo Wadashaqeynta: Wadashaqeynta hay'adaha dawladda, ururrada aan dawliga ahayn, iyo daneeyayaasha kale waxay gacan ka geysan karaan abaabul dhaqaale, wadaag khibradeed iyo aqoon, iyo isku dubaridka dadaallada lagu horumarinayo helitaanka adeegyada caafimaadka taranka.

Wax-kaqabashada Xaaladaha Bani'aadannimada: Soomaaliya waxaa si joogto ah u saameeya dhibaatooyinka bini'aadannimo, sida abaaraha iyo colaadaha, kuwaas oo sii xumeyn kara caqabadaha caafimaad ee jira. Dadaallada wax ka qabashada bini'aadannimo waxay gacan ka geysan karaan wax ka qabashada baahiyaha caafimaadka taranka ee degdegga ah dadka ay dhibaatudu saameysey, oo ay ku jirto bixinta daryeelka deg degga ah ee umusha iyo adeegga kala dheereynta dhalmada. Sanduuqa Gargaarka Bani'aadannimo ee Soomaaliya (SHF) waxaa ku mideysan deeq-bixiyeyaal badan, waxaana la abuuray 2010kii si loogu qoondeeyo wax ka qabashada xaaladaha deg degga ah ee dalka.

Iyadoo laga jawaabayo dhibaatooyinka bini'aadannimo, hay'adaha gargaarka waxay la yimaadaan Qorshe Wax qabad oo isku dubaridan iyo istiraatiijiyad si loo daboolo baahiyaha degdegga ah ee dadka ay dhibaataadu saameysey. Wax-kaqabadka bini'aadannimo ee Soomaaliya ee Qaramada Midoobay waxaa isku dubaridda hay'adda (OCHA).

Guud ahaan, istaraatiijiyadahan, qorshayaasha fulinta iyo barnaamijyadu waa tallaabooyin muhiim ah oo lagu horumarinayo helitaanka xuquuqda iyo adeegyada caafimaadka taranka ee Soomaaliya. Si kastaba ha ahaatee, colaadaha iyo xasilloonidarrada dalka ka jirta ayaa caqabad weyn ku ah bixinta adeegyada caafimaadka, waxaana loo baahan yahay dadaallo joogto ah oo lagu xaqiijinayo in dhammaan dadka Soomaaliyeed ay helaan daryeelka ay u baahan yihiin.

8.3 SHARCIYADA, SIYAASADAH IYO TALLAABOYINKA LOO QAADAY IN LAGU YAREEYO UURKA XILLIGA HORE IYO JOOJINTA GUDNIINKA FIRCOONIGA AH

Uurka xilliga hore iyo gudniinka fircooniga ayaa Soomaaliya ka jira, gaar ahaan gabdhaha da'da yar. Waxaa dadaallo lagu bixiyay in arrimahaas wax laga qabto iyadoo loo marayo shuruuc, siyaasado iyo waxqabadyo kala duwan, tusaale ahaan:

Xoojinta qaab-dhismeedka sharciga: Waxaa la sameeyay dadaallo lagu xoojinayo qaab-dhismeedka sharciga ee ku aaddan xuquuqda taranka iyo gudniinka Fircooniga, oo ay ku jiraan horumarinta siyaasadaha iyo hab-raacyada qaranka.

Sida ku cad qodobka 15naad, faqradiisa 4aad ee dastuurka ku meel gaarka ah waxa uu dhigayaa in gudniinka Fircooniga ee habluhu uu yahay caado arxan darro ah oo sharaf dhac ah oo u dhiganta jirdil sidaas awgeedna ay mamnuuc tahay.

Sannadkii 2018-kii, hindise-sharciyeedka gudniinka fircooniga ah waxaa soo diyaarisay dawladda Soomaaliya iyadoo ujeedadu tahay in la meel mariyo sharci dambi ka dhigaya dhammaan noocyada gudniinka fircooniga ah. Tani waxay ahayd tallaabo muhiim ah oo loo qaaday dhanka ciribtirka dhaqankaas, kaasoo saameynaya qiyaastii 98 boqolkiiba haweenka iyo gabdhaha Soomaaliyeed. Si kastaba ha ahaatee, sharcigan

ilaa hadda lama ansixin.

Siyaasadda Qaranka iyo Qorshe Hawleedka ku saabsan ciribtirka Gudniinka Fircooniga ah waxaa la sameeyay 2017kii, taasoo qeexaysa istaraatiijiyad ballaaran oo wax looga qabanayo gudniinka Fircooniga ah ee dalka. Siyaasaddu waxay ujeedadeedu tahay in lagu baabi'yo gudniinka fircooniga ah, waxayna qeexaysaa yoolal gaar ah, istaraatiijiyado iyo waxqabadyo lagu gaarayo hadafkaas. Siyaasaddu waxay aqoonsan tahay baahida loo qabo habab bulshadda ku saleysan si wax looga qabto Gudniinka Fircooniga ah, waxayna xoogga saaraysaa muhiimadda ay leedahay wadashaqeynta hoggaamiyeyaasha bulshada, culimada, haweenka iyo daneeyayaasha kale. Siyaasaddu waxay kaloo xoogga saaraysaa baahida loo qabo in la bixiyo waxbarasho iyo wacyigelin oo ku saabsan saamaynta taban ee Gudniinka Fircooniga ah iyo kor u qaadida isbedelka dhaqanka.

Guurka xilliga hore waa caqabad weyn oo ka jirta Soomaaliya, gaar ahaan haweenka da'da yar. Inkastoo aysan jirin siyaasado gaar ah oo arrintan wax looga qabanayo, waxaa jira siyaasado iyo istaraatiijiyado ballaaran oo loogu talagalay in lagu wanaajiyo natiijooyinka caafimaadka hooyada iyo dhallaanka ee dalka. Siyaasadahan iyo istaraatiijiyadani waxay aqoonsan yihiin muhiimadda ay leedahay wax ka qabashada baahiyaha dhallinyarada iyo da'yarta. Siyaasadda Qaran ee Caafimaadka Taranka iyo Istaraatiijiyada Soomaaliya 2018-2022 waa qaab-dhismeed siyaasadeed ee dhameystiran oo loogu talagalay in lagu wanaajiyo natiijooyinka caafimaadka taranka ee dalka. Siyaasaddu waxay cadeyneysaa baahida loo qabo in wax laga qabto baahiyaha gaarka ah ee dhallinyarada iyo da'yarta, waxayna qeexaysaa istaraatiijiyado gaar ah oo loogu talagalay. Siyaasaddu waxay xoogga saaraysaa muhiimadda ay leedahay bixinta waxbarashada caafimaadka taranka oo dhamaystiran iyo kor u qaadida isbedelka dhaqanka. Waxa kale oo ay aqoonsan tahay baahida loo qabo in la helo adeegyada caafimaadka taranka, oo ay ku jiraan la-talinta kala dheeraynta dhalmada, adeegyada caafimaadka hooyada iyo daaweynta caabuqyada gogosha lagu kala qaado.

Waxbarashada iyo wacyigelinta: Olole waxbarasho iyo wacyigelin ayaa la qabtay si loo kordhiyo aqoonta ku saabsan khatarta iyo waxyeellada uu leeyahay

uurka xilliga hore iyo gudniinka fircooniga ah. Ololayaasha noocan oo kale ah waxay ujeedoodu tahay inay beddelaan mawqifyada ku wajahan dhiirigelinta isbedelka dhaqannada qaldan.

Waxqabadyada daryeelka caafimaadka: Daryeel caafimaad ayaa la hirgeliyay si haweenka da'da yar loo siiyo adeegyada caafimaadka taranka, oo ay ku jiraan la-talinta kala dheeraynta dhalimada, adeegyada caafimaadka hooyada iyo daaweynta dhibaatooyinka ka dhasha gudniinka fircooniga ah.

Ka-qeybgalka bulshada: Barnaamijyada xoojinaya arimaha bulshada ayaa la hirgeliyay si loogu dhiirrigeliyo hoggaamiyayaasha bulshada iyo xubnaha kale inay qaadaan tallaabooyin wax looga qabanaayo uurka caruurnimada lagu qaado iyo gudniinka fircooniga ah. Barnaamijyada noocan oo kale ah waxay ujeedoodu tahay inay abuuraan jawi awood u leh isbedelka dhaqanada aan wanaagsaneyn.

U doodista iyo dib-u-habeynta Siyaasadda: Dadaallo wax ku ool ah ayaa la sameeyay si kor loogu qaado wacyiga khatarta iyo waxyeellada uu leeyahay uurka xilliga hore iyo gudniinka fircooniga ah iyo in kor loo qaado dib u habeynta siyaasadda. Tan waxaa ka mid ah la shaqeynta saraakiisha dawladda, hogaamiyayaasha bulshada iyo daneeyayaasha kale si kor loogu qaado taageerada siyaasadaha iyo barnaamijyada.

8.4 BARNAAMIYADA AMA HABKA LAGU HUBIYO IN LAMAANUHU HELAAN ADEEGYADA IYO MACLUUMAADKA KA CAAWINAYA GO'AANNADA CAAFIMAADKA TARANKA AYAGOO TIXGELINAYA DIINTA, DHAQANKA IYO DASTUURKA DALKA

Helitaanka macluumaadka iyo adeegyada ayaa lama huraan u ah lamaanayaasha si ay u gaaraan go'aannada caafimaadka taranka. Dhawr barnaamij iyo habraacyo ayaa la sameeyay si loo hubiyo in lamaanaha ay helaan macluumaadka iyo adeegyada .



Mid ka mid ah barnaamijyada ayaa ah kala dheereynta dhalmada, kaas oo loogu talagalay in lagu kordhiyo helitaanka adeegyada ka hortagga uurka iyo horumarinta caafimaadka taranka ee dalka. Barnaamijkan waxaa fulinaysa Wasaaradda Caafimaadka iyo Daryeelka Bulshada, waxaana uu bixiyaa habab kala duwan ee kala korinta caruurta, oo ay ku jiraan kaniiniyo, cirbado iyo habab kale oo casri ah.

Barnaamijka waxa kale oo ku jira hawlo ku saleysan arimaha bulshada, si kor loogu qaado wacyiga iyo aqoonta ku saabsan kala dheeraynta dhalmada iyo caafimaadka taranka. Hawlahani waa inay qeyb ka ahaadaan dadka u ololeeya arrimaha bulshada, haweenka iyo daneeyayaasha kale si kor loogu qaado isbedelka hab-dhaqanka loona kordhiyo baahida adeegyada.

Marka laga soo tago barnaamijka kala dheereynta dhalmada, Wasaaradda Caafimaadka iyo Daryeelka Bulshada ayaa sidoo kale bixisa adeegyada caafimaadka hooyada, oo ay ku jiraan adeegyada dhalmada iyo daryeelka dhalmada kadib. Adeegyadani waxay lama huraan u yihiin xaqiijinta daryeelka hooyada uurka leh iyo horumarinta caafimaad hooyada iyo dhallaanka.

Hay'ado kala duwan oo caalami ah, sida UNFPA, UNICEF iyo WHO ayaa ka shaqeeya horumarinta adeegyada caafimaadka taranka ee Soomaaliya. Tusaale ahaan, UNFPA waxay taageertay samaynta xarumo caafimaad oo dhawr ah oo bixiya adeegyada caafimaadka taranka, oo ay ku jiraan adeegyada caafimaadka hooyada, iyo dhallaanka oo ay ka sameysay qeybo kala duwan oo dalka ah. Waxay sidoo kale ka shaqeeyeen sidii loo xoojin lahaa awoodda shaqaalaha caafimaadka si ay u bixiyaan adeeyo caafimaad taran oo tayo leh.

Waxaa sidoo kale la sameynayaa dadaallo lagu horumarinayo sinnaanta dadka iyo awoodsiinta haweenka iyo gabdhaha si ay u gaaraan go'aannada caafimaadka taranka. Tan waxaa ka mid ah hindisayaasha loogu talagalay in lagu wanaajiyo helitaanka waxbarasho iyo fursadaha dhaqaale ee gabdhaha iyo haweenka iyo wax ka qabashada caadooyinka dhaqan ee waxyeellada leh ee xaddidaya awooddooda inay go'aanno ka gaaraan mustaqbalkooda iyo noloshooda.

8.5 HABABKA XOOJINTA BIXINTA BALLANQAADYADA ADEEGYADA CAAFIMAADKA TARANKA, XUQUUQDA AADANAHA IYO ANSHAXA

Wasaaradda Caafimaadka iyo Daryeelka Bulshada ayaa isbedel kusamesay Manhajka Umulisoooyinka Qaranka oo uu aqoonsan yahay xiriirka caalamiga ah ee umulisoooyinka, iyadoo dib u eegis ku sameysay manhajka umulisoooyinka si loo hubiyo inay buuxiyaan heerarka xirfadeed ee xirfadaha umulisoooyinka, anshaxa & xuquuqda aadanaha. Sidoo kale, Wasaaraddu waxay cusboonaysiisay hab-raacyada kala dheeraynta dhalmada ee qaranka, waxayna horumarisay buug-gacmeedka tababarka kala dheeraynta dhalmada.

Siyaasadda Cududda Shaqaalaha ee Soomaaliya waxaa la horumariyay 2014kii waxaana si rasmi ah u ansixiyay 2016kii guddiga la-talinta caafimaadka. Siyaasadda Horumarinta waa xoogga horseeda horumar kasta oo macno leh oo lagu sameeyo xaaladda caafimaadka ee dadka Soomaaliyeed. Ujeedooyinka siyaasadda waxaa ka mid ah qorsheynta, tababarka, horumarinta hoggaaminta, ka faa'iidaydiga iyo maareynta, nidaamka macluumaadka shaqaalaha caafimaadka, maalgelinta, iyo dhisidda iskaashiga si loo hergaliyo si guul leh siyaasaddan.

Shati bixinta, nidaaminta iyo ansixinta shaqaalaha caafimaadka ayaa ah mudnaanta koowaad ee dawladda Soomaaliya. Golaha Mihnadlayaasha Caafimaadka Qaranka waa hay'ad madax-bannaan oo nidaamisa xirfad-yaqaanada shaqadooda muhiimka ah, inay bulshada ka ilaaliso ku-takri-falka caafimaadka iyo horumarinta heerarka anshaxa ee xirfadlayaasha caafimaadka Soomaaliya. Waxaana la aasaasay Xeerka Golaha Xirfadlayaasha Caafimaadka Qaranka, 2020kii (LR. 31).

Hadafka Golaha Mihnadlayaasha Caafimaadka Qaranka waa:

- Diiwaangelinta iyo shati siinta dhammaan xirfadlayaasha daryeelka caafimaadka iyo korjoogteynta hab-dhaqankooda xirfadeed.
- Bixinta shatiga xarumaha caafimaadka ee u qalma in ay bixiyaan adeegyada daryeelka caafimaadka.

- Aqoonsiga machadyada tababarka caafimaadka ee soo saara shaqaalaha caafimaadka.
- Oggolaanshaha ama diidmada barnaamijyada tababarka ee dhakhaatiirta caafimaadka.
- Xaqiijinta tayada adeegyada caafimaadka in la gaarsiyo bulshada Soomaaliyeed.

8.6 HEERKA KALA KORINTA UBADKA IYO ADEEGYADA CAAFIMAADKA EE DHALMADA

Helitaanka kala dheereynta dhalhada iyo adeegyada caafimaadka taranka ee Soomaaliya ayaa weli ah caqabad, gaar ahaan tuulooyinka iyo dadka reer guuraaga ah kuwaas oo ay adag tahay in la gaaro. Si kastaba ha ahaatee, waxaa lagu dadaalayaa sidii kor loogu qaadi lahaa caymiska iyo helitaanka adeegyadan. Tusaale ahaan, wadar dhan 300 oo xarumo caafimaad ayaa bixiya adeegyada kala dheeraynta dhalhada ee dhammaan gobollada Soomaaliya.

Marka loo eego Sahanka Caafimaadka iyo Macluumaadka Dadweynaha Soomaaliyeed 2020kii, Soomaaliya waxaa lagu qiyaasaa dhimashada hooyada 692 hooyo 100,000 haween ah ee dhala, taas oo laga hortagi karay. Hooyooyin badan ayaa la kulma dhibaatooyin waaweyn xilliga uurka ama xanuuna la xiriira ilmaha caloosha ku jira. Kuwo badan ayaa u dhinta ama la ildaran helitaan la'aan ama aqoon la'aanta adeegyada caafimaadka. Dib u dhigista daryeelka caafimaadku waa mid ka mid ah arrimaha ugu muhiimsan ee gacan ka geysta dhimashada hooyada ee Soomaaliya. Tan waxaa ugu wacan aqoon la'aanta ku saabsan dhibaatooyinka ay la kulanto hooyada uurka leh, faa'iidooyinka adeegyada daryeelka caafimaadka casriga ah, iyo martabadda ay haweenka bulshada ku dhex leeyihiin oo hooseeya (Hay'adda Istaatistikada Qaran Soomaaliyeed, 2020).

Sahanka Caafimaadka iyo Macluumaadka Dadka Soomaaliyeed 2020kii waxa kale oo uu daaha ka qaaday, in kaliya 8 boqolkiiba dumarkii umulay labadii sano ee ka horaysay sahanka ay booqdeen afar ama in ka badan xarumaha caafimaadka iyo 27 boqolkiiba hooyada xilliga uurka ayaa laga tallaalay Teetanada dhallaanka. Soddon iyo kow boqolkiiba xirfaddle caafimaad ayaa caawiyay xaaladda bilawga uurka. Sahanka Caafimaadka iyo Macluumaadka Dadka Soomaaliyeed waxaa kasoo

baxay in 32 boqolkiiba keliya ee xilliga dhalhada ay la kulmeen xirfadle caafimaad.

Sahanku waxa kale oo uu shaaca ka qaaday in 21 boqolkiiba xilliga dhalhada labadii sano ee ka horeysay sahanka ay ku umuleen goob caafimaad (Hay'adda Istaatistikada Qaranka Soomaaliyeed, 2020).

Heerka hooseeya ee dhalhada xarumaha caafimaadka ee Soomaaliya waa mid walaac leh, sababtoo ah waxay kordhin kartaa halista dhibaatooyinka hooyada, dhallaanka iyo dhimashada. Haweenka ku umula meel ka baxsan goobaha caafimaadka waxaa laga yaabaa in aysan helin umuliso xirfad leh, daryeelka deg degga ah ee umusha, ama dawooyinka lagama maarmaanka u ah, taas oo kordhin karta khatarta dhibaatooyinka xilliga dhalhada.

Dadaalka lagu horumarinayo bixinta xarumaha caafimaadka ee Soomaaliya waa in mudnaanta la siiyaa kordhinta helitaanka iyo tayada adeegyada caafimaadka hooyada, gaar ahaan miyiga iyo meelaha dadka tabaaleysan daganyihiin. Tan waxaa lagu gaari karaa hindisayaal ay ka mid yihiin hagaajinta kaabayaasha, tababarro iyo in la geeyo shaqaale xirfadda daryeelka caafimaadka leh iyo kor u qaadista waxqabadyada bulshada ku saleysan si kor loogu qaado wacyiga looguna dhiirigaliyo qaadashada adeegyada daryeelka caafimaadka.

Sidoo kale, Sahanka Caafimaadka iyo Macluumaadka Dadka Soomaaliyeed 2020kii, waxa uu muujinayaa in heerka baahsanaanta ka hortagga uurka ee casriga ah ee Soomaaliya uu yahay boqolkiiba hal, halka 6 boqolkiiba haweenka hadda la qabo ay isticmaalaan hab kasta oo ay uga hortagaan uurka. Tani waxay aad uga hoosaysaa celceliska caalamiga ah ee 56 boqolkiiba (Hay'adda Istaatistikada Qaranka Soomaaliyeed, 2020).

Wasaaradda caafimaadka iyo hay'adaha kale ayaa dadaal ugu jira sidii loo heli lahaa kala dheereynta dhalhada iyo adeegyada caafimaadka taranka ee dalka. Barnaamijka kala dheeraynta dhalhada oo ay fulinayso wasaaradda caafimaadka ayaa lagu bixinayaa habab kala duwan oo looga hortagayo uurka, waxaana ka mid ah ka qeyb qaadashada bulshada si kor loogu qaado wacyigelinta iyo bixinta aqoonta ku saabsan kala dheeraynta dhalhada iyo caafimaadka taranka.

Marka lagu daro barnaamijka kala dheereynta dhalimada, waxaa jira dhawr hay'adood oo aan dawli ahayn oo ka shaqeeya horumarinta helitaanka adeegyada caafimaadka taranka ee Soomaaliya. Hay'adahaani waxay bixiyaan adeegyo kala duwan, oo ay ku jiraan adeegyada caafimaadka hooyada, kala dheeraynta dhalimada, iyo daaweynta cudurrada gogosha lagu kala qaado.

Iyadoo ay jiraan dadaalladaas, daboolidda adeegyada kala dheereynta dhalimada iyo caafimaadka taranka ee Soomaaliya ayaa weli ah mid hooseeya, gaar ahaan meelaha miyiga ah ee helitaanka adeegyada caafimaadka ay xaddidan yihiin. Colaadaha iyo xasilooni darrida dalka ka jirta ayaa sidoo kale caqabado waaweyn ku ah bixinta adeegyada caafimaadka.

Guud ahaan, hagaajinta daboolidda iyo helitaanka adeegyada kala dheereynta dhalimada iyo caafimaadka taranka ayaa lama-huraan u ah horumarinta natiijooyinka caafimaadka hooyada iyo dhallaanka iyo kor u qaadida ladnaanta shakhsiyaadka iyo qoysaska Soomaaliyeed. Dadaalo joogta ah ayaa loo baahan yahay si loo hubiyo in dhammaan dadka Soomaaliyeed ay helaan daryeelka ay u baahan yihiin.

8.7 BARNAAMIYADA AMA TALLAABOYINKA KOR LOOGU QAADAYO RAGGA IYO DHALLINYARADU INAY HELAAN MACLUUMAADKA CAAFIMAADKA TARANKA.

Waxaa jira barnaamijyo dhawr ah iyo tallaabooyin la sameeyay si loo kordhiyo wacyiga ragga iyo dhallinyarada ee xogta caafimaadka taranka, hagidda iyo adeegyada la xiriira. Tusaale :

Adeegyada ku haboon dhallinyarada: Wasaaradda caafimaadka ayaa tababar siisay shaqaalaha daryeelka caafimaadka sanad walba, inta u dhaxeysay 2019 ilaa 2022kii, si ay u bixiyaan adeegyada ku haboon dhallinyarada loona hubiyo helitaanka macluumaadka caafimaadka taranka iyo adeegyada ay ku jiraan kala dheereynta dhalimada iyo ka hortagga caabuqa gogosha lagu kala qaado.

Daladda Isku-xirka Dhallinyarada ee Soomaaliyeed waa dallad ururro dhallinyaro ay hoggaamiyaan, kuwaas oo dhiirrigeliya adeegyada caafimaadka taranka ee ku habboon dhallinyarada. Dalladan waxay dhistay rugaha caafimaadka dhallinyarada oo bixiya la-talin iyo macluumaad ku saabsan kala dheeraynta dhalimada, HIV/AIDS iyo caabuqa gogosha lagu kala qaado.

Ururka Dhakhaatiirta Soomaaliyeed wuxuu doonayaa inuu sare u qaado xaaladda caafimaad ee dhallinyarada, caruurta iyo guud ahaan bulshada Soomaaliyeed, iyadoo kor loo qaadayo awoodda iyo xirfadda dhakhaatiirta caafimaadka si ay uga jawaabaan baahiyaha kala ah; u doodista, macluumaadka iyo bixinta adeegga, iyo ajendaha ugu muhiimsan oo ah iskaa wax u qabaso.

Adeegyada caafimaadka wareega: hay'adda UNFPA waxay ka aasaastay magaalooyinka Muqdisho, Kismaayo, Baydhabo iyo Doolow xarumo caafimaad oo wareega si ay u bixiyaan adeegyada caafimaadka taranka, oo ay ku jiraan kala dheeraynta dhalimada, baaritaanka cudurrada gogosha lagu kala qaado, iyo la-talinta HIV/AIDS ee xeryaha barakacayaasha iyo bulshooyinka ku xeeran.

Waxqabadyada bulshada: Xarunta Horumarinta Haweenka Soomaaliyeed waxa ay fulinaysaa barnaamijka wax-qabadka bulshada ku saleysan, kaas oo ay qeyb ka yihiin Culimada iyo hoggaamiyayaasha dhaqanka si ay kor ugu qaadaan dhaqannada wanaagsan ee ku wajahan caafimaadka taranka. Barnaamijku wuxuu kaloo bixiyaa waxbarashada caafimaadka iyo adeegyada haweenka iyo gabdhaha.

Barnaamijyadan iyo tallaabooyinkan ayaa gacan ka geysanaya kordhinta helitaanka taranka iyo macluumaadka caafimaadka gogosha, hagitaan, iyo adeegyada ay u baahanyihiin ragga iyo dhallinyarada Soomaaliyeed, iyaga oo hagaajinaya guud ahaan caafimaadka taranka iyo badqab kooda. Si kastaba ha ahaatee, waxaa loo baahan yahay dadaal dheeri ah si kor loogu qaado hindisayaashan oo la gaarsiyo rag iyo dhallinyaro badan oo dalka ku nool.

8.8 BARNAAMIYADA AMA TALLAABOYINKA KOR LOOGU QAADAYO IN HAWENKA IYO GABDHABA AY HELAAN WARBIXINADA, HAGITAANKA IYO ADEEGYADA TARANKA:

Wasaaradda Caafimaadka iyo Daryeelka Bulshada, oo kaashanaysa saaxiibadeedda, ayaa daabacaysa habka Aasaasiga ah ee Adeegyada Caafimaadka oo caafimaadka tarankuna uu qeybka yahay, lana siiyo bulshada daryeelka caafimaadka aasaasiga ah sida (Dhalmada asaasiga ah ee deg degga ah iyo Daryeelka ubadka dhasha) xarumaha iyo Isbitaalada (Daryeel Dhameystiran ee Deg degga ah dhalmada iyo ubadka dhasha).

Waxaa jira barnaamijyo dhawr ah iyo tallaabooyin la sameeyay si loo kordhiyo wacyiga haweenka iyo gabdhaha ee xogta caafimaadka taranka, hagidda iyo adeegyada la xiriira. Tusaale ahaan

Adeegyada ay bixiyaan xarumaha caafimaadka: Dawladda Soomaaliya, iyadoo taageero ka heleysa hay'adaha UNFPA, UNICEF iyo WHO iyo saaxiibadeedda kale ee horumarka kala shaqeyya, waxay ka shaqeyneysaa xoojinta nidaamyada caafimaadka iyo kordhinta helitaanka adeegyada caafimaadka taranka ee xarumaha caafimaadka ee dalka oo dhan. Adeegyadan waxaa ka mid ah; daryeelka dhalmada iyo dhalmada ka dib, kala dheereynta dhalmada iyo adeegyada caafimaadka dhallaanka.

Mashaariicda ka turjumaysa baahida bulshada: Dhawr hay'adood ayaa fuliya barnaamijyo ku saleysan bulshada kuwaas oo ujeedadoodu tahay in la kordhiyo wacyiga iyo baahida adeegyada caafimaadka taranka ee haweenka iyo gabdhaha Soomaaliyeed. Barnaamijyadan waxaa ka mid ah waxbarashada caafimaadka bulshada, wacyigalinta, iyo adeegga caafimaadka guryaha.

Adeegyada caafimaadka ee wareega: xarumaha caafimaadka wareega waxay bixiyaan adeegyo, ay ku jiraan fariimaha taleefanka gacanta, adeegyada waxbarashada caafimaadka iyo la-talinta, waxaana adeegsada isbitaallada gaarka loo leeyahay iyo rugaha caafimaadka si kor loogu qaado helitaanka macluumaadka iyo adeegyada caafimaadka taranka ee haweenka iyo gabdhaha. Adeegyadan ayaa si gaar ah muhiim ugu ah dhulka miyiga ah oo ay

helitaanka xarumaha caafimaadku xaddidan yihiin.

Ka qaybgalinta ragga iyo dhallinyarada: Barnaamijyo dhawr ah ayaa ragga iyo dhallinyarada ka qeybgalaan oo ku saabsan caafimaadka taranka si kor loogu qaado caadooyinka iyo dhaqanka wanaagsan loona kordhiyo taageerada haweenka iyo habluhu si ay u helaan adeegyada caafimaadka taranka. Si kastaba ha ahaatee, adeegyada noocaan oo kale ah ayaa xaddidan sababo la xiriira caqabadaha dhaqan iyo kuwa bulsho sidaa darteedna loo baahan yahay in la kordhiyo.

U doodista iyo dib u habeynta siyaasadda: Dhawr urur ayaa u ololeynaya siyaasadda iyo dib u habeynta sharciga si kor loogu qaado awoodaha haweenka iyo gabdhaha ee helitaanka adeegyada caafimaadka taranka, oo ay ku jiraan horumarinta siyaasadaha qaran iyo sharciyada taageeraya xuquuqda caafimaadka taranka.

Barnaamijyadan iyo tallaabooyinkan ayaa gacan ka geysanaya kordhinta awoodaha haweenka iyo gabdhaha ee helitaanka macluumaadka caafimaadka taranka, hagidda iyo adeegyada kale. Si kastaba ha ahaatee, waxaa weli jira shaqo badan oo u baahan in la qabto si loo hubiyo in dhammaan haweenka iyo gabdhaha ay helaan adeegyada muhiimka ah, gaar ahaan miyiga iyo bulshooyinka ku hareereysan.

8.9 BARNAAMIYADA AMA TALLAABOYINKA LAGU DHISAYO AWOODDA SHAQAALHA CAAFIMAADKA SI LOO HORMARIYO ADEEGYADA CAAFIMAADKA TARANKA

Waxaa jira barnaamijyo iyo tallaabooyin dhawr ah si loo dhiso awoodda shaqaalaha caafimaadka ee Soomaaliyeed, korna loogu qaado tayada adeegyada caafimaadka taranka. Tusaale ahaan :

Tababarka iyo shahaado bixinta: Dawladda Soomaaliya, iyadoo taageero ka heleysa hay'adda UNFPA iyo bahwadaagta kale ee horumarinta, ayaa fulineysa barnaamijyo tababar si loo dhiso awoodda shaqaalaha caafimaadka si ay u bixiyaan adeegyada caafimaadka taranka oo tayo sare leh. Barnaamijyadan waxaa ka mid ah tababar ku saabsan kala dheereynta dhalmada, daryeelka dhalmada ka hor iyo ka diba iyo adeegyada caafimaadka hooyada iyo dhallaanka. Ilaa 2018kii wadar dhan

525 shaqaale caafimaad ah ayaa la baray bixinta kala dheeraynta dhalnada iyadoo la adeegsanayo baratakoolka xuquuqul insaanka.

Joogteynta tababarrada: Tababarro joogto ah ayaa la siiyaa shaqaalaha caafimaadka si ay u kordhiyaan aqoontooda iyo xirfadahooda ku saabsan horumarka cusub ee adeegyada caafimaadka taranka.

Taageeridda Kormeerka: Shaqaalaha caafimaadka waxaa kormeera masuuliyiinta sare ee caafimaadka iyo kormeerayaasha si kor loogu qaado tayada adeeggooda.

Hindisaha hagaajinta tayada: Hindisaha hagaajinta tayada ayaa la fulinayaa si kor loogu qaado tayada adeegyada caafimaadka taranka ee xarumaha caafimaadka Soomaaliyeed. Tallaabooyinkan waxaa ka mid ah hagaajinta, ka-hortagga caabuqa iyo tallaabooyinka xakameynta, xoojinta maareynta kala go' la'aanta adeegyada iyo kor u qaadista isdhexgalka adeeg-bixiyayaasha.

Nidaamyada macluumaadka: Dawladda Soomaaliya, iyadoo taageero ka heleysa bahwadaagta horumarinta, waxay ka shaqeyneysaa iney xoojiso nidaamyada macluumaadka caafimaadka si loola socdo loona qiimeeyo tayada adeegyada caafimaadka taranka ee dalka. Tan waxaa ka mid ah horumarinta iyo hirgelinta agabka xog ururinta iyo falanqaynta si kor loogu qaado tayada adeeg bixiyayaasha.

Iskaashiga iyo wadashaqeynta: Dawladda Soomaaliya iyo bahwadaagta horumarinta ayaa iska kaashanaya sidii loo dhisi lahaa awood shaqaale caafimaad oo tayo sare leh, si ay u bixiyaan adeegyo caafimaadka taranka. Tan waxaa ku jira iskaashiga ururrada xirfadlayaasha, machadyada tacliinta, iyo ururrada bulshada rayidka ah si ay u siiyaan tababarro iyo la talin shaqaalaha caafimaadka.

Barnaamijyadan iyo tallaabooyinkan ayaa gacan ka geysanaya dhisidda awoodda shaqaalaha caafimaadka ee Soomaaliyeed si loo horumariyo tayada adeegyada caafimaadka taranka. Si kastaba ha ahaatee, waxaa weli loo baahan yahay maalgalin iyo dhaqaale dheeraad ah si kor loogu qaado hindiseyaashan iyo wanaajinta helitaanka adeegyada caafimaadka taranka oo tayo leh guud ahaan Soomaaliya.

8.10 SIYAASADAHA IYO BARNAAMIJYADA LAGU DHIIRI GELINAYO AMA LAGU ILAALINO SHAQAALAHA CAAFIMAADKA

Soomaaliya waxa ay wajaheysaa caqabado waaweyn oo ku aaddan sii haynta iyo dhiirigelinta cududda shaqaalaha caafimaadka, oo ay ku jiraan bixiyeyaasha adeegyada caafimaadka taranka. Si kastaba ha ahaatee, waxaa jira siyaasado iyo barnaamijyo dhawr ah oo loo dejiyay si wax looga qabto arrintan. Waa kuwan qaar kamid ah:

Siyaasadda horumarinta Cududda Shaqaalaha caafimaadka: siyaasaddan la sameeyay, waxay dhiirigelinaysaa oo shaqada ku nagaynaysaa shaqaalaha yar ee daryeelka caafimaadka ee dalka.

Dhiirigelinta iyo Abaalmarinta: Dawladda Soomaaliya iyo la-hawlgalayaasha horumarinta waxay ka shaqeynayaan sidii ay udhiirigelin lahaayeen una abaalmarin lahaayeen shaqaalaha caafimaadka (Dhiirigelintan waxaa ka mid ah gunno, iyo faa'iidooyin kale).

Fursadaha horumarinta xirfadeed: Tababarro iyo joogteynta barnaamijyada waxbarashada ayaa la siinayaa shaqaalaha caafimaadka si ay u horumariyaan xirfadahooda iyo aqoontooda, taas oo kordhinaysa ku qanacsanaanta shaqada iyo sii joogteynta.

Fursadaha horumarinta shaqada: Barnaamijyo ayaa loo sameeyay si loogu abuurto fursadaha horumarinta shaqada iyo shaqaalaha caafimaadka. Tani waxay ka caawinaysaa dhiirigelinta shaqaalaha iyo inay u sii adeegaan bulshada.

Deegaan ku haboon shaqada: Dawladda Soomaaliya iyo la-hawlgalayaasha horumarinta waxay ka shaqeyaan abuurista deegaan ku haboon shaqada iyo shaqaalaha caafimaadka, oo ay ku jiraan amni iyo jawi shaqada ku haboon, taageero iyo u diyaarin agab iyo qalab ku filan.

Abaalmarinta ku saleysan waxqabadka: Abaalmarinta ku saleysan waxqabadka ayaa la hirgeliyay si loogu dhiirgaliyo shaqaalaha caafimaadka in ay u bixiyaan adeegyada caafimaadka taranka si tayo sare leh. Habkani wuxuu siinayaa dhiirigelin maaliyadeed shaqaalaha caafimaadka, kuwaas oo gaara heerkii waxqabad ee laga rabay, taas oo ku dhiirigelinaysa inay bixiyaan daryeel tayo

wanaagsan leh oo ayna sii wadaan u adeegidda bulshadooda.

Taageerada bulshada: Taageerada bulshada ee bixinta adeegga caafimaadka waxay gacan ka geysanaysaa dhiirigelinta shaqaalaha caafimaadka iyo inay u sii wadaan adeegga bulshadooda. Tan waxa ku jira in lagu soo daro qeybaha bulshada go'aan qaadashada, hannaanka falcelinta, iyo u mahadnaqa iyo abaal marinta shaqaalaha caafimaadka ee bixiya daryeel tayo fiican leh.

8.11 HORUMARINTA ADEEGYADA CAAFIMAADKA DHALMADA SI LOO XAQIJIYO YAREYNTA KHARASHKA ADEEGGA DHALMADA

Dhammaan xarumaha dawladda ee bixiya adeegyada caafimaadka hooyada iyo dhallaanka waa lacag la'aan. Dawladda iyo la-hawlgalayaasheeda waxay dhaqaale ka helaan deeq-bixiyeyaasha si loo hubiyo in adeegyada caafimaadka hooyada iyo dhallaanka lacag la'aan noqdaan.

Waxaa jira dhawr hab oo loo isticmaali karo horumarinta ama wax ka beddelka adeegyada caafimaadka hooyada si loo xaqiijiyo suurtagalnimada iyo yareynta kharashaadka adeegga dhalmada. Waa kuwan qaar kamid ah:

Shaqo daadejin: waa in shaqooyinka qaarkood loo daadejiyo shaqaalaha caafimaadka heerka hoose kuwaas oo loo tababaro in ay bixiyaan daryeelka lagama maarmaanka ah. Marka la eego xaaladda caafimaadka hooyada, tan waxaay ka mid noqoneysaa in la tababaro umulisooyinka ama shaqaalaha kale ee hoose, taas oo yareyneysa kharashka iyo kordhinta helitaanka daryeelka.

Isku dhafka adeegyada: Isku-dhafka adeegyada caafimaadka hooyada iyo adeegyada kale ee caafimaadka, sida kala dheereynta dhalmada iyo baaritaanka iyo daweynta HIV, waxay hoos u dhigayaan kharashaadka waxayna kordhinayaan helitaanka daryeelka. Tusaale ahaan, bixinta adeegyada kala dheeraynta dhalmada inta lagu jiro booqashooyinka daryeelka dhalmada ka hor, waxay yareyn kartaa baahidda in bookhashooyin gaar ah loo sameeyo kala dheeraynta dhalmada, taas oo yareyn karta waqtiga iyo lacagtaba.

Isticmaalka tiknoolajiyadda: Farsamooyinka casriga ah, sida Telemedicine oo ah fogaan-ku-

daaweyn iyo adeegyada caafimaadka telefoonka, ayaa loo isticmaali karaa in la kordhiyo helitaanka adeegyada caafimaadka hooyada iyo dhimista kharashaadka. Tusaale ahaan, Telemedicine waxaa loo isticmaali karaa in lagu bixiyo la-talin wareegta iyo baaritaanno, halka adeegyada caafimaadka telefoonnada loo isticmaali karo in ay bixiyaan waxbarashada caafimaadka iyo xasuusinta.

Waxqabadyada bulshada ku saleysan: Waxqabadyada bulshada ku saleysan, sida barnaamijyada shaqaalaha caafimaadka bulshada iyo hawlaha abaabulka bulshada, ayaa loo isticmaali karaa in lagu kordhiyo wacyiga iyo baahida adeegyada caafimaadka hooyada, taas oo wanaajin karta suurtagalnimada iyo dhimista kharashaadka.

Iskaashiga dawladda iyo ganacsiyada gaarka ah: waxaa loo isticmaali karaa in laga faa'ideysto dhaqaalaha iyo khibradda hay'adaha dawladda iyo ganacsiga gaarka loo leeyahay si loo horumariyo adeegyada caafimaadka hooyada. Tusaale ahaan, ganacsiga gaarka loo leeyahay waxay ku hawlgeli karaan bixinta adeegyada caafimaadka hooyada, halka qeybta dawladduna ay bixin karto kormeer iyo taageero.

Dhaqangelinta hababkan, iyo adeegyada caafimaadka hooyada waxaa lagu horumarin karaa ama wax looga beddeli karaa guud ahaan dalka, si loo xaqiijiyo suurtagalnimada iyo in la dhimo kharashaadka. Si kastaba ha ahaatee, waxaa loo baahan yahay in la sii wado maal-galinta si kor loogu qaado hindisayaashan, loona hubiyo in dhammaan haweenka Soomaaliyeed ay helaan adeeg caafimaad oo tayo leh.

8.12 BARNAMIYADA LAGU HORUMARINAYO CAAFIMAADKA DHALLINYARADA OO AY KAMID YIHIIN DHINACA SAYKOLOJIGA IYO LA DAGAALLANKA DHAQAMADA WAXYEELADA LEH,GAAR AHAAN KUWA LA XIRIIRA SIGAARKA, KHAMRIGA, DAROOGADA IYO NABADGELYADA WADOOYINKA

Waxaa jira barnaamijyo dhawr ah oo laga heli karo Soomaaliya si kor loogu qaado caafimaadka dhallinyarada, sida; Saykolojiga, iyo la dagaalanka dhaqamada waxyeelada leh; sida Sigaarka, Daroogada iyo Badbaadada Waddooyinka. Dalka

Soomaaliya sharci ahaan Isticmaalka khamriga waa mamnuuc.

Tusaale ahaan waxaa soo qaadan karnaa ururrada ka shaqeeya barnaamijyada aan kor ku xusnay:

Dalladda hormarinta iyo isku xirka dhallinyarada soomaaliyeed: waa urur dhallinyaro oo ka shaqeeya horumarinta caafimaadka iyo dareeelka dhallinyarada Soomaaliyeed. Waxay bixiyaan tababarro, waxbarasho, iyo taageeridda dhallinyarada dhinacyo kala duwan, sida caafimaadka, xanaaneynta iyo ka hortagga tacaddiyada, daroogada iyo badbaadada waddooyinka.

Adeegyada ku habboon Dhallinyarada: Adeegyada caafimaadka ee si gaar ah loogu talagalay dhallinyarada waxay qeyb weyn ka qaadanayaan kor u qaadista caafimaadka dhallinyarada, ayagoona bixinaya adeegyo ku habboon baahiyaha dhallinyarada iyo rabitaankooda. Adeegyadan waxaa ka mid ah; kala talinta Isticmaalka Maandooriyaha, Caafimaadka dhimirka iyo badbaadada waddooyinka, iyo sidoo kale inay kala taliyaan kala korinta ubadka iyo adeegyada kale ee Caafimaadka Taranka.

Ildhexgal Bulshada : Waxqabadyada Bulshada dhexdeeda ah ayaa loo isticmaali karaa in lagu hormariyo caafimaadka dhallinyarada, iyadoo kor loo qaadayo wacyiga dhallinyarada, toosinta hab dhaqankooda, iyo bixinta helitaanka agab iyo adeegyo hormarineed. Tusaale ahaan, dhaqdhaqaaqyada abaabulka bulshada waxaa loo isticmaali karaa in lagu kordhiyo wacyiga dhallinta ay u leeyihiin waxyeelada isticmaalka maandooriyaha iyo si kor loogu qaado u helidda dhalinta caafimaad togan.

Ololaha Caafimaadka ee Dadweynaha: Ololaha caafimaadka dadweynaha waxaa loo isticmaalaa in kor loogu qaado wacyiga iyo horumarinta dhalliyaro habdhaqan caafimaad leh. Ololayaashani waxaa lagu baahin karaa warbaahinta kala duwan oo ay ku jiraan baraha bulshada, si loo gaarsiyo dhegeystayaal badan.

Siyaasadda iyo hirgelinta sharciga: Siyaasadda iyo hirgelinta sharciga ayaa loo adeegsadaa si wax looga qabto dhaqamada aan fiicneyn sida cabidda sigaarka iyo khamriga, isticmaalka daroogada iyo badqabka waddooyinka. Tusaale ahaan, shuruuc iyo xeerar ayaa la hirgelin karaa si loo xaddido

in laga iibiyo tubaako caruurta aan qaan-gaarin, sidoo kale waxaa la dhaqan gelin karaa sharciyada badqabka waddooyinka si loo yareeyo shilalka.

Barnaamijyada lagu taageero Caafimaadka dhimirka iyo Cilmi-nafsiga : Barnaamijyada lagu taageero Caafimaadka dhimirka iyo Cilmi-nafsiga waxay muhiim u yihiin horumarinta dhallinyaro hagaagsan nafsad ahaan. Barnaamijyadani waxay ka heli karaan da'yarta la nool cudurrada dhimirka sida qalbi jabka iyo werwerka talooyin wax ku ool ah.

Sidoo kale, hirgelinta barnaamijyadan iyo hindisayaashan, waxa ay hagaajin karaan caafimaadka dhallinyarada, oo ay kamid tahay wax ka qabashada cudurrada nafsiga iyo la dagaallanka dhaqamada aan bulshada u wanaagsaneyn sida; cabbidda sigaarka iyo khamriga, isticmaalka daroogada iyo badqabka waddooyinka. Intaa waxaa dheer, si loo hirgaliyo korna loogu qaado barnaamijyadan waxaa loo baahan yahay maalgelin joogto ah iyo abuuris ilo dhaqaale iyo in la hubiyo in dhammaan dhallinyaradu helaan adeegyo iyo macluumaad caafimaad oo tayo leh.

8.13 BARNAAMIJYADA LA XIRIIRA KA HORTAGGA, BAARISTA IYO DAWEYNTA HIV/AIDS IYO CUDURRADA KALE EE GOGOSHA LA ISUGU GUDBIYO

Guud ahaan faafitaanka HIV-ga Soomaaliya aad ayuu u hooseeyaa marka loo barbardhigo dalalka kale ee adduunyada, haddana waxaa muhiim ah in la helo barnaamijyo la xiriira ka-hortagga, baarista, iyo daweynta HIV/AIDS-ka iyo cudurrada kale ee lagu kala qaado gogosha.

Si loo joogteeyo faafin la'aanta ama loo ciribtiro cudurkan, dawladda Soomaaliya waxay dejisay hab-raacyo lagu daweyo dadka la nool xanuunka HIV/AIDS-ka, sidoo kale waxaa jira istaraatiijiyadda HIV/AIDS-ka oo qeexaysa; ka-hortagga, baarista iyo daawaynta HIV/AIDS-ka.

Barnaamijyada ka jira Soomaaliya waxaa kamid ah:

Barnaamijyada ka hortagga HIV/AIDS-ka: Barnaamijyada ka hortagga waxaa ka mid ah; wacyigelin, waxbarasho iyo la-talin, iyo in dadka lagu dhiiragaliyo inay isbaaraan. Barnaamijyadani waxay ujeedadoodu tahay in la yareeyo khatarta gudbinta HIV iyo horumarinta habdhaqanka.

Barnaamijyada Baaritaanada HIV/AIDS-ka:

Barnaamijyada baaritaanka HIV/AIDS-ka wuxuu saldhig u yahay ogaanshaha shakhsiyaadka la nool cudurka HIV/AIDS-ka, sidoo kale in la siiyo daryeel iyo daweyn ku habboon. Intaa waxaa dheer, gudaha Soomaaliya waxa ka jira xarumo gaar ah oo loo asteeyay in ay bixiyaan adeegyo barrintaan iyo talo siinta ee dadka la nool cudurka HIV/AIDS-ka si ay ula socdaan xaaladdooda caafimaad, una helaan garab istaag iyo daweyn.

Barnaamijyada Daaweynta HIV/AIDS-ka:

Barnaamijyada daweynta ayaa lama huraan u ah maareynta HIV/AIDS iyo cudurrada kale ee lagu kala qaado gogosha. Waxaa Soomaaliya gudaheeda ka jira barnaamijyo lagu daweyo dadka la nool cudurka HIV/AIDS-ka oo loo yaqaano Antiretroviral Therapy (ART), ujeedka barnaamijkan waa in kor looqaado habdhiska difaaca jirka iyo yareynta fidista cudurka HIV/AIDS.

Barnaamijyo kobcineed: Barnaamijkan ayaa muhiim u ah xoojinta nidaamka daryeelka caafimaadka iyo hubinta in shaqaalaha daryeelka caafimaadku ay helaan aqoonta iyo xirfadaha lagama maarmaanka u ah bixinta adeeg caafimaad oo tayo leh ee dadka la nool HIV/AIDS-ka iyo adeegyada cudurada gogosha lagu kala qaado.

Barnaamijyada bulshada : Barnaamijyada bulshada waxay gacan ka geysan karaan kor u qaadista wacyiga dhanka HIV/AIDS-ka iyo cudurrada kale ee lagu kala qaado gogosha, sidoo kale waxay hagaajiyaan hab dhaqanka. Barnaamijyadani waxay

kaloo ku lug yeelan karaan wacyigalinta iyo ra'yi wadaagga bulshada, wax wada barasho, istaageerid iyo in la ogaado dadka bulshada dhexdeeda ku dhiban.

Marka la hirgeliyo barnaamijyadan, Soomaaliya waxay sii joogteyn kartaa hoos u dhigidda faafitaanka feyraska HIV, iyo ka hortagga faafitaanka cudurrada kale ee gogosha lagu kala qaado. Si kastaba ha ahaatee, waxaa loo baahan yahay maalgelin iyo ilo dhaqaale oo joogto ah si loo hubiyo in barnaamijyadani yihiin kuwo waxtar u leh bulshada iyo inuu si habsami leh u gaaro dhammaan kuwa u baahan.

8.14 SHARCIYADA ILAALINTA XUQUUQDA AADANAHA EE DADKA LA NOOL CUDURKA HIV/AIDS WUXUU MAMNUUCAYAA DHAMMAAN NOOCYADA FAQUUQA IYO TACADDIYADA LAGULA KACO

Waxaa Soomaaliya ka jira sharciyo ujeedadoodu tahay in la ilaaliyo xuquuqda dadka la nool HIV/AIDS oo mamnuucaya takoorka iyo xadgudubyada ka dhanka ah. Siyaasadda ugu muhiimsan waa siyaasadda Qaranka Soomaaliyeed ee HIV/AIDS oo la ansixiyay 2016kii. Siyaasaddu waxay qeexeysaa in dadka la nool HIV/AIDS ay xaq u leeyihiin inay helaan adeeg caafimaad, shaqo, waxbarasho iyo adeegyo kale iyadoo aan la takoorkin. Waxa kale oo ay mamnuucday takoorka ku saleysan xaaladdaha HIV, waxayna ku baaqaysaa horumarinta xuquuqul insaanka iyo in la dhimo faquuqa iyo takoorka lagu hayo dadka la nool HIV/AIDS.



Marka laga soo tago siyaasadda qaranka, Soomaaliya waxay ansixisay dhawr heshiis oo caalami ah oo dhawraya xuquuqda dadka la nool HIV/AIDS, oo ay ku jiraan Baaqa Caalamiga ah ee Xuquuqda Aadanaha, Axdiga Caalamiga ah ee Xuquuqda Madaniga iyo Siyaasadda iyo Axdiga Caalamiga ah ee Dhaqaalaha, Bulshada iyo Xuquuqda Dhaqanka.

Iyadoo ay jiraan sharciyadaas iyo siyaasadahaas, hadana takoorka iyo xadgudubka lagu hayo dadka la nool HIV/AIDS wali way ka jiraan Soomaaliya. Dad badan oo la nool HIV/AIDS ayaa la kulma takoorid bulsho iyo tacaddiyo. Si kastaba ha ahaatee, waxaa lagu dadaalayaa sidii kor loogu qaadi lahaa wacyi gelinta, yareynta takoorka, iyo in la dhawro lana ilaaliyo xuquuqda dadka la nool HIV/AIDS.

8.15 BARNAAMIYADA AMA TALLAABOYINKA LAGU ILAALIYO XUQUUQDA DADKA LA NOOL HIV/ AIDS WAXAY MAMNUUCAYAAN DHAMMAAN NOOCYADA TAKOORKA IYO XADGUDUBYADA LAGULA KACO

Barnaamijyada iyo tallaabooyinka ujeedkoodu yahay in lagu ilaaliyo xuquuqda dadka la nool HIV/AIDS iyo mamnuucidda takoorka iyo xadgudubyada ka dhanka ah ee Soomaaliya waxaa ka mid ah.

Ololaha u doodista iyo wacyigalinta: Uurrada aan dawliga ahayn iyo ururrada bulshada rayidka ah ee Soomaaliya ayaa wada olole u doodis iyo wacyigelin ah oo looga gol leeyahay in lagu horumariyo xuquuqda dadka la nool HIV/AIDS, laguna dhimo faquuqa iyo takoorka lagu hayo. Sidoo kale, sanadkii 2020-kii ayaa dalka Soomaaliya laga sameeyay sahan ku saabsan heerka takoorka dadka la nool cudurka HIV/ADS-ka, taas oo natiijadii ka soo baxday ay muujinayso in aad loo dhaleeceeyo dadka la nool HIV/AIDS-ka.

Helitaanka daryeel Caafimaad: Dawladda Soomaaliya iyo ururrada bulshada rayidka waxay dadka la nool HIV/AIDS siiyaan adeegyo daryeel caafimaad, oo ay ku jiraan daweynta iyo ka hortagga. Tani waxay hubinaysaa in dadka la nool HIV/AIDS ay helaan daryeelka iyo daweynta ay u baahan yihiin oo aayna takoorin bixiyayaasha daryeelka caafimaadka.

Aqoon kororsi: Barnaamijyada aqoon kororsiga waxa loo hirgeliyay si loo hubiyo in shaqaalaha daryeelka caafimaadka, saraakiisha fulinta sharciga, iyo hawl-wadeennada kale ee ay khusayso ay helaan aqoonta iyo xirfadaha ay ku bixiyaan daryeelka iyo taageerada ku habboon dadka la nool HIV/AIDS.

Isku xirka iyo kooxaha wax taageera: Isku-xirka iyo kooxaha wax taageera ayaa loo aasaasay si ay u siiyaan meel ay ku nabad galaan dadka la nool HIV/AIDS, si ay u wadaagaan waayo-aragnimadooda, isuna taageeraan, oo ay ugu doodaan xuquuqdooda. Guud ahaan, iyadoo loo baahan yahay in wax badan laga qabto arrimahaas si loo hubiyo in si buuxda loo ilaaliyo xuquuqda ay leeyihiin dadka la nool HIV/AIDS ee Soomaaliyeed, waxaa jira dadaallo iyo barnaamijyo socda oo kor loogu qaadayo wacyigelinta, bixinta taageerada, iyo dhimista takoorka iyo wax yeeleynta.

8.16 BARNAAMIYADDA BAR- TILMAAMEEDSANAYA RAGGA IYO DHALLINYARADA EE LA DAGAALANKA XADGUDUBKA GALMADA IYO TACADIYADA KA DHANKA AH HAWEENKA IYO GABDHABA

Waxaa jira barnaamijyo bar-tilmaameedsanaya ragga iyo dhallinyarada si loola dagaallamo xadgudubyada iyo tacaddiyada ka dhanka ah haweenka iyo gabdhaha Soomaaliyeed. Barnaamijyadan ayaa ujeedadoodu tahay in ragga iyo dhallinyarada ay qeyb ka noqdaan sidii looga hortagi lahaa tacaddiyada ku saleysan jinsiga, iyadoo inta badan ah kuwa geysta xadgudubyada noocan ah.

Mid ka mid ahi waa barta ka-qeybgalka dhallinyarada ee UNFPA, oo dhallinyarada ka qeybgalaan wadhadallada sidii looga hortagi lahaa xadgudubyada ku saleysan jinsiga. Madashu waxay taageero iyo tababarro siisaa dhallinyarada, iyadoo awood loo siinayo inay noqdaan u doode sinnaanta jinsiga iyo xuquuqda aadanaha. Iyada oo taageero ka heleysa UNFPA iyo saaxiibada kale, Wasaaradda Haweenka iyo Xuquuqul Insaanku waxay taageertaa goobaha ilaalinta haweenka iyo gabdhaha iyo xarumaha tacaddiyada ka dhanka ah haweenka. Xarumahaasi waxay dhibanayaasha u fidiyaan adeegyo naf bad baadin ah.

Sidoo kale, dhawr hay'adood iyo ururrada bulshada rayidka ah ayaa ku hawlan sidii ragga iyo dhallinyaradaba qeyb uga ahaan lahaayeen la dagaalanka xadgudubyada ku saleysan jinsiga. Tusaale ahaan, Xarunta Horumarinta Haweenka Soomaaliyeed waxay kala shaqeysaa ragga iyo dhallinyarada sidii looga hortagi lahaa waxyeelada dumarka iyo in la dhiirrigeliyo kor u qaadida garaadkooda.

Dedaalladaas inkastoo ay jiraan, xadgudubyada ku saleysan jinsiga ayaa weli ah dhibaato weyn oo ka jirta Soomaaliya, waxaa kale oo loo baahan yahay in shaqooyin badan la qabto si looga hortago loogana jawaabo tacaddiyada noocaas ah. Tani waxaa ka mid ah in ragga iyo dhallinyarada laga qeybgeliyo si wax looga qabto sababaha asalka u ah xadgudubyada ku saleysan jinsiga iyo kor u qaadista sinnaanta jinsiga.

8.17 SHARCIYADA AMA SIYAASADAHA SI LOO XAQIJIYO IN HAWEENKA IYO DHIBANAYAASHA XADGUDUBYADU AY HELAAN ILAALIN, CAAFIMAAD IYO DARYEEL MASKAXEED, LOONA GUDBIYO HAY'ADAHA AWOODDA U LEH, OO AY KU JIRAAN CAAFIMAADKA, CADAALADA IYO HAY'ADAHA BOOLISKA

Soomaaliya waxay leedahay sharciyo iyo siyaasado lagu xaqiijinayo in haweenka iyo dhibanayaashu ay helaan ilaalin, caafimaad iyo daryeel nafsi ah iyo u gudbinta hay'adaha awoodda u leh. Hase yeeshee, dhaqan gelinta sharciyadan iyo siyaasadahan ayaa inta badan xaddidan oo ay sabab u tahay dhaqaale la'aan, awood la'aan iyo rabitaan siyaasadeed oo aan jirin.

Dawladda Soomaaliya waxa ay sidoo kale dejisay Siyaasad Qaran oo dhinaca Jinsiga ah, kaas oo looga gol leeyahay in lagu hormariyo sinnaanta dadka iyo ilaalinta xuquuqda haweenka iyo gabdhaha. Siyaasaddan waxaa ka mid ah qodobo ku aaddan ka hortagga xadgudubyada ku saleysan jinsiga, ilaalinta dhibanayaasha, iyo bixinta caafimaadka iyo daryeel nafsi ah.

Intaas waxaa dheer, dhawr hay'adood oo aan dawli aheyn iyo hay'ado caalami ah ayaa ka shaqeynaya in ay taageero iyo adeegyo u fidiyaan dhibanayaasha xadgudubyada ku saleysan jinsiga ee Soomaaliya.

Tusaale ahaan, hay'adda UNICEF waxay taageero iyo adeegyo nafsi ah siisaa dhibanayaasha, halka Guddiga Caalamiga ah ee Laanqayrta Cas uu bixiyo daryeel caafimaad iyo taageeridda dhibanayaasha.

Iyadoo ay jiraan sharciyadan iyo siyaasadahan, hadana haweenka iyo dhibanayaasha kale ee Soomaaliya waxay wajahaan caqabado ballaaran oo ka hor istaagaya helitaanka ilaalin, caafimaad iyo daryeel nafsi ah iyo u gudbinta hay'adaha awoodda u leh. Colaadaha iyo amni darrada ka socda dalka oo ay weheliso dhaqaale iyo awood yariba, ayaa adkeynaya in la xaqiijiyo in sharciyada iyo siyaasadahan si habsami leh in loo hirgeliyo.

8.18 BARNAMIYADA AMA HANNAANKA LAGU SUGO IN HAWEENKA IYO DADKA DHIBANAYAASHA U AH XADGUDUBYADA IN AY HELAAN AMMAAN, CAAFIMAAD IYO DARYEEL MASKAXEED, LOONA GUDBIYO HEY'ADAHA AY KAMIDKA YIHIIN CAAFIMAADKA, CADAALADA IYO BOOLISKA.

Soomaaliya waxay leedahay barnamijyo iyo hannaan loogu talagalay in haweenka iyo dadka xadgudubyada la kulamay in ay helaan badqab, caafimaad, daryeel iyo latalin caafimaad, loona gudbiyo hay'adaha awoodda u leh inay wax ka qabtaan arrimahooda sida kuwa caafimaadka, cadaaladda iyo hay'adaha booliska. Si kastaba ha ahaatee hirgalinta barnamijyadan iyo qaababkan waa kuwo xaddidan ayada oo ay ugu wacantahay, dhaqaale darro, awood yari dhanka hay'adihii wax ka qaban lahaa iyo rabitaan siyaasadeed oo aan jirin.

Xarumaha barnamijyada noocan ee tacaddiyada ee la keeno waxaa kamida One Stop Centers. Xarumahaan waxay bixiyaan adeegyo kala duwan oo ay kamid yihiin daweyn, latalin, in sharciyada laga caawiyo iyo in loo gudbiyo hay'addaha ku shaqada leh. One Stop Centers waxaa hawlgaliyay dawladda soomaaliya waxaana caawiya hay'addaha caalamiga ah oo ay kamid yihiin UNFPA iyo UNICEF.

Intaas waxaa dheer, dhawr urur oo aan dawli ahayn kuwaas oo ayagana caawiya dadka tacaddiyada jinsiga ku saleysan loogu geeysto soomaaliya. Tusaale ahaan waxaa kamida Xarunta Horumarinta Haweenka Soomaaliyeed (Somali Women Development Center) oo kashaqaysa

in guryo ammaan ah la dejiyo dadkaas lana siiyo hooy, cunto, daryeel caafimaad iyo la-talinta ay u baahan yihiin.

Sidoo kale ciidamada booliska Soomaaliya waxay leeyihiin ciidamo khaas ah kuwaas oo ka jawaaba wax ka qabashada ficillada jinsiga ku saleysan, qeybahan ciidanka kamidka ah waxaa loo tababaray inay maamulaan xaaladaha adag, ayna xaqiijiyaan in dhibanayaasha ay helaan taageerada iyo dhawrida ay u baahan yihiin. Sidoo kale dawladdu waxay hawlgalisay maxkamado khaas u ah inay wax ka qabtaan arrimahan ku saleysan tacaddiyada.

Inkasta oo ay jiraan barnaamijyada iyo qaababkan aan kor kusoo xusnay, haddana wali dumarka iyo dadka dhibanayaasha ah ee Soomaaliya waxay wajahayaan caqabado ka haysta iney helaan ilaalin, caafimaad iyo latalin iyo in loo gudbiyo hay'adaha u xilsaaran wax kaqabashada xaaladahan. Isku-dhacyada joogtada ah iyo ammaan la'aanta waddanka kajirta ayna ku lamaan tahay dhaqaale yarida iyo farsamo la'aanta ayaa xaaladda ka dhigaysa in aysan fulin barnaamijyada loogu talagay in wax looga qabto xaaladahan.

8.19 BARNAAMIYADA WAXBARASHADA BULSHADA IYO WACYIGELINTA XUQUUQDA AADANAHA

Wasaaradda haweenka iyo horumarinta xuquuqul insaanka ayaa waday barnaamijyo lagu wacyigelinayo xuquuqda aadanaha iyo wax ka qabashada baahiyaha gaarka ah ee dadka baayiha gaar ah qaba, dadka laga tirada badan yahay iyo dadka nugul.

Dhawr hay'adood oo aan dawli ahayn iyo hay'ado caalami ah ayaa ka shaqeynaya sidii kor loogu qaadi lahaa wacyigalinta xuquuqda aadanaha ee Soomaaliya. Tusaale ahaan, Xarunta Horumarinta Haweenka Soomaaliyeed waxay waddaa barnaamijyo ku saleysan bulshada, kuwaas oo ujeedadoodu tahay horumarinta sinnaanta iyo xuquuqda aadanaha. Barnaamijyadan waxaa ka mid ah tababarro ku saabsan xuquuqul insaanka iyo xadgudubyada ku saleysan jinsiga iyo ololeyaal wacyigelineed oo loo sameynayo bulshada, culimada, iyo odayaasha dhaqanka.

Wasaaradda Caafimaadka iyo Daryeelka Bulshada ayaa la kulanta caqabado badan oo ku saabsan xuquuqda aadanaha oo uu ku jiro caafimaadka taranka. Soomaaliya waxaa ka jira dib u dhac loogu yeero dib u dhaca afaraad oo ah in hooyada imaaneyso xarunta loo soo tilmaamo si nafteeda loo badbaadiyo, waxaana loo sameeyaa adeegyo sida; in hooyada ilmaha lagu qalo, dhiig ku shubis, iyo in la daryeelo markii hooyada dhiciso iwm. Waxaana marar badan loo diidaa adeegyada sababo la xiriira oggolaansho la'aan. Oggolaanshaha dhaqan ahaan ma saxiixi karto haweeneyda lafteedu, balse waxa loo baahan yahay inay saxiixaan rag qaraabo ah (sida walaal, adeer, aabbe iwm) ama ninkeeda. Tani waxay sababtaa dib u dhac aan loo baahnayn oo mararka qaarkood sababa dhimashada hooyada iyo ilmaha uurka ku jira gudaha Cisbitaallada, halkaas oo lagu bixiyo dhammaan adeegyada lagama maarmaanka ah. Arrintani waxay u baahan tahay in ay ka fiirsadaan dhammaan dhinacyada ay khusayso.

Hay'adda UNDP ayaa sidoo kale la shaqeyso ururrada maxalliga ah si kor loogu qaado wacyigalinta xuquuqda aadanaha ee Soomaaliya. UNDP waxay taageertaa hindisayaasha ay bulshadu hoggaamiso ee kor u qaadaya xuquuqul insaanka waxayna siisaa tababarro iyo taageero hogaamiyayaasha bulshada iyo ururrada.

Intaa waxaa dheer, dhawr urur oo bulshada rayidka ah ayaa ka shaqeynaya horumarinta xuquuqul insaanka Soomaaliya, oo ay ku jiraan Xarunta Xuquuqul Insaanka Soomaaliya, waxayna sameysaa cilmi baaris iyo u doodista arrimaha xuquuqul insaanka, sidoo kale Ururka Xuquuqul Insaanka Soomaaliyeed ayaa bixiya taageero dhanka sharciga ah iyo adeegyo doodiseed oo dhibanayaasha xadgudubyada xuquuqul insaanka loo geysto.

Iyadoo ay jiraan dadaalladaas, xadgudubyada xuquuqul insaanka ayaa weli ah dhibaato weyn oo ka jirta Soomaaliya, waxaana loo baahan yahay in la qabto hawlo kale oo badan si kor loogu qaado dhawrista xuquuqda aadanaha ee bulshada oo dhan.

9. QAYBTA 7AAD: ISKAASHIGA CAALAMIGA



Iskaashigu waa istiraatijiyad ikhtiyaari ah oo u dhexeeya laba shakhsi ama ka badan, hay'ado, ururo, bulshooyin iyo dawlado. Guud ahaan, iskaashigu wuxuu muujinayaa xallinta dhibaata wadajirka ah, iyada oo loo marayo wadaagga khataraha, mas'uuliyadaha, dhaqaalaha iyo awoodda faa'iido wadaagga ah ee dhammaan dhinacyada iskaashigu ka dhaxeeyo, kuwaasi, waxay ka duwan yihiin xiriirka samafalka iyo heshiisyada. Laga soo bilaabo 1990-meeyadii, iskaashiga ka dhexeeya kooxo kala duwan, oo ay ku jiraan aasaaska, ururrada ganacsiga iyo shirkadaha gaarka loo leeyahay, ayaa si kordhaysa waxay noqdeen qeyb muhiim ah ee ka mid ah shaqooyinka badan oo Qaramada Midoobay. Iskaashatada guuleysata waxay keentaa in mid kasta oo ka mid ah iskaashatada in lagu soo dhaweeyo miiska wada hadalka, taas oo keenaysa isku xirnaasho iyo wada-abuuris wax cusub oo keenaya hormar waara.

9.1. HABABKA ISKAASHIGA IYO ISUDUWIDDA DALALKA CARABTA IYO KUWA AAN CARABTA AHAYN EE DHANKA DADWEYNAHA

Soomaaliya waxay xiriir dhaqan, diineed, iyo ganacsi soo jireen ah la leedahay waddamada Carabta. Soomaaliya waxay ku biirtay ururka Jaamacadda Carabta sanadkii 1974-kii. 1980-meeyadii, Soomaaliya waxay la lahayd xiriir dhaqan-dhaqaale dawladihii khaliijka ee kala ahaa Kuweyt, Qadar, Sacuudi Carabiya iyo Imaaraadka Carabta.

Soomaaliya waxay adeegsan kartaa habab kala duwan si ay iskaashi ula yeelato dalalka Carabta iyo kuwa aan Carabta ahayn ee dhinaca horumarinta dadweynaha. hababkan waxaa ka mid ah:

La shaqeynta ururrada Gobolka iyo kuwa caalamiga ah: Soomaaliya waxay kaashan kartaa ururrada gobolka iyo kuwa caalamiga ah ee diiradda saara

arrimaha dadweynaha, sida hay'adda UNFPA iyo Jaamacadda Carabta. Ururradani waxay leeyihiin madal ay waddamada ku wadaagaan macluumaadka, agabka iyo khibrada wax ka qabashada arrimaha dadweynaha.

Ka-qeybgalka heshiisyada laba geesoodka ah : Soomaaliya waxay heshiisyo laba geesood ah la sameyn kartaa waddamo kale si ay isaga kaashadaan arrimaha dadweynaha, (kala dheeraynta dhalmada, caafimaadka hooyada iyo kororka tirada dadka). Heshiisyadaasi waxay noqon karaan kuwo u dhexeeya dalalka dariska ah ama kuwo ay wada leeyihiin dano iyo hadafyo gaar ah.

Ka wada shaqeynta cilmi-baarista iyo xog isweydaarsiga: Soomaaliya waxa ay dalalka kale kala kaashan kartaa cilmi-baarista iyo xog-isweydaarsiga si loo fahmo, isbedellada, jiheynta iyo caqabadaha dadweynaha. Wadaagista macluumaadka iyo xogta waxay ka caawin kartaa Soomaaliya iyo

dalalka kalaba inay horumariyaan siyaasado iyo barnaamijyo waxtar u leh arrimaha dadweynaha.

Aqoon-kororsi iyo tababarka: Soomaaliya waxay la shaqeyn kartaa waddamada kale si ay Aqoon-kororsi u sameyso ayna u siiso tababarro shaqaalaha caafimaadka, siyaasad-dejiyeyaasha, iyo daneeyayaasha kale ee arrimaha dadweynaha, iyada oo loo marayo hindisaha iskaashiga saddex geesoodka ah ee Koonfur illaa Koonfur (The south to south Triangular). Tani waxay gacan ka geysan kartaa xaqiijinta in Soomaaliya ay yeelato xirfado iyo aqoon ay ku hirgeliso barnaamijyo dadweyne oo waxtar leh.

Ka qaybgalka hindisiyaal wadajir ah iyo barnaamijyo: Soomaaliya waxay ka qeyb qaadan kartaa hindisayaasha iyo barnaamijyada wadajirka ah ee dalalka kale si wax looga qabto arrimaha dadweynaha. Kuwaas waxaa ka mid noqon kara dadaallo lagu horumarinayo kala dheereynta dhalmada, yareynta dhimashada hooyada iyo wax ka qabashada arrimaha bulshada iyo dhaqaalaha oo gacan ka geysta kobaca dadweynaha.

Guud ahaan, iskaashiga iyo isuduwidda dalalka Carabta ah iyo kuwa aan Carabta ahayn ayaa Soomaaliya ka caawin kara in ay wax ka qabato caqabadaha dadka iyo horumarinta caafimaadka iyo fayyo-qabka dadkeeda.

9.2 WADASHAQEYNTA HAY'ADAHA GOBOLKA IYO KUWA CAALAMIGA AH EE HORUMARINTA DADWEYNAHA

Hay'adaha Qaramada Midoobay ee ka hawlgala Soomaaliya ayaa wada shaqeyn xilliyo kala duwan ah la sameeya Soomaaliya. Qaab-dhismeedka hadda jira ee loogu yeero Qaab-dhismeedka Horumarinta Joogtada ah ee Qaramada Midoobay 2021-2025 wuxuu ka dhigan yahay sida ay uga go'an tahay Dawladda Federaalka ah ee Soomaaliya iyo Qaramada Midoobay inay si wadajir ah uga shaqeeyaan si loo gaaro nabad, xasillooni iyo barwaaqo dhammaan Soomaalida si ay u taageeraan Ajendaha 2030 iyo Himilooyinka Horumarinta Waara (UNFPA, 2022).

Qaab-dhismeedka Iskaashiga wuxuu ka tarjumayaa sida ay hay'adaha Qaramada Midoobay ee ka

kooban 24 hay'adood in taageeraan, mudnaantana siiyaan nabadda iyo horumarka Soomaaliya iyo in si buuxda loo waafajiyo taageerada Qorshaha Horumarinta Qaranka Sagaalaad ee Soomaaliya si ku dhisan shuraako, iskaashi, hufnaan iyo is ixtiraam, si waafaqsan Iskaashiga Cusub ee Soomaaliya 2017kii. Qaab-dhismeedka Iskaashiga wuxuu sidoo kale u adeegaa la xisaabtanka Qaramada Midoobay ee dawladda Federaalka Soomaaliya iyo dadkeeda.

Qaab-dhismeedka iskaashiga wuxuu ku dhisan yahay xaqiijinta in la xoojiyo guulihii hore iyo in la dardargeliyo geeddi-socodka horumarka waara, caqabadaha faraha badan ee isku dhafan ee keenaya iska-horimaadka iyo nuglaanta waa in si wadajir ah loo wajaho.. Qaab-dhismeedka Iskaashiga waxaa loo qaabeeyey ilaa afar qeybood oo istaraatiijiyadeed oo mudnaan leh kuwaas oo ka tarjumaya tiirarka Qorshaha Horumarinta Qaranka sagaalaad, kuwaas oo kala ah 1) Siyaasadda loo dhan yahay iyo dib u heshiisiinta, 2) Amniga iyo sarreynta sharciga, 3) Horumarinta Dhaqaalaha, iyo 4) Horumarinta Bulshada. Kuwaas oo natiijooyinkoodu isku dhafan taageerayaan ama xoojinayaan Yoolalka horumarka waara.

Dhammaan arrimaha mudnaanta leh iyo natiijooyinka qaab-dhismeedka iskaashiga waxaa taageeraya mabaadi'da xuquuqul insaanka iyo hadafka Qaramada Midoobay ee ah "in aan cidna laga tagin". Si loo habeeyo isku-xirka saddex-geesoodka ah (bini'aadannimada, horumarka iyo iskaashiga nabadda) ee guud ahaan shaqada wadajirka ah ee Qaramada Midoobay ee Soomaaliya. Qaab-dhismeedka Iskaashiga wuxuu mideynayaa nabad-dhisidda, horumarka iyo adkeysiga, si uu gacan uga geysto wax ka qabashada dayaca nuglaanshaha daba dheeraaday iyo caqabadaha ka hor-istaagaya Soomaaliya inaay gaarto himilooyinka horumar waara.

Si loo xaqiijiyo dhaqan gelinta wax ku oolka ah ee qaab-dhismeedka Iskaashiga iyo in la taageero dhisidda awoodaha hay'adaha dawladda Soomaaliya, Qaramada Midoobay waxa ay ballanqaadaysaa in ay keento awooddeeda, khibraddeeda iyo dhaqaalaheeda heer dal, gobol iyo heer caalami ahba.

9.3 ARRIMAHA MUHIMKA AH EE LA XIRIIRA HORUMARKA DADWEYNAHA AYAA AH IN LA SII XOOJIYO WADASHAQEYNTA GOBOLKA

Waxaa jira dhawr arrimood oo muhiim u ah arrimaha hormarinta dadweynaha kuwaas oo ay tahay in la xoojiyo iskaashiga gobolka. waxaana ka mid ah:

Caafimaadka Hooyada iyo Dhallaanka: Soomaaliya waxay ka mid tahay kuwa ugu sareeya heerarka dhimashada hooyada iyo dhallaanka adduunka. Wadashaqeynta gobolku waxay gacan ka geysan kartaa horumarinta helitaanka adeegyada caafimaadka hooyada iyo dhallaanka, oo ay ku jiraan daryeelka dhalmada ka hor, umuliso xirfad leh, nafaqo iyo tallaallo.

Caafimaadka Taranka: Soomaaliya waxay leedahay heer taran oo sarreeya iyo kala dheeraynta dhalmada oo hooseeya, taasoo gacan ka geysata heerka dhimashada hooyada iyo dhallaanka oo sarreeya iyo kobaca dadweynaha. Iskaashiga gobolku wuxuu gacan ka geysan karaa kordhinta helitaanka adeegyada kala dheeraynta dhalmada iyo hagaajinta natiijooyinka caafimaadka taranka ee haweenka iyo gabdhaha Soomaaliyeed.

Awood siinta Dhallinyarada: Soomaaliya waxaa ku nool dhallinyaro aad u badan oo koreysa, iyadoo dhallinyaro badan ay soo wajahday shaqo la'aan aad u sarreysa iyo fursadaha waxbarasho iyo tababarrada oo kooban. Wadashaqeynta gobolku waxay gacan ka geysan kartaa abuurista fursado lagu xoojinayo dhallinyarada, oo ay ku jiraan maalgashiga waxbarashada, tababarrada xirfadaha iyo hal-abuurka ganacsiga.

Sugnaanta cuntada iyo Nafaqada: Soomaaliya waxa ay wajahaysaa caqabado waaweyn oo ku aaddan xaqiijinta sugnaanta cuntada iyo wax ka qabashada nafaqo-darrada, gaar ahaan dadka u nugul sida caruurta iyo haweenka uurka leh iyo kuwa nuujinaya. Iskaashiga gobolku wuxuu gacan ka geysan karaa wax ka qabashada caqabadahan iyadoo la taageerayo horumarinta beeraha, hagaajinta hababka cunto qeybinta iyo kor u qaadista aqoonta nafaqada.

Kaabayaasha iyo Horumarinta dhaqaalaha: Soomaaliya waxa ka jira hoos u dhac weyn oo dhanka kaabayaasha ah iyo fursadaha dhaqaale oo xaddidan, kuwaas oo hor istaagi kara horumarka,

siina kordhin kara caqabadaha dadweynaha. Iskaashiga gobolku wuxuu gacan ka geysan karaa wax ka qabashada arrimahan iyadoo la taageerayo maalgashiga kaabayaasha, kor u qaadista ganacsiga gobolka iyo isdhexgalka dhaqaalaha iyo fududeynta horumarinta ganacsiga gaarka loo leeyahay.

Isku soo wada duuboo, xoojinta iskaashiga gobolka ee ku aaddan arrimaha dadweynaha iyo horumarinta ayaa Soomaaliya ka caawin kara in ay wax ka qabato caqabadaha iyo fursadaha la wadaago iyo kor u qaadidda horumar loo dhan yahay oo waara guud ahaan dalka.

9.4 AHMIYADDA HORUMARINTA DADWEYNAHA EE U BAAHAN TAAGEERADA FARSAMADA EE HAY'ADAHA QARAMADA MIDOUBEY

Soomaaliya waxaa soo food saartay caqabado waaweyn oo dhanka dadka iyo horumarka ah oo u baahan taageero farsamo oo ka timaada hay'adaha Qaramada Midoobay. Waa kuwan qaar ka mid ah dhinacyada u baahan taageero farsamo:

Caafimaadka Hooyada iyo dhallaanka: Soomaaliya waxay ka mid tahay waddamada ugu sareeya heerarka dhimashada hooyada iyo dhallaanka adduunka, hagaajinta natiijooyinka caafimaadka hooyada iyo dhallaanka ayaa muhim ah. Hay'adaha Qaramada Midoobay waxay bixin karaan taageero farsamo oo lagu wanaajiyo tayada laguna daboolayo adeegyada caafimaadka hooyada iyo dhallaanka, oo ay ku jiraan tababaridda shaqaalaha caafimaadka, hormarinta kaabayaasha caafimaadka iyo xoojinta nidaamyada caafimaadka.

Caafimaadka Taranka: Soomaaliya waxay leedahay heer taran oo sarreeya iyo kala dheeraynta dhalmada oo hooseeya, taasoo gacan ka geysata heerka dhimashada hooyada iyo dhallaanka oo sarreeya iyo kobaca dadweynaha. Hay'adaha Qaramada Midoobay waxay bixin karaan taageero farsamo oo lagu wanaajinayo helitaanka adeegyada kala dheeraynta dhalmada, oo ay ku jirto bixinta ka hortagga uurka, iyo wacyigelinta bulshada.

Xog ururinta iyo falanqaynta: Xogta la isku haleyn karo ayaa muhiim u ah horumarinta siyaasadaha iyo barnaamijyada dadweynaha. Hay'adaha Qaramada Midoobay waxay ku bixin karaan taageero farsamo oo lagu xoojinayo hababka xog

ururinta iyo falanqeynta ee Soomaaliya, oo ay ku jiraan dhisidda awoodda, kaalmada farsamada iyo taageerada sahanada iyo cilmi-baarista.

Awood-siinta Dhallinyarada : Soomaaliya waxaa ku nool dhallinyaro aad u badan oo soo koraya, wax ka qabashada baahiyaha dhallinyarada ayaa muhiim ah. Hay'adaha Qaramada Midoobay waxay siin karaan taageero farsamo oo lagu horumarinayo laguna hirgelinayo barnaamijyo dhallinyaro, oo ay ku jiraan waxbarashada iyo tababarrada farsamada gacanta, hal-abuurka ganacsiga iyo ka-qeybgalka bulshada.

Gargaarka bini'aadannimo: Soomaaliya waxaa soo wajaha dhibaatooyin bini'aadannimo oo joogto ah, oo ay ku jiraan colaado, abaaro iyo barakac. Hay'adaha Qaramada Midoobay waxay ku bixin karaan taageero farsamo oo lagu gaarsiinayo gargaarka bini'aadannimo si isku xiran oo wax ku ool ah, oo ay ku jirto bixinta adeegyada caafimaadka, nafaqeynta, biyaha iyo faya-dhawrka.

Guud ahaan, taageerada farsamo ee hay'adaha Qaramada Midoobay ayaa muhiim u ah wax ka qabashada caqabadaha dadka Soomaaliyeed iyo kor u qaadida horumar loo dhan yahay oo waara guud ahaan dalka.

10. TIXRAAC

Directorate of National Statistics, M. F. (2020). *Somali Health and Demographic Survey*. <https://www.nbs.gov.so/somali-health-demographic-survey-2020>

Environmental and Social Management Framework. (2021). *Somalia Capacity Advancement, Livelihood and Entrepreneurship, Through Digital Uplift Program (Scaled-Up)*. https://mof.gov.so/sites/default/files/Publications/Somalia%20SCALED-UP%20AF-%20Environment%20and%20Social%20Management%20Framework%20Final_O.pdf

Ministry of Communications and Technology (MOCT). (2019). *National ICT Policy and Strategy (2019-2024)*. <https://mof.gov.so/en/wp-content/uploads/2019/11/National-ICT-Policy-Strategy-2019-2024.pdf>

Somalia National Bureau of Statistics. (2023). Survey on Nomadic Movement into IDP Camps in Mogadishu, Kismayo, Beledweyne & Baidoa. www.nbs.gov.so

The Ministry of Planning, I. and E. D. (2020). *Somalia National Development Plan 2020 to 2024*. <https://mop.gov.so/wp-content/uploads/2022/07/Somali-National-Development-Plan-9-2020-2024.pdf>

UNFPA. (2014). *Population Estimation Survey for Somalia*. <https://somalia.unfpa.org/sites/default/files/pub-pdf/Population-Estimation-Survey-of-Somalia-PESS-2013-2014.pdf>

UNFPA. (2022, May). *UNFPA Support in the Development of Midwifery profession in Somalia and Somaliland*. Development of Midwifery Profession in Somalia and Somaliland.

United Nations. (1995). *Report of the International Conference on Population and Development: Cairo, 5-13 September 1994*. United Nations. <https://documents-dds-ny.un.org/doc/UNDOC/GEN/N95/231/26/IMG/N9523126.pdf?OpenElement>

United Nations. (2013). Development Challenges and Population Dynamics in a Changing Arab World Cairo Declaration Regional Conference on Population and Development in the Arab States.

- World Bank. (2018). *Somalia Economic Update*. <https://documents1.worldbank.org/curated/en/975231536256355812/pdf/REPLACEMENT-PUBLIC-Somalia-Economic-Update-3-FINAL.pdf>
- World Bank. (2020). *Ministry of Finance, Federal Government of Somalia*. Somalia Crisis Recovery Project. <https://mof.gov.so/the-ministry/programs/somalia-crisis-recovery-project>
- Directorate of National Statistics, M. F. (2020). *Somali Health and Demographic Survey*. <https://www.nbs.gov.so/somali-health-demographic-survey-2020>
- FESTU. (2021). *Somalia's ratification of seven (7) ILO Conventions represents new hope for workers*. <https://www.festu.org/somalias-ratification-of-seven-7-ilo-conventions-represents-new-hope-for-workers/>
- IMF. (2020). *Somalia Debt Relief Updates*. <https://www.imf.org/en/News/Articles/2020/03/25/pr20104-somalia-somalia-to-receive-debt-relief-under-the-enhanced-hipc-initiative>
- UNFPA. (2014). *Population Estimation Survey for Somalia*. <https://somalia.unfpa.org/sites/default/files/pub-pdf/Population-Estimation-Survey-of-Somalia-PESS-2013-2014.pdf>
- UNFPA. (2019). *Somalia's Statement of ICPD25 Commitment*. <https://www.nairobisummiticpd.org/commitment/somalias-statement-commitment>
- UNFPA. (2022). *Population Situation Analysis for Somalia*.
- United Nations. (1995). *Report of the International Conference on Population and Development : Cairo, 5-13 September 1994*. United Nations. <https://documents-dds-ny.un.org/doc/UNDOC/GEN/N95/231/26/IMG/N9523126.pdf?OpenElement>
- United Nations. (2013). *Development Challenges and Population Dynamics in a Changing Arab World*. Cairo Declaration Regional Conference on Population and Development in the Arab States.
- World Bank. (2022). *Strengthening Somalia's Institutions to Improve Service Delivery to Citizens*. <https://www.worldbank.org/en/news/press-release/2022/12/22/strengthening-somalia-s-institutions-to-improve-service-delivery-to-citizens>

11. DADKII QAYBTA KA AHAAN SHAQADAN

1. Cabdiraxmaan Cumar Daahir (Kuxigeen Agaasimaha Guud, HIQS)
2. Cabdi Maxamuud Cali (Agaasimaha Tirakoobka, Hay'adda Istaatistikada Qaranka Soomaaliyeed)
3. Cabdixakiim Cabdullaahi (Sarkaalka barnaamijka, da'yarta iyo Dhallinyarada, UNFPA)
4. Cabdiqaadir Maxamuud Maxamed (Xoghayaha Waaxda Shaqaalaha, Wasaarada Haweenka iyo Xuquuqda Aadanaha)
5. Cabdimaalik Maxamed Guure (Sarkaalka Mashruuc ee Somali Inclusion Youth Association)
6. Cabdirahman Maxamed Sheekh Cabdi (Madaxa Qeybta Socdaalka iyo Barakacayaasha, HIQS)
7. Cabdiraxmaan Cusmaan Caalim (Madaxa Qeybta istaatistikada Jaamacada Umadda ee Soomaaliyeed)
8. Cabdiwali Xassan Jaamac (La-taliyaha Iskuxirka, iyo khabiir Dhanka Wadaaga ah, HIQS).
9. Cabdiqaadir Maxamed Macaw, (Madaxa Siyaasadda iyo Qorsheynta, Wasaaradda Waxbarashada, Hiddaha iyo Tacliinta Sare)
10. Abdullahi Adam Abdi (La-taliye Maamulka iyo Maaliyadda ah, Wasaarada Shaqada iyo Arrimaha Bulshada)
11. Cabdulrizaaq Kaariye (Demographer, HIQS)
12. Deeqa Galal (Falanqeyye SRH, UNFPA)
13. Dr. Cabdulqaadir Weheliye Afrax, (La-taliye sare RMNCAH, Wasaarada Caafimaadka iyo Adeegga Bulshada)
14. Dr. Naciima Cabdulqaadir Maxamed (Falanqeyye SRH, Maamule Hooyada iyo Caafimaad taranka, Wasaarada Caafimaad iyo Adeegga Bulshada)
15. Dr. Ubaax Faarax Axmed (Khabiir Caafimaadka Hooyada iyo dhallaanka, iyo Agaasimaha Qeybta Caafimaad Qoyska, Wasaaradda Caafimaadka iyo Adeegga Bulshada)
16. Dr. Axmed Aweys (Khabiir Hooyada iyo Caafimaadka Taranka, UNFPA)
17. Fartuun Maxamed (Caawiye dhanka Iskuxirka ah, UNFPA)
18. Felix Mulama (Khabiir sare Macluumaadka Dadka ah, UNFPA)
19. Haider Rasheed (Khabiir Kormeerka iyo Qiimeynta ah, UNFPA)
20. Xamiida Shiil (Isku-duwaha MICS, HIQS),
21. Haashim Cabdinuur (Agaasimaha Waaxda Dhaqaalaha iyo Istaatistikada Maaliyadda, HIQS)
22. Xuseen Shariif Xassan (Maamulka, Wasaarada Haweenka iyo Xuquuqda Aadanaha).
23. Ibraahim Maxamed Nuur (Khabiir Maamulka Xogta Caafimaadka, Wasaarada Caafimaad iyo Adeegga Bulshada)
24. Mohamed Mursal (Khabiir Barnaamijyada ah, Tacadiyada ka Dhanka ah Haweenka, UNFPA)
25. Maxamed Mursal Maxamed (Madaxa Qeybta Shaqaalaha, Wasaarada Ciyaaraha iyo Isbortiska)
26. Nkiru Igbelina-Igbokwe (Khabiir Tacadiyada ka Dhanka ah Haweenka /Jinsiga, UNFPA)
27. Richard Ng'etich (Statistician, UNFPA)
28. Siciid Cabdillaahi Cabdi (Agaasimaha Agaasinka Istaatistikada bulshada iyo dadweynaha, HIQS)
29. Salaad Xuseen Cabdulle (Agaasimaha Waaxda Qorsheynta iyo Cilmi baarista, Wasaarada Shaqada iyo Arrimaha Bulshada)
30. Jaamac Barre Xareed (Statistician, HIQS)
31. Amal Maxamed Abuubakar (Khabiir Dhanka Qiimeynta iyo Dabagalka, HISQ)
32. Cabdiraxmaan Cumar Cali (Madax Qaybeedka Istaatistikada Dadka, HIQS)
33. Cabdicasiis Cabdullaahi Maxamed (Demographer, HIQS)
34. Fu'aad Xuseen Cabdi (Lataliyaha Qeybta Socdaalka iyo Barakacayaasha, HIQS)

